Dugsiyada Dadweynaha Cambridge

2020-21

Tilmaamaha Siyaasadda Ardayda iyo Qoysaska

Waa in la dhamaystiro DHAMAAN foomamka ku jiro buugyaraha Foomamka Sannadka Ardayga loona soo dhiibo ardayda si ay ugu soo celiyaan macalinka qaabilsan MAALINTA KOWAAD DUGSIGA.

Tarjamada daabacaadaan waxaa laga heli karaa bogga CPS: www.cpsd.us.

Tusmada

Qeybta Sharaxaadda # Bogga

1. Asturnaanta Ardayga 6

2. Diiwaanada Ardayga 7

3. Macluumaadka Xariirinta Aasaaska ee la Siiyo Shirkadaha Qora Militariga, Loo Shaqeeyeyaasha, Kulliyadaha, iyo Jaamacadaha 9

4. Ogeysiiska Xuquuqda Sida Hoos Timaada Xuquuqda Aqoonta Qoyska iyo Sharciga Asturnaanta (Family Educational Rights and Privacy Act) (FERPA) 9

5. Xogta Ardayga iyo Brograamyada Tababarka Internetka 12

6. Imaashada 12

7. Cunugga u Baahan Kaalmo (CRA) 14

8. Ogeysiis Ku Saabsan Ardayda Ka Tagta Dugsiga 14

9. Ku Xadgudubka Cunugga 14

10. Daryeelka iyo Falalka Badbaadinta 15

11. Cunugga aan xisaabta ku jirin ama Cunugga Maqan 16

12. Gaadiidka 16

13. Qaadidda Imtixaanka Laga Siman Yahay 16

14. Aqoonta Jinsiga 16

15. Celcelinta Jirka 17

XEERARKA ASLUUBTA 23

16. Horudhaca 23

17. Falsafada 23

Siyaasadaha Dabeecadda iyo Dishibiliinka 24

18. Cabidda Sigaarka: Siyaasadda Ka Madaxbanaan Tubaakada 24

19. Mamnuuca ka soo Horjeedo Mukhadaraadka, Hubka iyo Weerarka Loo Geysto Shaqaalaha Dugsiga 24

20. Siyaasadda Mukhaadaraadka 25

21. Siyaasadda Hubka 25

22. Weerarka Shaqaalaha 26

23. Ardayda Lagu Eedeeyo ama Lagu Xakumo Dambi Culus 26

24. Kadeedka 26

25. Jejebinta 28
26. Dagaalka/Weerarka Jirka 28
27. Siyaasadda ka soo Horjeedo Gardareysiga iyo Ka Hortagga Gardareysiga iyo Qorshaha Faragelinta 29
28. Siyaasadda Ka Soo Horjeedo Jujuubka Dhallinta 38
Dacwadaha Dishibiliinka (Habka Sharciga) 40
29. Ka-Joojinta 40
30. Ka Saaridda 41
31. Baaritaanka iyo Su'aalaha la Weydiiyo Ardayga 42
32. Habka Cabbashada Ardayga 43
33. Ka qeybgalka Hawlaha Ka Baxsan Manhajka 44
XUQUUQDA IYO AXSAANKA 44
34. Takoor La'aanta ka soo Horjeedo Ardayda 44
35. Siyaasadda Guryaha Macquulka iyo Hababka 44
36. Ogeysiiska Xuquuqda Hoos Yimaada Qeybta 504 Sharciga Dayactirka 1973 45
37. Waxbarashada Khaaska 46
38. Ardayda Qabta IEP iyo Qorshooyinka 504 46
39. Talaabada Sinaanta (Affirmative Action)/ Ogeysiiska Takoorka La'aanta 48
40. Xariiriyaha Aqoonta Guri Laawaha 49
41. Xorriyadda Isu Imaashada 49
42. Xoriyadda Hadalka 49
43. Xoriyadda Qofka 49
44. Siyaasadda Takoor La'aanta iyo Mamnuuca Kadeedka Jinsiga 50
45. Guurka Ardayga, Xaamilonimada iyo Waalidnimada 51
46. Iskuduwaha Cutubka IX 51
47. Xorriyadda Diinta 51
48. Tilmaamaha Xilka Leyska Saaro u Hoggaansamida 52
SIYAASADAHA GUUD IYO TILMAAMAHA MAAMULKA 52
49. Siyaasadda Isticmaalka La Ogolaan Karo ee Shabakada Kombuyutarka 52
50. Xeerka Asluubta Brograamyada Kombuyutarka 55
51. Dadka soo Booqda Dugsiga 56

52. Lama Ogola Baabuurta Meelaha Looga Tago 56
53. Lokarada Ardayga 56
54. Macluumaadka Diiwaanka Gafaha Dambiga 57
55. Safarada Dibadda 57
56. Talaalka 59
57. Ka-qeybgalka Qoyska 59
58. Gudubka iyo Celinta 59
59. Siinta Daawada la Qoro iyo Maamulka Xasaasiyadda Raashinka Halista Geliya Nolosha 60
60. Siyaasadda Fiyoobida 60
61. Dhaawaca Madaxa ee la Xariira-Isboortiga Iyo Jugta 62
62. Siyaasadda HIV/AIDS 63
63. Tababarka Ardayda Laga Siiyo Mukhadaraadka, Qamrada, Tubaakada iyo Ka Hortagga Ku Xadgudubka Maadada 64
64. SBIRT (Baarista, Faragelinta Kooban iyo Tixraaca Daaweynta) 64
65. Qiimeynta Manhajka 64
66. Mamnuuca Tubaakada la Isticmaalo Gudaha Xerada Dugsiga 65

Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waa loo shaqeeye bixiya fursadaha siman, wuxuu ballan qaaday in uu dhamaan ardayda siiyo brograamyada waxbarashada tayada leh. Dugsiyada Dadweynaha Cambridge ma sameyaan takoor ku saleysan isir, midab, asal qaran, jinsiyad, abtirsiino, diin, da', itaal darri, macluumaadka geneetikada, xaaladda ciidamada hawlagabka, xaaladda guurka, jinsiga, aqoonsisga jaadka qofka, jinsiga qofka, xaamilonimada ama xaalad la xariirta xaamilonimada, xagga brograamyadeeda iyo hawlaheeda, waxay sinaan siisaa Boy Scouts iyo kooxaha kale dhallinta la tilmaamay.

SOOCIDDA IYO GELINTA FOOMAMKA SANNADKA ARDAYGA SI LOO DHAMAYSTIRO, LA SAXIIXO LANA SOO CELIYO

Casriyeynta ugu Dambaysay: Luulyo 2019

1. Asturnaanta Ardayga

CPS waxay raadisaa hubinta asturnaanta ardayda tagta dugsiyadeeda hab waafaqsan sharciga federaalka iyo gobolka, sida Sharciga Xuquuqda Waxbarashada Qoyska Federaalka iyo Sharciga Asturnaanta iyo sharciyada diiwaanada ardayga Massachusetts iyo sidoo kale Siyaasadda Asturnaanta Ardayga (Student Privacy Policy) ee Guddiga Dugsiga Cambridge. Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan arrimaha asturnaanta ardayga, la xariir agaasimaha dugsigaada/madaxa qeybta sare dugsiga.

Badbaadinta Baddalaadda Xuquuqda Cunugga (Protection of Pupil Rights Amendment) (PPRA), qeybta 1232h cutubka 20 Xeerka Mareykanka (United States Code), wuxuu waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka siiyaa xuquuq gaar ah oo ku saabsan fullinta wareysiyada dugsiga dagmada, aruurinta iyo isticmaalka macluumaadka loo adeegsado suuq geynta, iyo qaar ka mid ah baarista jirka. Waxaa ka mid ah xaqa loo leeyahay:

- Ogolaashada ka hor inta ardayda aan laga dalbanin in ay soo gudbiyaan wareysi oo quseeyo mid ama ka badan maadooyinka la badbaaiyo ee soo socda ("wareysiga macluumaadka la badbaadiyo") haddii wareysiga laga maalgeliyo brograam ay leedahay Waaxda of Waxbarashada Mareykanka (U.S. Department of Education) (1) qofka u leeyahay in uu raaco laamaha siyaasadda ama caqiidada ardyaga ama caqiiqadada waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka; (2) dhibatooyinka madaxa ama cilmu nafsiga ee soo gaara ardayga ama qoyska ardayga; (3) dabeecadda jinsiga ama dhaqanka; (4) dabeecadda sharci darrada, ka soo horjeedo bulshonimada, is eedeynta, ama dabeecadda yassidda; (5) qiimeynta muhiimka ah ee loo jeediyo dadka kale ay kuwa ay quseeyso la leeyahiin xariir qoys sokke; (6) xariir sharci ahaan la aqoonsan yahay, sida qareenada, takhaatiirta, ama wasiirada; (7) dhaqanka diinta, waxyaabaha la raacsan yahay, ama caqiiadada ardayga ama waalidiinta; ama (8) dakhliga, marka laga reebo sida sharciga rabo si loo ogaado xaq u yeelashada brograamka.
- Hel ogeysiis iyo fursad aad arday uga saartid: (1) wareysiga macluumaadka kale ee la badbaadiyo, iyadoo aan la fiirinin maal gelinta; (2) baaritaanka aan degdegga ahayn, baaritaanka jirka ama baaritaanka hore ee loo baahan yahay sida shardiga tagidda, uu dugsiga ama wakiilkeeda bixiyo, aan ahayn lagama maarmaan si loo badbaadiyo caafimaadka degdegga iyo ammaanka ardayga marka laga reebo maqalka, aragga, ama baaritaanada lafo xanuunka, ama baaritaan kasta oo la xariira jirka ama baaritaanka la ogol yahay ama la rabo sida hoos timaado sharciga Gobolka; iyo (3) hawlaha ku lugta leh aruurinta, kashifaadda, ama isticmaalka macluumaadka shakhsiga ee laga helo ardayda loona adeegsado suuq geynta ama in lagu iibiyo ama si kale macluumaadka loogu qeybiyo dadka kale.
- Fattash, marka la codsado iyo ka hor inta aan la siinin ama la isticmaalin: (1) wareysiyada macluumaadka la badbaadiyo ee ardayda; (2) waxyaabaha la adeegsado si ardayda looga aruuriyo macluumaadka shakhsiga xagga ujeedooyinka suuq geynta, iibinta, ama qeybin kasta oo kale; iyo (3) waxyaabaha loo adeegsado sida qeyb ka tirsan manhajka waxbarashada.

Xuquuqdaan waxaa laga wareejiyaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, waxaana lagu wareejiyaa ardayga jira 18 sanno ama cunug yar oo qaangaaray sida waafaqsan sharciga Gobolka.

CPS waxay qaadatay siyaasadaha, kaddib marka ay la tashatay waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, arrinta ku saabsan xuquuqdaan, iyo qorshaha lagu badbaadinaayo asturnaanta ardayga xagga maamulka wareysiyada macluumaadka la badbaadiyo iyo aruurinta, kashifaadda, ama isticmaalka macluumaadka shakhsiga ee loo adeegsado suuq geynta, ama iibinta, ama ujeedooyinka kale ee la xariira qeybinta. CPS waxay toos u ogeysiin doontaa waalidiinta/bixiyeyaasha daryeelka siyaasadahaan ugu yaraan sannad kasta bilowga sannad dugsiyeed kasta iyo kaddib marka la fulliyo isbaddal la taaban karo. CPS waxay toos u ogeysiin doontaa, sida warqadaha lagu diro boostada (U.S. Mail) ama email, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayda ku qoran in ay ka qeybgalaan hawlaha qaar ama wareysiyada ku qoran hoos, waxay fursad siin

doonaan waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka in ay cunugooda kala baxaan ka-qeybgalka hawsha ama wareysiga. CPS waxay ogeysiiskaan siin doontaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka horaanta sannad dugsiyeedka haddii dugsiga dagmada uu aqoonsaday taariikhda la qabtay ama taariikhda la qaban doono hawlaha ama qiyaas ahaan taariikhda hawlaha ama wareysiyada waqtigaas. Wareysiyada iyo hawlaha la qabtay kaddib marka sannad dugsiyeedka bilowdo, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxaa la siin doonaa ogeysiis macquul ah oo ku saabsan hawlaha la qorsheyay iyo wareysiyada ku qoran liiska hoose iyo waxaa la siin doonaa fursad ay cunugooda uga saaran hawlaha noocaas iyo wareysiyada. Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxaa kaloo la siin doonaa fursad ay ku fiiriyaan wareysiyada munaasabka ah. Sida waafaqsan Siyaasadda Asturnaanta Ardayga (Student Privacy Policy) ee dugsiga dagmada, agaasimaha/madaa qeybta sare dugsiga cunugaada ayaa ku ogeysiin doono hawlaha u baahan ogeysiiska iyo ogolaashada waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ama ka saaridda inta ay socoto sannad dugsiyeedka. Waxa soo socdo waa liis ku saabsan hawlaha qaar iyo wareysiyada looga hadlo ee hoos yimaado shardigaan: (1) aruurinta, kashifaadda, ama isticmaalka macluumaadka shakhsiga xagga suuq geynta, iibinta, ama qeybinta kale; (2) maamulka wareysiga macluumaadka la badbaadiyo aysan ED is buuxdo ama qeyb ahaan u maal gelinin, iyo (3) baaritaanka jirka ama fattashaadda sida ku sifeysan kor.

Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ee aaminsan in xuquuqdooda la jebiyay waxay ashtako u gudbin karaan:

Family Policy Compliance Office
US Department of Education
400 Maryland Avenue, S.W.
Washington, D.C. 20202-5920
Telefoon: 800.USA.LEARN (800.872.5327)

2. Diiwaanada Ardayga

Sida hoos timaado sharciga Massachusetts, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka arday kasta, ama arday galay darajada sagaalaad ama jira ugu yaraan 14 sanno, waxay xaq u leeyahiin, kaddib marka ay codsadaan, in ay fiiriyaan diiwaanka ardayga. Waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ama ardayga xaqa u yeesho waa in la siiyo diiwaanka ardayga ugu dambayn toban maalin, codsiga kaddib, waxay codsan karaan in aqoonyaan aqoon leh uu u tarjumo diiwaanka ama uu baddalo agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga. Intaas kaddib, sharciga gobolka wuxuu dajiyaa habab gaar ah oo loo baahan yahay in dugsiyada dadweynaha raacaan ka hor inta diiwaanka ardayga aan la siinin waalidiinta aan-haynin caruurta. Dhamaan codsiyada la xariira fiirinta diiwaanka ardayga waa in loo jeeiyo agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ee dugsiga ardayga. Intaas kaddib, shaqaalaha dugsiga loo ogol yahay uu ardayga raadiyo ama ku talojiro in uu ku wareego waxaa dhici karto in ay helaan diiwaanka ardayga, lana haysanin ogolaashada ardayga xaqa u yeesha iyo/ama waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka kaddibna CPS ay diiwaanada ardayga u dirto dugsiyada uu ardayga ka raadsado ama ku talogiro in uu isku qoro.

Diiwaanka ku meel gaarka ah ee ardayga waxaa la burburiyaa ugu dambayn todobo (7) sanno ka hor kaddib marka ay qalin jebiyaan, ka wareegaan ama ka noqdaan Dugsiyada Dadweynaha Cambridge. Marka la gaaro waqtiga qalin jebinta, wareejinta ama ku noqoshada Dugsiyada Dadweynaha Cambridge, ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyaha daryeelka ardayga waxaa la siin doonaa ogeysiis qoran oo ku saabsan qiyaasta taariikhda burburinta diiwaanka ku meel gaarka ah. Shahaadada ardayga waxaa haaya waaxda dugsiga, waxaa la burburin doonaa lexdan (60) sanno kaddib marka ardayda qalin jebiyaan, la wareejiyo ama ka noqdaan Dugsiyada Dadweynaha Cambridge.

Sharciga Xuquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Asturnaanta (Family Educational Rights and Privacy Act) (FERPA), kaasoo ah sharciga Federaalka, iyo shirciga diiwaanka ardayga Massachusetts, wuxuu rabaa in dugsiga dagmada kaa helo ogolaasho qoran, marka laga reebo qaar, ka hor inta aan la kashifin macluumaadka qofka lagu aqoonsan karo lagana soo qaado diiwaanada waxbarashada cunugga. Hase ahatee, CPS waxay si wanaagsan u kashifi kartaa "macluumaadka diiwaanada" iyadoo aan haysanin ogolaasho, haddii aadan kula tallinin CPS waxa ka duwan sida waafaqsan hababka ay u dhaqanto. Ujeedada ugu weyn oo laga leeyahay macluumaadka diiwaanka waxay tahay in loo ogolaado CPS in lagu

daro noocaan macluumaadka laga soo qaaday diiwaanka waxbarashada cunugaada ee ku jira qaar ka mid ah daabacaadyada, sida bostarada xayaysiiya riwaayadda, oo muujiya kaalinta cunugaada ku leeyahay soo saarka draamada; buugga sannadka; liiska sharafta ama liisaska aqoonsiga kale; brograamyada qalin jebinta; iyo warqadaha hawsha isboortiga.

Macluumaadka diiwaanka, waa macluumaad aan guud ahaan loo aqoonsanin in ay leeyahiin dhibaato ama in ay soo galaan asturnaanta, haddii la kashifo, waxa loo kashifi karaa ururada dibaadda, lana haysanin ogolaashada qoran ee ka horeyso waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka. CPS waxay emailka u kashifi kartaa ururada dibadda sida, balse kuma eka, shirkadaha soo saara fraatiyada fasalka ama soo saara buugaagta sannadka, ujeedo kooban oo ku saabsan ardayda oo hawlahaas hay'adda ama adeegyo la siiyo ardayda. Intaas kaddib, waxaa jira labo sharci oo raba in wakaaladaha waxbarashada deegaanka (LEAs) ee qaata kaalmo sida hoos timaado Sharciga Waxbarashada Hoose iyo Sare (Elementary and Secondary Education Act) ee 1965 (ESEA) in ay kuwa ka shaqeeyo shaqaaleynta militariga siiyaan, saddax qeyb macluumaad - magacyada, cinwaanada iyo liisaska telefoonka - haddii waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha aysan kula tallinin LEA in aysan rabin in la kashifo macluumaadka ardayga ka hor inta aan la helin ogolaashadooda qoran.

CPS waxay kashiftaa macluumaadka soo socdo iyadoo aan ogolaasho laga haysanin waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka: magaca ardayga, taariikhda imaashada, fasalka ama darajada, ka qeybgalka hawlaha rasmi ahaan la aqoonsan yahay iyo isboortiga, sawirada/fiidiyowyada, ka tirsanaanta Kooxaha atleetikada, shahadooyinka, sharafta iyo abaal marrinta, daruusta muhiimka, iyo qorshooyinka dugsiga sare kaddib. Intaas kaddib, sida waafaqsan M.G.L.c. 71, §89(g), CPS, kaddib marka ay codsi ka hesho dugsiga gaarka Commonwealth, waxay magacayada iyo cinwaanada ardayda dugsiyada dadweynaha u diri doontaa dhinac saddaxaad oo ogolaasho ka helay Waaxda Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Waxbarashada Sare si dugsiga charter Commonwealth uu macluumaadka qorista u diro ardayda xaqa u yeesha in ay isku qoraan dugsiga charterka Commonwealth.

Haddii aadan rabin in macluumaadkaan la sii daayo haddii aan lagaa qaadanin ogolaasho, waa in aad ogeysiisid agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsigaada, qoraal ahaan, ugu dambayn Oktoobar 1 sannad dugsiyeed kasta. Waxaa buuggaan la socda oo ku dhex jira foomka iska-dhaafidda oo la rabo in ay buuxiyaan ardayda iyo waalidiintooda/ilaalieyaashooda/bixiyeyaashooda daryeelka, kuwaasoo aan rabin in la sii daayo macluumaadkaan.

Koobiyada sharciyada gobolka ee ku saabsan diiwaanada ardayga iyo xuquuqda waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo xuquuqda ardayda u leeyahiin diiwaanada ardayga waxaa laga heli karaa dugsi kasta.

Intaas kaddib, Guddiga Dugsiga wuxuu qorsheyay cinwaanka (cinwaanada) ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, nambarka (nambarada) telefoonka iyo emailka (emailada) iyo magaca ardayga sida "macluumaadka diiwaanka" ee laga yaabo in la siiyo kooxaha waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ku sugan dugsi gaar ah xagga ujeedada kooban oo ah soo saarka Buugga Xariirinta Qoyska (Family Contact Book) oo ku saleysan dugsiga iyo kooxaha horay uga qalin jebiyay dugsiga xagga ujeedada kooban oo ah soo saarka Diiwaanka Kuwa Horay u Qalin Jebiyay (Alumni Directory) iyo sii deynta macluumaadka noocaas waxay dhici doontaa oo keliya haddii waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga ay toos u siiyeen ogolaasho qoran oo lagu daro macluumaadkaan Buugga Xariirinta Qoyska (Family Contact Book) ama Diiwaanka Kuwa Horay u Qalin Jebisay. Haddii waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka doono in uu ka qeybgalo daabacaadyadaan, waa in uu "galo" ("opt-in) bilowga sannad dugsiyeedka.

Guddiga dugsiga wuxuu kaloo magacaabay magaca ardayga, nambarka (nambarada) telefoonka, cinwaanka guriga, iyo taariikhda dhallashada sida "macluumaadka diiwaanka" ee loo kashifi karo Maktabka Dadweynaha Cambridge, ujeedadana tahay in la soo saaro kaararka maktabka lana siiyo ardayda xanaanada Dugsiga Dadweynaha Cambridge. Kaararka maktabka waxaa la soo saari doonaa bilowga sannad dugsiyeedka waxaana la siin doonaa ardayda xanaanada ee jira shan sanno iyo ka badan, sidoo kale kaararka maktabka waxaa kaloo la siin doonaa ardayda xanaanada marka ay soo

gaaraan shan sanno inta uu socdo sannad dugsiyeedka. Haddii waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka uusan rabin in macluumaadkaan la siiyo Maktabka Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Library), isaga/iyada waa in ay "iska dhaafto" ("opt out") bilowga sannad dugsiyeed kasta.

Intaas kaddib, CPS waxay xogta ardayga la qeybsan kartaa iibiyeyaasha bixiyaha brograamyada tababarka ku saleysan keydka iyo internetka ee lala isticmaalo ardayda, taasoo ah hawsha hay'adda ama adeegga, balse oo keliya marka iibiyaha uu dugsiga dagmada la saxiixo heshiiska asturnaanta xogta ardayga si iibiyaha u shaqeeyo sida sarkaal ka tirsan dugsiga xagga bixinta brograamyadaan tababarka ku saleysan keydka iyo internetka ee ah adeegyada hay'adda iyo hawlaha ama haddii waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyaha daryeelka horay u saxiixeen foomka ogolaashada qoran ee ardayga. Liiska ilaha internetka iyo kuwa tababarka ee ku saleysan keydka (cloud) waxaa laga heli karaa: bit.ly/CPSDigRes

Shaqo kasta uu ardayga soo saaro kuna keydiyo kombuyutarada waaxda dugsiga/qalabka keydinta (servers) waxaa la hayn doonaa ilaa todobo sanno kaddib marka ardayga ka tago Cambridge Public Schools iyo shaqo kasta uu ardayga abuuro kuna keydiyo marka uu adeegsado bixiyaha adeegga aqoonta ay Dugsiyada Dadweynaha Cambridge isticmaalaan waxaa loo dayactiraa sida waafaqsan celinta iyo sharuudaha burburinta bixiyahaas adeegga waxbarashada internetka. Xaaladaha qaar, muddo celinta ee bixiyaha adeegga internetka, waxay waafaqsan tahay dhererka heshiiska bixiyeyaasha la leeyahay Dugsiyada Dadweynaha Cambridge, ama la soo gaabin doono, si looga jawaabo codsiga ay soo jeediyaan Dugsiyada Dadweynaha Cambridge).
Sida ku saleysan sharciga gobolka waqtiga ardayga ku qoran yahay dugsiga, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xilsaaray wuxuu waqti ka waqti fiirin doonaa iyo burburin doonaa macluumaadka marrin habaabiya, duugga ama aan munaasabka ahayn ee ku jira diiwaanka ku meel gaarka ardayga, hase ahatee, waa in qoraal lagu ogeysiiyo lana siiyo fursad ay ku helaan macluumaadkaan ama koobiga ka hor inta aan la burburinin. Intaas kaddib, sida ku saleysan sharciga gobolka, diiwaanka ku meel gaarka waxaa la burburin doonaa ugu dambayn todobo sanno kaddib marka ardayga wareego, qalin jebiyo, ama ka noqdo Dugsiyada Dadweynaha Cambridge. Ogeysiiska qoran ee loo diro ardayga iyo waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka xagga qiyaas ahaan taariikhda burburinta iyo xaqa ay u leeyahiin in ay helaan macluumaadka, buuxa ama qeyb ahaan, waxaa la samayn doonaa waqtiga wareejinta, qalin jebinta ama ka noqoshada.

Sida waafaqsan sharciga gobolka, natiijadaha imtixanaadka ardayga waxaa la burburiyaa lexdan (60) sanno kaddib marka ardayga uu qalin jebiyo, la wareejiyo ama ka noqdo Dugsiyada Dadweynaha Cambridge.

3. Macluumaadka Xariirinta Aasaaska ee la Siiyo Shirkadaha Qora Militariga, Loo Shaqeeyeyaasha, Kulliyadaha, iyo Jaamacadaha

Qodob ka mid ah Sharciga Cunugna Loogama Tagi Doono Gadaal (No Child Left Behind Act), sannadka 2001, sharciga federaalka wuxuu rabaa in dugsiyada sare, kaddib marka ay soo gaarto codsi, in ay sii daayaan magacyada, cinwaanada, emailada nambaarada telefoonka ardayda tagta dugsiga sare una gudubta kuwa qora ciidanka Mareykanka, kulliyadaha, jaamacadaha iyo hay'adaha aqoonta kale iyo shirkadaha loo shaqeeyo. Ardayda dugsiga sare iyo waalidiintooda/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxay fursad u leeyahiin in ay codsadaan in dugsiyda sare aysan soo saarin macluumaadkooda aasaasiga marka ay soo gaaraan codsiyada noocaas. Hase ahatee, haddii ardayda dugsiga sare iyo/ama waalidiintooda/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka aysan qaadin talaabadaan suggan si ay u hor istaagaan kashifaadda macluumaadka, sharciga wuxuu rabaa in la kashifo macluumaadka lagala xariiro marka la soo codsado. Gudaha buuggaan waxaa la socda foomka iska-dhaafidda oo qoran lana rabo in ay buuxiyaan ardayda dugsiga sare iyo waalidiintooda/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, kuwa aan rabin in aan la kashifin macluumaadka lagala xariiro.

4. Ogeysiiska Xuquuqda Sida Hoos Timaada
Xuquuqda Aqoonta Qoyska iyo Sharciga

Asturnaanta (Family Educational Rights and Privacy Act) (FERPA)

FERPA waxay waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo ardayda ka weyn toban iyo sideed (18) sanno ("ardayda xaqa u yeesha") xuquuq xagga diiwaanada waxbarashada ardayda. Xuquuqdaan waa:

- Xaqa loo leeyahay in la fattasho lana fiiriyo diiwaanada waxbarashada ardayga muddo afartan iyo shan (45) maalin laga bilaabo maalinta dugsiga helo codsiga gelitaanka. Waalidiinta/ilaaliyeyaasha ama ardayda xaqa u yeelata waa in ay agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga u soo diraan codsi qoran oo aqoonsada diiwaanka (diiwaanada) ay rabaan in ay fattashaan. Sarkaalka dugsiga wuxuu sameyn doonaa qorshe lagula xariiro lana ogeysiiyo waalidka, ilaaliyaha, bixiyaha daryeelka ama ardayga xaqa u leh waqtiga iyo goobta meesha diiwaanka lagu fattasho.
- Xaqa loo leeyahay codsiga lagu baddalo diiwaanka waxbarashada ardayga uu waalidka/ilaaliyaha/bixiyeha daryeelka ama ardayga xaqa u yeesha aaminsan yahay in uusan sax ahayn, marin habaabiyo, ama si kale u jebiya xuquuqda asturnaanta ardayga ee hoos timaado FERPA. Waalidiinta/llaaliyeyaasha ama ardayda xaqa u yeelata ee raba in ay dugsiga weydiistaan in uu baddalo diiwaan waa in ay u qoraan agaasimaha dugsiga/madaxa qeybta sare dugsiga, si cad u tilmaamaan qeybta diiwaanka ay rabaan in wax laga baddalo, iyo tilmaamaan sababta loogu baahan yahay in la baddalo. Haddii dugsiga go'aan ku gaaro in uusan baddalin diiwaanka sida uu soo codsado waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ama ardayga xaqa u yeesha, dugsiga wuxuu ogeysiin doonaa waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ama ardayga xaqa u yeesha go'aanka kaddibna wuxuu ogeysiin doonaa xaqa ay u leeyahiin dhageysiga ku saabsan codsiga la xariira baddalaadda. Waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ama ardayga xaqa u yeesha waxaa la siin doonaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan hababka loo fulliyo dhageysiga marka la ogeysiiyo xaqa loo leeyahay dhageysiga.
- Xaqa in la bixiyo ogolaasho qoran ka hor inta dugsiga uusan kashifin macluumaadka lagu aqoonsan karo qofka (PII) oo laga soo qaato diiwaanada waxbarashada ardayga, marka laga reebo marka FERPA fasaxdo kashifaadda aysan ogolaasho la soconin.

  Hal ka reebid, taasoo ogolaata kashifaadda aan la ogoleyn, waa kashifaadda la siiyo saraakiisha dugsiga ee qaba danno waxbarasho sharciyeysan. Sarkaalka dugsiga waa qof Dugsiga ugu shaqeeyo sida Maamule, kormeere, tababare, ama xubin ka tirsan shaqaalaha taakuleynta (sida shaqaalaha caafimaadka ama daweynta iyo shaqaalaha unugga hirgelinta sharciga); ama qof ka shaqeeya Guddiga Dugsiga. Sarkaalka dugsiga wuxuu ku darri karaa qof iskaa wax qabso ku shaqeeyo ama qandaraasle oo dibadda ka ah dugsiga kaasoo fulliya adeegga hay'adda ama hawl uu dugsiga adeegsan lahaa shaqaalahiisa iyo hoos yimaada kantaroolka toos ee dugsiga xagga isticmaalka iyo dayactirka PII laga soo qaaday diiwaanada waxbarashada, sida qareenka, xisaabiyaha, la-talliyaha caafimaadka ama daweeyaha; waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ama ardayga ku shaqeeyo iskaa wax u qabso lana rabo in uu ka shaqeeyo guddi rasmi ah, sida guddiga dishibiliinka ama cabbashada; ama waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka, ardayga ama qofka kale ee ku shaqeeyo iskaa wax u qabso oo kaalmeeya sarkaal ka tirsan sarkaal ka tirsan dugsi kale xagga fullinta hawlahooda. Sarkaalka dugsiga wuxuu sida sharciga qabo danneyaa waxbarashada haddii sarkaalka u baahdo in uu fiiriyo diiwaanka waxbarashada si uu u fulliyo mas'uuliyadda aqoonyaanka ee ka saaran.

  Kaddib marka laga codsado, dugsiga wuxuu ogolaasho la'aan diiwaanka waxbarashada u kashifi doonaa saraakiisha dugsi kale uu ardayga ka raadsado in lagu qoro ama doono in lagu qoro, ama horay loogu qoray, haddii ujeedada kashifaadda tahay diiwaan gelinta ardayga ama wareejinta ardayga.
- Xaqa loo leeyahay in ashtako loo gudbiyo Waaxda Waxbarashada Mareykanka (United States Department of Education) marka dugsiga lagu eedeeyo in uu ku fashalay in uu u hoggaansamo sharuudaha FERPA. Magaca iyo cinwaanka xaffiska maamula FERPA waa:

  Family Policy Compliance Office
  U.S. Department of Education
  400 Maryland Avenue, SW

Washington, D.C. 20202-5920
Telefoon: 800.USA.LEARN (800.872.5327)

FERPA waxay ogoshahay kashifaadda PII ee laga soo qaado diiwaanada waxbarashada ardayga, iyadoo aan ogolaasho laga haysanin waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ama ardayga xaqa u yeesha, haddii kashifaadda la kullanto qaar ka mid ah sharuudaha ku qoran §99.31 sharciyada FERPA. Marka laga reebo kashifaadda saraakiisha dugsiga, kashifaadda la xariira qaar ka mid ah ammarada sharciga ama ammarada soo qasba marqaatiyada in ay yimaadaan (subpoenas), kashifaadda macluumaadka diiwaanka, iyo kashifaadda loo jeediyo waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ama ardayga xaqa u yeesha, §99.32 ee sharciyada FERPA waxay dugsiga ka rabaan in uu diiwaan geliyo kashifaadda. Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo ardayda xaqa u yeesha waxay xaq u leeyahiin in ay fattashaan iyo in ay fiiriyaan diiwaanka kashifaadda. Waxaa dhici karto in dugsiga kashifo PII lagana soo qaado diiwaanka waxbarashada ardayga iyadoo aan ogolaasho qoran laga helin waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ama ardayga xaqa u yeesha.

- Ku socoto sarakiisha kale ee dugsiga, kana mid ah macalimiinta, gudaha wakaaladda waxbarashada ama hay'adda uu dugsiga go'aan ku gaaray in uu ka leeyahay danno waxbarasho xaq ah. Waxaa ka mid ah qandaraasleyaasha, la-talliyeyaasha, kuwa ku shaqeeyo iskaa wax u qabso, iibiyeyaasha bixiya brograamyada tababarka internetka iyo kuwa ku saleysan keydinta loo yaqaan "cloud" ama dhinacyada kale uu dugsiga u dhiibay adeegyada ama hawlaha hay'adda, hase ahatee waa in loola kulmo sharuudaha ku qoran §99.31(a)(1)(i)(B)(1) – (a)(1)(i)(B)(2). (§99.31(a)(1))
- Saraakiisha dugsi kale, siistemka dugsiga, ama hay'ad ka shaqeysa waxbarashada ka dambeyso dugsiga sare halkaas uu ardayga raadsado ama doono in uu isku qoro, ama marka ardayga uu horay ugu qoran yahay haddii ujeedada kashifaadda la xariirto diiwaan gelinta ardayga ama wareejinta, sida hoos timaado sharuudaha §99.34. (§99.31(a)(2))
- Ku socoto wakiilada loo fasaxay ee Xisaabiyaha Guud Mareykanka (U.S. Comptroller General), Xeer Ilaaliyaha Guud Mareykanka (U.S. Attorney General), Xogeyaha Waxbarashada Mareykanka (U.S. Secretary of Education), ama madaxa waxbarashada Gobolka iyo deegaanka sida wakaaladda waxbarashada Gobolka ee waalidka/ilaaliyaha/bixeyaha daryeelka ama Gobolka ardayga xaqa u yeesha (SEA). Waa la samayan karaa kashifaadda hoos yimaada qodobkaan, sida hoos timaado sharuudaha §99.35, lana xariira xisaab xer ama qiimeynta brograamyada Federaalka ama Gobolka taageero, ama si loo hirgeliyo ama u hoggaansamida sharuudaha sharciga Federaalka ee la xariira brograamyadaan. Hay'adahaan waxay kashifaad dheeraad ah oo ku saabsan PII siin karaan hay'adaha dibadda ay iyaga sameyeen sida wakiiladooda loo fasaxay in ay fulliyaan xisaab xer, qiimeyn, ama hirgelinta ama u hoggaansamida hawsha iyaga oo mattala. (§§99.31(a)(3) iyo 99.35)
- Bacdamaa ay la xariirto kaalmada maaliyadda uu ardayga dalbaday ama ardayga uu qaatay, haddii macluumaadka yahay lagama maarmaan si loo helo xaq u yeelashada macaawinada, la ogaado qiyaasta kaalmada, la helo sharuudaha kaalmada, ama la hirgeliyo qodobada iyo sharuudaha kaalmada.(§99.31(a)(4))
- Saraakiisha Gobolka iyo deegaanka ama madaxda sida gaarka ah loogu ogol yahay macluumaadka in la soo sheego ama la kashifo sida uu rabo sharciga Gobolka ee quseeyo siistemka caddaaladda dhallin yarka iyo awoodda siistemka u leeyahay in uu si dhab ah ugu adeego, ka hor inta aan la gaarin go'aan, ardayga diiwaankiisa la sii daayay, sida hoos timaado §99.38. (§99.31(a)(5))
- Ururada fulliya daraasaadka, ama mattala, dugsiga, si loo: (a) horumariyo, la sugo, ama la siiyo baaritaanada la saadalin karo; (b) maamulo brograamyada kaalmada la siiyo ardayga; ama (c) la hagaajiyo horumarka. (§99.31(a)(6))
- Ururada bixiya aqoonsiga waxbarashada si ay u fulliyaan hawlahooda aqoonsiga bixiya. (§99.31(a)(7))
- Ku socoto waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga xaqa u yeesho haddii ardayga uu yahay ku-tiirsane xagga ujeedooyinka cansnhuurta IRS. (99.31(a)(8))
- Si loogu hoggaansamo ammarka cadaaladda ama ammarka marqaatiga sida sharciga rabo. (99.31(a)(9))

- Ku socoto saraakiisha ku habboon lana xariirta degdegga caafimaadka ama ammaanka, sida hoos timaado §99.36. (§99.31(a)(10))
    - Waa macluumaad uu dugsiga ku tilmaamay "macluumaadka diiwaanka" sida hoos timaadoo §99.37. (§99.31(a)(11))
- Ku socoto shaqaalaha kiisaska wakaaladda ama wakiil kale oo ka socda Gobolka ama wakaaladda maslaxadda cunugga deegaanka ama urur ka tirsan maxkamadaha oo loo fasaxay in ay helaan qorshaha kiiska ardayga marka wakaaladda noocaas ay sharci ahaan mas'uul ka tahay, sida waafaqsan sharciga Gobolka ama qabiilka, si loo daryeelo loona badbaadiyo ardayga ku sugan meeleynta daryeelka korinta ilmaha. (20 U.S.C. §1232g(b)(1)(L))
- To socoto Xogeyaha Beeraha ama wakiilada loo fasaxay Adeegga Raashinka iyo Nafaqada (Food and Nutrition Service), ujeedadana tahay in la fulliyo kormeerka brograamka, qiimeynta iyo cabbirada waxqabadka brograamyada hoos yimaada Sharciga Qadada Dugsiga Qaranka Richard B. Russel (Richard B. Russell National School Lunch Act) ama Sharciga Nafaqada Cunugga (Child Nutrition Act) ee 1966, sida hoos timaado sharuudaha qaar. (20 U.S.C. § 1232g(b)(1)(K))

5. Xogta Ardayga iyo Isticmaalka Tababarka Internetka

Waxaa dhici karto in CPS ay xogta ardayga la qeybsato iibiyeyaasha bixiya arjiyada tababarka internetka ee lala isticmaalo ardayda, taasoo ka mid ah hawsha ama adeegga hay'adaha, balse keliya marka iibiyaha uu heshiiska asturnaanta xogta ardayga la saxiixo dugsiga dagmada ama haddii waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga ay saxiixaan foomka ogolaashada oo qoran. Liiska ilaha tababarada internetka ee la ogol yahay waxaa laga heli karaa: bit.ly/CPSDigRes

6. Imaashada

Caruurta waxay si wanaagsan wax u bartaan iyo waxay ku guuleystaan darajo sare marka ay si joogto ah u tagaan dugsiga. Imaashada joogtada iyo waqtigii loo qabtay waxay wax ku biirisaa maslaxadda guud ee ardayda oo idil marka ay yareyso carqaladeynta jawiga waxbarashada. Imaashada maalin kasta iyo imaashada waqtiga qofka loo qabto waxay lagama maarmaan u yahiin guusha uu cunugga mustaqbalka ka gaaro dugsiga iyo shaqada. Waxa la fisho waa in dhamaan ardayda tagi doonaan dugsiga, ugu yaraan, boqolkiiba sagaashan iyo shan (95%) tagidda dugsiga iyo fasal kasta maalin dugsiyeedka. Sida aad ogsoon tahay, sida waafaqsan Sharciyada Guud ee Massachusetts (Massachusetts General Laws): DHAMAAN CARUURTA JIRTA 6-16 SANNO WAXAA WAAJIB KU AH IN AY TAGAAN DUGSIGA.

Waxaa muhiim in dhamaan fahmaan sasaanka lagu gaaro guusha imaashada dugsiga iyo in guusha aqoonta ka bilaabato xanaanada iyo darajada kowaad. Sasaanka imaasho la'aanta waa sii socon doonaan inta uu ardayga ku jiro dugsiga, taasoo cunugga gelisa halista guul darrada iyo ka tagidda dugsiga. Waxaan codsaneynaa isaakshigaada iyo kaalmadaada si loo hubsado in cunugaada ku jiro dugsiga maalin kasta iyo waqtiga loo qabtay. Marka cunugga maqan yahay, waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka waa in uu waco dugsiga si uu u ogeysiiyo ugu dambayn subaxnimada uu maqan yahay. Haddii aan telefoon la dirin, marka cunugga ku soo noqdo dugsiga, waa in qoraal gaaban laga keeno waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka cunugga, taasoo ka hadasha sababta dhallisay maqnaashada. Macalinka qaabilsan fasalka waa in uu qoraaladaan geliyo faylka sannad dugsiyeedka.

Haddii cunugga qaadan doono maqnaasha loo fasaxay muddo shan (5) maalin ama ka badan, waalidka/ilaaliyaha waa in ay ogeysiiyaan dugsiga si loo sameeyo qorshaha hawsha guriga, iyo haddi ardayga uu qaadan doono maqnaasho dheer oo ka kooban labo (2) todobaad ama ka badan taasoo ugu wacan xanuun ama dhaawac, waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka waa in uu ogeysiiyo dugsiga si uu u sameeyo qorshaha tababarka guriga.

Marka maqnaashada la fasaxay la tuhmo, lana dareemo sassaankooda, dugsiga wuxuu qaadi doonaa talaabooyin lagu hubinaayo sababta, waxaa la codsan doontaa qoraalka takhtarka iyo guriga oo la soo booqdo.

Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu hayn doontaa istaatiistiko iyo wuxuu hubin doonaa maqnaashada iyo daahidda lagu soo celceliyo xagga maqnaashada soo noqnoqota ama aan joogto ahayn taasoo ugu waca, oo sida la soo sheegay, ugu wacan

xanuun, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama kalkaalinta dugsiga waxay codsan kartaa oraahda takhtarka taasoo caddeysa in maqnaashada noocaas tahay mid lagu qanci karo. Haddii cunugga uusan tagin dugsiga ama cunug jira 6 ilaa 18 sanno uu caadeysto goynta ama ku celceliyo in uu raaco sharciyada dugsiga, dugsiga dagmada wuxuu maxkamadda u gudbin karaa codsi in Cunugga u Baahan Yahay Kaalmo (CRA).

Cambridge Rindge iyo Latin School iyo Brograamka Laanta Dugsiga Sare (High School Extendion Program) waxay afar (4) oo laga maqnaado fasalka u qaadan doonaan sida Jebinta Imaashada Dugsiga (Attendance Violation) (AV). Maqnaashada la fasaxo, sida cudurka qofka ku dhaco ee la xaqiijiyo, looma xisaabin doono ardayga mana dhallin doonto in la soo saaro Jebinta Imaashada (Attendance Violation) (AV) haddii maqnaashada ay soo gasho qeybaha soo socdo: (a) maqnaasho loo xisaabo sida xanuunka soo gaaro qofka; calool xumo, dhimasho ku timaado qoyska; (b) maqnaashada fasaxa diinta; (c) ballamada caafimaadka ama booqashooyinka la-tallinta aan la samayn karin saacadaha dibadda ka ah dugsiga; (d) arrimaha sharciga ee u baahan in qofka yimaado; (e) ka-joojinta gudaha iyo dibadda dugsiga; (f) safarada la xariira dugsiga, isu imaashada ama shirarka; (g) booqashooyinka kulliyadda (labo maalin sannadka hore iyo saddax maalin sannadka dambe); (h) hal safar ama waayaha waxbarashada aan ka badneyn shan maalin sanooyinka ardayga ku sugan yahay dugsiga sare.

Hase ahatee, afar (4)maqnaasho aan la fasaxin waxay dhallin doonaan Jebinta Sharciyada Imaashada (Attendance Violation) Kiiskaan, Madaxa Ardayda (Dean of Students) wuxuu soo saari doonaa darajada AV xagga darajada teermka. Intaas kaddib, saddax (3) daahid aan la fasixin waxaa loo xisaabin doonaa sida hal (1) maqnaasho aan la fasixin. Maqnaashada aan la fasixin waxaa ka mid ah: (a) goynta dugsiga ama fasalada qaar; (b) safarada uusan agaasimaha horay u ogolaanin; (c) raadinta shaqada iyadoo aan ogolaasho laga haysanin agaasimaha; (d) joogitaanka guriga si aan oo qaadanin imtixaanka maaddo gaar ah ama si loo barto imtixaan; (e) ka tagidda dhismaha dugsiga maalinimada iyadoo aan la saxiixin xafiiska madaxa kulliyadda (goynta fasalka); (f) hurdo xad dhaaf ah ama in laga soo daaho dugsiga; (g) la joogo xerada dugsiga ama agagaarka, balse aan la tagin fasalada uu ku qoran yahay ardayga (goynta fasalka); iyo (h) maqnaasho kale aan la fasixin ama maqnaasho la fasixi karo aysan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ku sheegin telefoonka ama qoraal gaaban oo laga keeno waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ama bixiyaha daryeelka caafimaadka ardayga marka ardayga uu ku soo noqdo dugsiga. Intaas kaddib, ardayga toban iyo labo (12) daahid aan la fasaxin ka qaata hal fasal, waxaa koorsadaas laga siin doonaa AV.

Sida waafaqsan siyaasadda u dagsan dugsiga dagmada, dugsiga wuxuu ogeysiin doonaa waalidika/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka mar kasta uu ardayga maqan yahay iyo/ama uu soo daaho iyo wuxuu ogeysiin doonaa waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka kaddib marka ardayga geysto afar maqnaasho isku xiga aan loo fasixin. Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxay raadsan karaan ka-dhaafidda caafimaadka xagga xaaladda soo noqnoqoto, cudurka soo noqnoqdo ama xagga cudurada gaara in ka badan afar (4) maalin. Waalidiinta/llaaliyeyaasha/Bixiyeyaasha Daryeelka waxay xaq u yeelan doonaan in ay racfaan ka qaataan AV kasta una jeedin doonaan Guddiga Fiirinta Racfaanada (Appeals Review Committee) ee Cambridge Rindge iyo Latin School ama Brograamka Fidinta Dugsiga Sare (High School Extension Program) muddo toban (10) maalin gudahooda laga bilaabo marka la soo saaro AV iyo, haddii la soo diido racfaanka, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxay, muddo toban (10) maalin gudahooda laga bilaabo diidmada, racfaan qoran u gudbin karaan Maamulaha Dugsiyada (Superintendent of Schools). Go'aanka Maamulaha Dugsiyadaha (Superintendent of Schools) wuxuu ahaan doonaa kama dambeys.

Kooxaha Waxbarasdhada Bulshada (Learning Community) waxay la shaqeyn doontaa ardayda la kullanta shardiga AV oo fulliya mid ka mid ah saddaxda (3) taageer soo socda:

a. Dhamaystirka heshiiska/soo jeedinta Dib u Gadashada (Buy Back) (ee la siiyo dhamaan ardayda)
b. Diiwaan gelinta ardayga ku jira Tababarada Ardaynimada (Studentship Workshops) (ee loogu talogalay ardayda u baahan waqti dheeraad ah xagga maamulka waqtiga iyo taakuleynta ardaynimada)

c. Qorshaha Taageerada Qofka ee lala sameyay kooxda LC (loona isticmaalo ardayda ku sugan xaaladaha adag ee u baahan taageero gaar ah)

Haddii ardayga uusan ku guuleysanin in uu dhamaystiro qorshaha taageerada, waxaa dhici karto in la siiyo dhimista 10-dhibic.

7. Cunugga u Baahan Kaalmo (CRA)

Maxkamadaha iyo waaxda dugsiga ka shaqeeyo gaffeyaashaan waxay xoogga saaraan faragelinta hore, iyadoo aan la fiirinin da'da. Sharciyada Guud ee Massachusetts (Massachusetts General Laws) waxay qofka caadeysto goynta ku sifeysaa sida ku celceliyaha gaffaha dugsiga sida cunug oo si joogto ah iyo si ula kac ah ku guul dareysto in uu yimaado dugsiga, gooya, ama ku adkeysta jebinta xeerka sharciga iyo macquulka ah ee dugsigooda. Sida hoos timaado M.G.L. c.76, §2, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxaa laga rabaa in ay cunugga ku qalqaaliyaan in uu tago dugsiga, iyo, haddii ardayga ku guuldareysto in uu sidaas sameeyo in ka bdan todobo maalin oo la kulmo muddo lex bil, kormeeraha qaabilsan imaashada wuxuu soo gudbin doonaa ashtako taasoo dhallin doonto in waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka in la siiyo ganaax.

Intaas kaddib, dugsiyada waxay arjiga CRA u raadin karaan cunug kasta oo jira 6 sanno ilaa 18 sanno oo caadeystay goynta maxaa yeelay waxay dugsiga ka maqnadeen sideed jeer ama ka badan muddo rubac sanno, ama maxaa yeelay cunugga wuxuu si ku celcelis ugu dhacay in uu raaco sharciyada dugsigaj.

Marka dadaalka faragelinta gudaha dugsiga lagu guul dareysto in ay xalliyaan maqnaashada soo noqnoqoto ama daahid, goynta la caadeysto ama lagu celceliyo jebinta sharciyada u dagsan dugsiga, waaxda dugsiga waxay Maxkamadda ka bilaabi talaabada CRA. Sida hoos timaado sharciga, Maxkamadda Dhallinta waxay geli kartaa dhamaan meelaha lagu haayo macluumaadka dugsiga lana xariira kiisaskaan.

8. Ogeysiis Ku Saabsan Ardayda Ka Tagta Dugsiga

Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay xil iska saareen in ardayda dhamaystiraan waxbarashadooda hoose iyo sare. Haddii ay dhacdo in arday jira toban iyo lex sanno ama ka weyn raadsado in uu ka tago dugsiga, CPS waxay ku adkeysataa sharuudaha M.G.L.c. 76, §18 kaddibna wuxuu raacaa hababka ku qoran hoos:

1. Agaasimaha ama cidda loo xil saaray waxay warqad u dirri doonaan waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ardayga iyaga oo ogeysiiya waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka in ardayga (a) uu soo jeediyay rabitaan in uu ka noqdo dugsiga kuna talo jirin in uu ku soo noqdo, ama (b) uu toban iyo shan (15) maqnaasho isku xiga ka qaatay dugsiga iyo muujiyay in taariikhda ugu dambeyso uu ardayga yimid dugsiga.

   Si dugsiga uu go'aan uga gaaro haddii ardayga uu rabo in uu ka noqdo dugsiga kuna talo jirin in uu ku soo noqdo, dugsiga wuxuu shir la geli doonaa ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka, ujeedadana tahay in uu kala hadlo asbaabta ka dambeyso sababta ardayga uu u rabo in uu ka tago dugsiga iyo in uu sahmiyo waxbarasho kale iyo meeleyn kale ka hor inta ardayga uusan si rasmi ah uga tagin dugsiga. Waalidka/Ilaaliyaha/Bixiyaha Daryeelka waxay codsan karaan in la baddalo taariikhda iyo waqtigaan hase ahatee fidinta waqtiga kama badnaan karto toban iyo afar (14) maalin laga bilaabo taariikhda uu warqadda soo saaro agaasimaha ama qofka uu u xil saaro.

2. Kaddib marka shir lala galo waalidka/ilaaliyaha iyo ardayga, agaasimaha ama qofka loo xilsaaray wuxuu warqad u diri doonaa waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ardayga taasoo soo koobta waxa laga hadlay iyo go'aan kasta oo la gaaray shirka, sida balse kuma eka, haddii ardayga ku talo jiro in uu ku soo noqdo dugsiga, raaco meeleyn waxbarasho kale, raaco adeegyo kale oo lagu taageero ama si joogto ah uga taho dugsiga.

3. Sida waafaqsan sharciyada M.G.L.c. 76, §18, go'aan kasta oo laga gaaro in ardayga uu si joogto ah uga tagi doono dugsiga waa in aan loo qaadanin in si joogto ah laga reebay ardayga haddii ardayga doono in uu ku soo noqdo waxbarashada.

9. Ku Xadgudubka Cunugga

Qeybta 51A, Cutubka 119 ee Sharciyada Guud Massachusetts (Massachusetts General Laws) wuxuu rabaa in dadka qaar ee awooddooda aqoonta qabaan sabab macquul ah in ay ku aaminaan in cunugga ka yar toban iyo sideed (18) sanno dhibaato ku qaba dhaawaca jirka ama caatifadda oo ka dhasha xumaan, sida xumaanta jinsiga, ama dayac, sida nafaqo xumada, ee loo geysto cunugga wuxuu isla markiiba xumaantaan ama dayac ku gudbin doonaa telefoonka Waaxda Caruurta iyo Qoysaska (Department of Children and Families) ("DCF'). Aqoonyaanada looga baahan yahay in ay kiisaska ku xadgudubka cunugga ama dayaca u soo sheegaan DCF waxaa ka mid ah: takhaatiirta, ardayda tababarka, kalkaalinta, macalimiinta, maamuleyaasha waxbarashada, la-talliyeyaasha hoggaaminta, la-talliyeyaasha qoyska, saraakiisha tijaabada, saraakiisha imaasha dugsiga, shaqaalaha bulshada, takhaatiirta cilmu nafsiga, iyo boliiska. Warbixinta telefoonka waa in loo jeediyo xafiiska ku habboon ama la mariyo telefoonka warbixinta 24ta saac: 1-800-792-5200. Muddo afartan iyo sideed (48) saac gudahooda, aqoonyaanadaan waxaa laga rabaa, sida hoos timaado sharciga Massachusetts, in ay ogeysiyaan DCF, qoraal ahaan, lana adeegsado foomka warbixinta DCF. Waa in warbixin cusub laga buuxiyo dhaawac kasta ama dib u dhaawacid kasta.

Sida macquulka ah, shaqaalaha aaminsan in cunugga ka yar toban iyo sideed sanno dibaato ku qabo dhaawaca jirka ama caatifadda oo ka dhallata xumaan, sida xumaanta jinsiga, ama dayac, sida nafaqo xumada waa in ay isla markiiba u soo sheegaan agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga si loo gudbiyo warbixinta 51A.

Ku xadgudubka cunugga iyo dayaca waa dhacdo kasta marka ay jirto sabab macquul ah oo lagu aamino in caafimaadka jirka iyo caafimaadka madaxa soo gaarto waxyeelo ama lagu cabsi geliyo halista waxyeelada loo adeegsado ku xadgudubka ama dayaca qof (ama dad) mas'uul ka ah caafimaadka ama wanaagga, kana mid ah shaqaalaha ku jira siistemka dugsiga dadweynaha waa in la soo sheego. Goynta Dugsiga, keligeed, ma aha wax laga warbixiyo.

Ku xadgudubka waxaa ka mid ah:

- dhaawaca jirka, madaxa, ama caatifadda marka laga reebo waxyaabaha si lama filaan u dhaca, macnaha, garaaca, goynta, gubidda, lafo jebinta, nabarada badan;
- ku tiirsanaanta jirka taasoo ku xeran mukhaadaraadka qofka u barto marka uu dhasho;
- fal kasta oo la xariira jinsiga oo loo geysto qof kale oo loo adeegsado xoog, ama handadaadda xoogga ama dhaawaca jirka, ama ka soo horjeedo rabitaanka qofka. Tani waxaa ka mid ah falka jinsiga oo ka soo horjeedo qof kale oo aan awood u lahayn in uu bixiyo ogolaasho maxaa yeelay wuxuu qabaa awood yari xagga madaxa ama jirka ama maxaa yeelay qofka waa ilmo. Dambiyada noocaas sida weerarka iyo garaaca xun, kufsiga, kufsiga loo adeegsado xoog, kufsiga iyo xumaanta, weerarka lagu talogalay iyo falalka aan dabiiciga ahayn iyo kuwa ku saleysan damaca jinsiga waxaa lagu tilmaamaa in ay ka mid yahiin weerarka jinsiga.
- Weerarka iyo garaaca aan habbooneyn waxaa ka mid ah, balse kuma eka, taabashada aan habbooneyn lana rabin ee qeybaha ka mid ah qeybaha gaarka jirka. Qofka ka yar 14 sanno, sharci ahaan, awood uma laha in uu ogolaado noocaan jinsiga.
- Dayaca waxaa loo haystaa in uu jiro marka qofka ama dadka mas'uulka ka ah daryeelka cunugga, inkastoo ay maaliyad ahaan awood u leeyahiin in ay sidaas sameyaan, ku guu daryestaan in ay cunugga siiyaan:
    - raashin ku filan, labbis, hooy, waxbarasho ama daryeelka caafimaadka iyo/ama
    - kormeerka ku habboon iyo/ama ilaalinta.

10. Daryeelka iyo Falalka Badbaadinta

Haddii lagu guuldareysto in caruurta loo diro dugsiga, taasina lala kulmo ku xadgudub kale oo culus iyo dhibaatooyinka dayaca, waxaa dhici karto in la bilaabo talaabo daryeel iyo badbaadin sida waafaqsan qodobada M.G.L. c.119, §24. Marka la soo qaado talaabada daryeelka iyo badbaadinta haddii maxkamadda "raali ku tahay in ay jirto sabab macquul ah oo lagu aamino in cunugga uu dhibaato ku qabo ku xadgudub culus ama dayac ama ku sugan yahay halis u

dhaw" maxkamadda waxay ammar ku bixin kartaa in degdeg loo wareejiyo haynta cunugga.

11. Cunugga aan xisaabta ku jirin ama Cunugga Maqan

Waxaa jira xaalado badan oo suurtogal ah kuwaasoo sifeeya cunugga aan xisaabta soo gelin ee maqan. Tusaalooyinka qaar waa:

- Marka cunugga ku soo noqonin fasalka laguna arkin gudaha dhismaha ama xerada dugsiga,
- Waqtiga la fasaxo ardayda, macalinka fasalka ma xaqiijin karo in cunugga uu raacay waalid ama qof loo xil saaray.
- Macalinka fasalka ma xaqiijin karo in cunugga uu koray baska, iyo
- Waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka wuxuu wacay dugsiga si
  si uu u sheego in cunugga uusan imaanin guriga waqtiga caadiga.

La xariir Xafiiska Gaadiidka dhamaan caruurta raacda baska dugsiga.

Ogeysii Maamulaha iyo Xafiiska Ammaanka (Office of Safety)
iyo Sugidda Ammaanka.

La xariir waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeela.

Haddii aad la kullantid degdeg, toos u wac boliiska. Haddii kale, Xafiiska Ammaanka iyo Nabad Gelyada (Office of Safety and Security) ayaa iyaga kala soo xariiri doono tafaasiil habboon kaddib marka ay adiga kula shiraan.

Habka

Wareysiga waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka/dadka soo gudbiyay warbixinta hore.

Xaqiiji in cunugga uu dhab ahaan ku jirin xisaabta / maqan yahay.

Tilmaan daruufaha waayidda.

Ogow goorta, goobta iyo qofka lagu arkay cunugga maqan.

Fiiri galka cunugga, diyaari dhamaan macluumaadka la xariira, nambarada degdegga, iyo xaqiiji xaaladda haynta. (Haddii ay suurtogal tahay, sawirka)

Waa in la heli karo sharaxaad dhamaystiran oo ku saabsan cunugga sida labbiska, joogga, miisaanka, muuqaalka, sifooyinka u gaarka ah.

Waa in la diyaariyo liiska asxaabta/macaruufka.

Sida ku saleysan dhamaan macluumaadka la heli karo, go'aanka hore ee laga gaaro dhacdada: af duubka aan la xariirin qoyska, af duubka qoyska, carrarka, lumista, dhaawaca ama aan meelna lagu sheegin ama maqan. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xil saaray waxay raaci doonaan habka, waxay hayn doonaan dhamaan macluumaadka ku qoran kor, waana la heli doonaa ilaa cunugga laga meeleeyo.

12. Gaadiidka

Dugsi kasta waa in uu leeyahay siistem "u gaar" ah oo lagu hubiyo n-house" oo lagu hubiyo in caruurta darajada aasaasiga ee la qaado koraan basaska ku habboon. La xariir Waaxda Gaadiidka (Department of Transportation), telefoonka 617-349-6862 xagga dhamaan caruurta aan xisaabta ku jirin balse la qaado.

Kuwa aan lala kulmin joogsiga uu ballamiyay waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ama cidda loo xil saaray in ka badan saddax jeer waxay lumin doonaan axsaanka lagu raaco baska.

13. Qaadidda Imtixaanka Laga Siman Yahay

Sannad kasta, CPS waxay bixisaa MCAS 2.0 heerarka darajada sida ay go'aamiso Waaxda Waxbarashada Massachusetts (Massacsachusetts Department of Education). Intaas kaddib, sannad kasta, CPS waxay bixisaa ACCESS la siiyo ardayda Barata Luqaadda Ingiriisiga, sida ku habboon, sida waafaqsan sharuudaha Waaxda Waxbarashada Massachusetts.

14. Aqoonta Jinsiga

Sharciga wuxuu dugsiyada ka rabaa in ay waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ogeysiyaan manhajka, taasoo la xariirto aqoonta sinjiga aadanaha ama arrimaha jinsiga aadanaha. Horaanta qaboobe kasta waxaa guriga loo soo diraa warqad ku saabsan manhajka barashada caafimaadka, taasoo sharaxda daruusta jinsiga ee laga yaabo in lala kulmo heerka darajo kasta.
Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waajib

kuma aha in ay caruurtooda siiyaan ruqsad si ay u qaataan fasaladaan, una yeeshaan xaq in ay caruurtooda ka dhaafaan fasalada noocaas. Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxay sidaas u samayn karaan iyaga oo warqad u dira agaasimaha/madaxas qeybta sare dugsiga oo codsada in cunugga laga saaro daruusta. Waalid/ilaaliye kasta oo raba in uu fiiriyo qoraalka wuxuu la hadli karaa macalinka cunugga ama Hoggaamiyaha Brograamka u qaabilsan Aqoonta Caafimaadka (Program Leader for Health Education), telefoonka 617-349-6851.

15. Celcelinta Jirka

Waa siyaasadda u dagsan Guddiga Dugsiga Cambridge in la horumariyo goob ammaan ah oo lagu shaqeeyo iyo jawi waxbarasho la siiyo shaqaalaha iyo ardayda, iyo si loo hubsado in arday kasta oo ku jiro Dugsiyada Dadweynaha Cambridge uu ka madax banaan yahay isticmaalka celcelinta jirka sida qilaafsan sharciyada Waaxda Waxbarashada Hoose iyo Sare ee Massachusetts, iyo in celcelinta jirka loo adeegsado oo keliya si taxadir leh sida qorshaha ugu dambeeyo xaaladaha degdegga, kaddib marka lagu fashalo talooyinka kale ee sharciga waafaqsan balse aan gudaha u gelin ama loo arko in aysan ku habbooneyn. Shaqaalaha dugsiga waxay adeegsan doonaan celcelinta jirka marka ugu dambeyso marka loo baahdo si loo badbaadiyo arday iyo/ama xubin ka tirsan bulshada dugsiga in aan loo geysanin waxyeelo, culus, kuna soo socda. Marka loo baahan in la adeegsado celcelinta jirka, shaqaalaha dugsiga waxay raadi doonaan in ay ka hortagaan ama yareyaan waxyeelada soo gaara ardayga, taasoo ka dhalata isticmaalka celcelinta jirka. Siyaasaddaan waa in aan loo qaadanin in ay soo koobto badbaadinta la siiyo ardayda laga maal geliyo dadweynaha sida hoos timaado sharciyada federaalka iyo gobolka, kana mid ah sharciyada laga helo xuquuqda ay leeyahiin ardayda xaqa u yeeshay in ay qaataan adeegyada waxbarashada khaaska. Intaas kaddib, siyaasaddaan looma qaadan doono in ay ka hor istaagto macalin, shaqaale ama wakiil ka tirsan brograamka waxbarashada dadweynaha in uu isticmaalio xoog macquul ah si loo badbaadiyo ardayda, dadka kale ama iyaga naftooda in aan jirkooda loo geysanin weerar ama waxyeelo culus oo degdeg ah.

Dugsiyada Dadweynaha Cambridge wuxuu qoray habab iyo tilmaamo la xariira siyaasaddaan ee lagu soo dhajiyay bogga internetka dugsiga lagana heli karo xafiiska agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga, oo tilmaama: (i) jawaabo ku habboon dabeecadda ardayga ee laga yaabo in isla markiiba la farageliyo; iyo (ii) habab kale oo loo baahan yahay in loo adeegsado marka hore marka la raadinaayo in laga hortago dagaalka ardayga, dabeecadda dhaawaca uu qofka isu geysto iyo/ama xassilinta halista dabeecadda ka dhax dillaacda kooxaha ardayda ama lala galo arday keligii, sida hababka kale ee la xariira xaaladaha degdegga si leysaga ilaaliyo in la adeegsado celcelinta jirka.

Hababka Celcelinta Jirka

Sifeynta

"Ogolaasho" waxaa loola jeedaa heshiiska ay gaaraan waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ee sida buuxdo loo ogeysiiyay dhamaan macluumaadka munaasabka u ah hawsha loo raadiyo heshiiska, luqadooda dhalladka ama siyaabo kale oo lagu xariiro, uu waalidka/ilaaliyaha fahamsan yahay kuna heshiyaan qoraal ahaan ilaa fullinta hawsha, iyo fahamsan in heshiiska uu yahay wax uu qofka iskiisa u galay iyo in laga noqon karo. Heshiiska wuxuu sharaxaa hawsha iyo wuxuu soo taxaa diiwaanada (haddii ay jiraan) ee la kashifi doono iyo cidda loo diri doono.

"Celcelinta" waxaa loola jeedaa yareynta dhaqaaqa jirka ardayga lana isticmaalo xoog ka soo horjeeda diidmada ardayga.

"Celcelinta jirka" waxaa loola jeedaa xariirka jirka oo ka hortaga ama si muuqata u yareeya xoriyadda dhaqaaqa ardayga. Erayga celcelinta jirka kuma jiraan celcelinta ku-haynta dhulka, celcelinta makaanikada, ama celcelinta daweynta. Intaas kaddib, celcelinta kama mid ah jirka oo istaabta, xoog la'aan, si loo ilaaliyo ammaanka ardayga ama loo yareeyo dabeecadda qofka naftiisa u geysto, hoggaaminta jirka ama u baaqidda marka la tababaraayo xirfad, dib u siinta digniin, dajinta, ama wehlinta.

“Wehlinta qofka" waxaa loola jeedaa taabashada ku meel gaarka ama qabashada, iyadoo aan xoog, gacanta, kala goyska gacanta, garabka, ama dusha loo adeegsanin in lagu hoggaamiyo cunugga qalqalay in uu socod ku tago meel ammaan ah.

"Celcelinta Makaanikada" ("Mechanical restraint") waxaa loola jeedaa isticmaalka qalabka jirka oo lagu xayiro dhaqaaqa ardayga ama dhaqaaqa ama hawlaha caadiga qeyb ka mid ah jirkooda. Qalab loogu talogalay badbaadinta ama dajinta kaasoo uu dalbay takhtarka looma qaadan doono in uu yahay celcelinta makaanika. **Waa la mamnuucay isticmaalka celcelinta makaarnikada haddii uusan soo fasaxin takhtar, soona ogolaanin waalidka, ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka qoraal ahaan.**

"Soocid" waxaa loola jeedaa marka ardayga la geliyo qol keligiis ama meel marka ardayga jir ahaan laga ilaaliyo, ama sida macquulka ah aaminsan yahay in ardayga laga ilaalin doono, in uu ka tago. Soocidda kama mid ah ka-fadhiisinta (time-out) sida ku sifeysan 603 C.M.R. 46.02. **Waa mamnuuc isticmaalka celcelinta xakameynta.**

"Soocidda" (Time-out) waxaa loola jeedaa xiilad lagu taageero dabeecadda marka ardayga si ku meel gaar ah laga sooco waxbarashada fasalka, ha ahaato wax uu doorto ama marka ay ku amraan shaqaalaha, ujeedadana tahay in la dajiyo. Waqtiga dibadda, ardayga waa in aan meel lagu xabbisin haddii uusan rabin iyo waa in si joogto ah kor ka fiiriyo xubin ka tirsan shaqaalaha. Shaqaalaha waxay la joogi doonaan ardayga ama waxay mar kasta dhakhso diyaar u ahaan doonaan ardayga. Waqtiga joojinta (time-out) waxay istaagi doontaa sida ugu dhakhsiyaha badan marka ardayga xassilo ama marka soo wareegato, hadba tii soo hormarta. Rabitaanka waa in waqtiga-dibadda lagu fulliyo gudaha fasalka. Boos kasta oo loo adeegsado waqtiga-xayiraadda (time-out) oo dibadda ka ah fasalka, waa in ogolaasho laga soo qaato Xafiiska Adeegyada Ardayga ka hor inta aan la adeegsanin.

"Celcelinta daawada" waxaa loola jeedaa marka ku meel gaar ahaan la maamulo dabeecadda. **Waa la mamnuucay isticmaalka celcelinta kiimikada haddii takhtarka uusan toos u ogolaanin, kaddibna qoraal ahaan uusan ogolaanin waalidka/ilaaliyaha ardayga.**

"Ku celinta dhulka" ("prone restrain") waxaa loola jeedaa marka ardayga loo jeediyo dhulka kaddibna culeys la saaro jirka cunugga si ardayga loogu haayo dhulka. **Waxaa toos loo mamnuucay isticmaalka celcelinta marka jirka cunugga lagu haayo dhulka loona jeediyo dhulka.**

"Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga" waxaa loola jeedaa hoggaamiyaha tababarka brograamka waxbarashada dadweynaha ama cidda loo xil saaray.

Isticmaalka Celcelinta

Haddii lagu guul dareysto dhamaan talooyinka kale aan qodqodin qofka sida sharciga ogol yahay ama loo arko in aysan ku habbooneyn ka hortagga dagaalka ardayga, dabeecadda qofka naftiisa gaarsiiyo waxyeelo iyo/ama xassilinta dabeecadda halista sida suurtogalka ah ee ka dhex dhacda kooxaha ardayda ama lala yeesho arday, waxaa dhici karto in la adeegsado **celcelinta jirka sida tallada ugu dambeyso. Marka lagu sheego erayo kale, celcelinta jirka waxaa la adeegsan karaa oo keliya sida talada ugu dambeyso marka lagu sugan yahay xaalad degdeg ah marka dabeecadda ardayga cabsi degdeg ah oo u culus u geysato waxyeelada jirka ardayga ama dadka kale, kaddibna ardayga uusan ka jawaabin erayada afka looga sheego ama faragelinta sharciga iyo faragelinta dabeecadda aan gudaha u gelin, ama faragelinta nooca loo arko in aysan ku habbooneyn daruufaha.** Celcelin kasta oo loo geysto jirka waa in lagu soo koobo isticmaalka xoog macquul ah sida lagama maarmaanka ah, waqtiga ugu yar ee loo baahan yahay, si ardayga ama xuhin kale oo ka tirsan bulshada dugsiga looga badbaadiyo weerar ama waxyeelo culus, degdeg ah, oo soo gaara jirka. Celcelinta jirka waxaa adeegsan karaa oo keliya shaqaalaha dugsiga ee sida wanaagsan loo tababaray xagga isticmaalka celcelinta jirka.

Waxyaabaha Kale ee ka Reeban Isticmaalka Celcelinta

Toos ayaa loo mamnuucay dhaqanka soo socdo: (i) isticmaalka celcelinta aan waafaqsaneyn qodobada ku qoran kor; (ii) isticmaalka celcelinta si loo fulliyo dishibiliin ama ciqaab, si looga jawaabo burburinta loo geysto hantida ama carqaladeynta nidaamka dugsiga, ama si looga jawaabo diidmada ardaga in uu u hoggaansamo sharciga dugsiga ama ammarka shaqaalaha, ama cabsi gelinta laga soo jeediyo afka marka falalka noocaas aysan ahayn kuwa cabsi geliya in lala kulmi doono waxyeelo degdeg loo geysto jirka, culus; (iii) isticmaalka celcelinta ku haynta dhulka, (iv) isticmaalka celcelinta makaanikada; (v) isticmaalka daawo uusan soo ogolaanin takhtar iyo ogolaashada, qoran, ee laga helo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka; (vi)

isticmaalka celcelinta marka ardayda muujiyaan in aysan neefsan karin ama u muuqdaan in ay ku sugan yahiin dhibaato darran (sida balse kuma eka: dhibaato xagga neefsiga, oohin aan kala go' lahayn ama qufac).

Waxaa dhici karto in aan celcelinta aan loogu darrin sida jawaab qorsheysan oo ka tirsan brograamka waxbarashada ku kooban qofka (IEP). Hase ahatee, ardayda la timaado ku celcelinta dabeecadaha dhaawacyada soo gaara naftooda, agaasimeyaasha/madaxda qeybta sare dugsiyada waxay waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka u soo jeedin doonaan heshis qoran oo gaar ah in si degdeg ah loo isticmaalo celcelinta muddo kooban oo la cayimay. Kiisaska noocaas, qorshaha waa in lagu darro warbixin tafatiran oo la siiyo waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka kuna saabsan soo-noqnoqoshada isticmaalka iyo muudada ay qaadato celcelinta, iyo muddada la yareyn doono isticmaalka cecelinta jirka lana soo afjari doono. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waa in uu helo ogolaashada qoran ee waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka xagga qorshaha ka hor inta aan la fullinin.

Sida Wanaagsan ee loo Fulliyo Celcelinta Jirka

Shaq aalaha dugsiga ee la soo tababaray keliya ayaa fullin doono celcelinta jirka. Shaqaalaha dugsiga ee la tababaray waa kuwa soo qaatay tababar qoto dheer, ama soo qaatay tababarka aasaasiga ee loo baahan yahay sida lagu tafatiray hoos. Mar kasta ay suurtogal tahay, maamulka celcelinta jirka waxaa la joogi doono ugu yaraan hal qof oo qaangaar ah kaasoo aan ka qeybgelin celcelinta jirka. Marka la fullinaayo celcelinta jirka, shaqaalaha dugsiga waa in ay adeegsadaan oo keliya qiyaasta xoogga loo baahan yahay si loo badbaadiyo ardayga iyo dadka kale in aysan soo gaarin dhaawac. Intaas kaddib, shaqaalaha dugsiga ee maamula celcelinta jirka waxay adeegsan doonaan habka ugu ammaanka badan ee la heli karo kuna habboon xaaladda sida waafaqsan sharuudaha ammaanka ee ku tafatiran hoos, iyo waxay joojin doonaan celcelinta sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtogalka ah. Waa in la soo gabagabeeyo dhamaan celcelinta jirka isla marka ardayga uusan halis degdeg ah ku ahayn ardayga ama dadka kale, ama ardayga sheego in uusan neefsan karin, ama haddii la arko in ardayga uu ku jiro dhibaato darran, sida dhibaatada neefsiga ama ooyo ama qufaco muddo dheer. Hase ahatee, waa in la xasuusto in sharuudahaan tababarka aysan macalinka, shaqaalaha ama wakiilka dugsiga ka reebin in uu isticmaalo xoog macquul ah oo loo baahan yahay si ardayda, dadka kale ama naftooda looga badbaadiyo weerar ama in waxyeelo culus oo darran loo geysto jirkooda.

Sharuudaha Ammaanka

Lama ogola in celcelinta loo fulliyo hab ardayga ka hor istaagto in uu neefsado ama hadlo. Inta la fullinaayo celcelinta, shaqaalaha dugsiga waxay si joogto ah ula socon doonaan xaaladda jirka ardayga, sida midabka maqaarka, heerkulka iyo neefsiga. Celcelin kasta ama dhamaan celcelinta waa la sii deyn doonaa islamarkiiba marka shaqaalaha dugsiga ee fulliya celcelinta ogaadaan in ardayga uusan ku jirin halista in uu sabab u yahay waxyeelada jirka ee soo gaara ardayga ama dadka kale. Intaas kaddib, celcelinta waxaa loo fullin doonaa si looga hortago ama loo yareeyo waxyeelada soo gaara jirka. **Haddii, waqti kasta inta ay socoto celcelinta jirka, ardayga muujiyo dhibaato xagga neefsiga ama dhibaato ka soo gaarto jirka, kana mid ah balse ku ekeen, dhibaato xagga neefsiga ama qufac ama oohin muddo dheer socda, ardayga waa in isla markiiba laga sii daayo celcelinta, kaddibna shaqaalaha dugsiga waa in ay qaadaan talaabooyin ay ku raadiyaan kaalmo caafimaad.** Shaqaalaha dugsiga waxay fiirin doonaan iyo waxay tixgelin doonaan waxyaabaha la ogsoon yahay ee soo kooba caafimaadka ama madaxa iyo/ama qorshooyinka faragelinta dabeecadda ee ku saabsan isticmaalka celcelinta jirka ee lagu sameeyo ardayga iyo taariikhda xanuunka la tuhunsan yahay ama la ogsoon yahay. Waqti kasta inta ay socoto celcelinta jirka, shaqaalaha dugsiga waxay raadin doonaan in ay la xariiraan kuwa ku takhasusay dabeecadda ee Xafiiska Adeegyada Dugsiga (Office of Student Services), ama Kooxda Faragelinta Shiddada (Crisis Intervention Team), ama waxay qaadi karaan talaabooyin ay ku raadiyaan kaalmada caafimaadka haddii ay muuqato in ardayga uu muujiyo dhibaatada jirka.

Hababka La Sii Socoshada iyo Sharuudaha Warbixinta

Waqti ku habboon kaddib marka ardayga laga sii daayo celcelinta, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xilsaaray wuxuu fullin doonaa hababka dabagalka ku qoran hoos:

a. Celcelinta oo lala fiiriyo ardayga si wax looga qabto dabeecadda dhallisay celcelinta;

b. Dhacdada la fiiri shaqaalaha dugsiga ee geystay celcelinta si looga hadlo haddii la raacay hababka celcelinta ku habboon; iyo

c. Dabagalka waa in uu dhaco iyadoo ay joogaan ardayda arkay dhacdada, kana mid ah warbixinta la siiyo macalinka, warbixinta la siiyo la-talliyaha ama isticmaalka dhaqanka soo celinta caddaaladda; iyo

d. Ogeysiis qoran oo ku saabsan celcelinta waa in loo diro Xafiiska Adeegyada Ardayga (Office of Student Services) iyo kormeraha ugu dhaw ee agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga.

Kuwa soo socda waa sharuudaha warbixinta uu dugsiga raaco:

a. Isticmaal kasta oo laga sameeyo celcelinta waa in loo sheego, qoraal ahaan, lagu soo daro magaca ardayga la celceliyay, loona jeediyo Xafiiska Adeegyada Ardayga (Office of Student Services) iyo maamulaha ugu dhaw agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga.

b. Xubinta shaqaalaka dugsiga oo fulliya celcelinta jirka ee dhallisa dhaawac soo gaara ardayga wuxuu afka uga sheegi doonaa agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xil saaray celcelinta sida ugu dhakhsiyaha badan kana badneyn xeritaanka maalin dugsiyeedka la siiyay celcelinta. Waxaa la dhamaystiri doonaa warbixin qoran kaddibna la siin doono agaasimaha dugsiga/madaxa qeybta sare dugsiga in ay fiiriyaan isticmaalka celcelinta ugu dambayn maalinta xigta ee la shaqeeyo kaddib marka la fulliyo celcelinta. Haddii agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga uu fulliyay celcelinta, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxay diyaarin doonaan warbixinta kaddibna waxay u gudbin doonaan Maamulaha si ay u fiiriso kooxda uu Maamulaha u xilsaaray.

c. Agaasimaha dugsiga/madaxa qeybta sare dugsiga waxay hayn doonaan diiwaanka dhamaan dhacdooyinka celcelinta jirka.

d. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xilsaaray wuxuu waxay afka ka ogeysiin doonaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ee ardayga sida ugu dhakhsiyaha badan balse ka dambaynin labaatan iyo afar (24) saac kaddib marka la adeegsado celcelinta, iyo warbixin qoran oo boostada lagu soo diro ugu dambayn saddax (3) maalin dugsiyeed kaddib marka la isticmaalo celcelinta jirka. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu ardayga iyo waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka siin doonaa fursad uu faalo ka bixiyo, qoraal ahaan, isticmaalka celcelinta iyo macluumaadka ku jira warbixinta qoran.

e. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu Xafiiska Maamulaha siin doonaa koobiga warbixinta laga qoray celcelinta jirka celcelinta jirka marka celcelinta noocaas dhallisay dhaawac ku yimaada arday iyo koobi laga samayay diiwaanka ku saabsan dhamaan dhacdooyinka la soo sheegay oo ku saabsan celcelinta jirka muddada 30ka maalin ee ka horeyay celcelinta jirka la soo sheegay. **Qoraalkaan waa in la siiyo Xafiiska Maamulaha ugu dambayn hal (1) maalin la shaqeeyo kaddib marka agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga helaan warbixinta qoran.** Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu isu keeni doonaa kooxda taageerada ardayga si ay u sameyaan qiimeynta baahida ardayga u gaarka ah haddii ardayga la celceliyay labo (2) jeer muddo kala duwan todobo (7) maalin ama saddax (3) jeer muddo soddon (30) maalin gudahooda. Xubnaha kooxda heerka darajada iyo shaqaalaha ka shaqeeyo brograamka noocaas sida agaasimaha/madaxa qebta sare dugsiga waxay gaari karaan go'aan, waxay ka qeybgeli doonaan qiimeynta. Xubin kasta oo ka tirsan kooxda taageerada ardayga wuxuu akhrin doonaa warbixin qoran oo ku saabsan celcelinta iyo faalo kasta uu ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ka bixiyaan warbixinta noocaas iyo isticmaalka celcelinta. Fiirinta iyo ka wadahadalka warbixinta noocaas ee kooxda taageerada ardayga kaddib, qiimeynta waxaa ku jira falanqeyn ku saabsan daruufaha u horseeday celcelin kasta, kana mid ah qodobada sida waqtiga maalinimada, maalinta todobaadka, dhacdooyinka ka horeyay, iyo dadka ku lugta yeeshay. Qiimeynta waxaa lagu soo gabogabeyn doonaa qorshe wax looga qabto qodobada laga yaabo in ay ku biiriyeen ka sii

daridda dabeecadda, tixgelinta talooyinka kale ee loo adeegsan karo celcelinta, sida farsamooyinka xassilinta iyo faragelinta suurtogalka ah, iyo xiiladaha iyo go'aanada kale, hadba sida ku habboon, ujeedadana tahay in la yareeyo ama meesha laga saaro in aan mustaqbalka la isticmaalin celcelinta. Haddii agaasimaha/madaxa dugsiga sare ay toos uga qeybgalaan celcelinta, qof si wanaagsan loo tababaray uu Maamulaha u xil saaro ayaa ku hoggaamin doono ardayga in uu taageero wada hadalka kooxda. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxay hubin doonaan in kooxda taageerada ardayga haayso diiwaanka fiirinta arday kasta loona diyaariyo in ay fiiriso Waaxda Waxbarashada Dugsiyada Hoose iyo Sare ee Massachusetts marka ay soo codsato.

Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu bil kasta fullin doonaa ku noqoashada xogta celcelinta ka jirta dugsiga oo idil. Fiirintaan waxay fiirin doontaa sasaanka isticmaalka islamid ahaashada waqtiga maalinta, maalinta todobaadka, ama dadka ku lugta leh; tiraada iyo muddada ay socdaan celcelinta jirka; iyo tirada iyo nooca dhaawacyada, haddii ay jiraan, ee ka dhasha isticmaalka celcelinta. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu go'aan ka gaari doonaa haddii loo baahan yahay ama haddii ay habboon tahay in wax laga baddalo ka-hortagga celcelinta dugsiga iyo dhaqanka maamulka iyo hababka, la fulliyo tababarka shaqaalaha oo dheeraad ah kuna saabsan yareynta celcelinta/xiiladaha istraatijiyada, sida tababrka ku saabsan faragelinta dabeecadda wanaagsan iyo taageerada, ama in uu qaado talaabo kale hadba sida loogu baahdo ama sida ay ugu habboon tahay si loo yareeyo ama loo joojyo celcelinta.

Sharuudaha Tababarka Dagmada

A.Ku Socoto Dhamaan Shaqaalaha Brograamka

Bisha kowaad sannad dugsiyeed kasta, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu dhamaan shaqaalaha brograamka siin doonaa tababar ku saabsan ka hortagga celcelinta iyo taageerada dabeecadda, sharuudaha marka la adeegsado celcelinta iyo siyaasaddaan. Intaas kaddib, xagga dhamaan shaqaalaha dugsiga ee cusub lana shaqaaleyay kaddib uu bilowday sannad dugsiyeedka, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxay bisha kowaad shaqadooda siin doonaan shaqaalaha cusub tababar ku saabsan siyaasaddaan. Tababarka wuxuu ka kooban yahay waxa soo socda: (a) siyaasaddaan iyo hababka la xariira iyo tilmaamaha uu dhaqan geliyay Maamulaha; (b) faragelinta laga yaabo in ay ka reebaan baahida loo qabo celcelinta, sida xassilintadabeecadaha qalifsanwax yaabo kale oo ka duwan celcelinta xagga daruufaha degdegga, sida isticmaalka ka-saaridda (time-out) oo lagu taageero dabeecadda strategy distinct from seclusion; (c) when behavior presents as emergency that requires physical restraint, the types of permitted physical restraints and related safety considerations, including information regarding the increased risk of injury to a student when any restraint is used, in particular a restraint of extended duration; (d) administering physical restraint in accordance with known medical or psychological limitations and/or behavioral intervention plans applicable to an individual student, including known or suspected trauma history; and (e) the role of the student, staff and family in preventing use of restraint; and (f) identification of program staff who have received in-depth training pursuant to 603 C.M.R. 46.03(3) in the use of physical restraint. Fiiri 603 C.M.R. 46.03(2).

B. Loogu Talogalay Shaqaalaha Loo Fasaxay in ay u Adeegaan sida ilo ku Baahsan Dugsiga kuna saabsan sida Habboon ee loo siiyo Celcelinta Jirka

Bilowga sannad dugsiyeed kasta, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ee dugsi kasta waxay aqoonsan doonaa brograamka shaqaalaha ee loo ogolaaday in ay u adeegaan sida ilaha ku baahsan dugsiga si ay kaalmo uga geystaan hubinta maamulka ku habboon celcelinta jirka. Waxa ku jira tababarka qotada dheer waxay ku saleysnaan doonaan kartida iyo ugu yaraan muddo toban iyo lex (16) saac. Dadka noocaas waxay ka qeybqaadan doonaan ugu yaraan hal koorso oo xasuusin ah sanooyinka xiga dugsiga taasoo aan ka yareen sideed (8) saacadood. Tababarka waxaa ka mid ah, balse kuma eka: (a) habab ku habboon ka hortagga isticmaalka celecelinta jirka, sida xassilinta dabeecadda qalifsan, xariirinta iyo isticmaalka siyaabo habab kale oo lagu fulliyo celcelinta; (b) sharaxaadda iyo aqoonsiga dabeecadaha halista xagga ardayda taasoo u horseedi karta isticmaalka celcelinta jirka iyo hababka lagu qiimeeyo halista waxyeelada ka dhasha xaaladaha qaar

si loo ogaado haddii loo baahan yahay isticmaalka celcelinta; (c) tijaabinta waayaha siinta iyo qaadashada celcelinta jirka, tilmaanta ku saabsan saamaynta waxyeealada (waxyeelooyinka) loo geysto qofka la celceliyo, sida tilmaanta ku saabsan kormeerka calaamadaha dhibaatada ka muuqda jirka iyo helitaanka kaalmadaha caafimaadka; (d) tilmaanta ku saabsan warqadaha iyo sharuudaha warbixinta iyo baaritaanka dhaawacyada iyo ashtakooyinka; (e) tilmaanta ku saabsan saamaynta celcelinta jirka ku leedahay ardayga iyo qoyska, aqoonsiga in falka celcelinta laga dhaxlo saamayn, sida, balse kuma eka waxyeelada cilmu nafsiga, sida jirka u shaqeeyo iyo waxyeelada ka dhasha arrimaha bulshada-caatifadda; iyo (f) muujinta ka-qeybgaleyaasha in ay aqoon u leeyahiin siinta celcelinta jirka Fiiri 603 C.M.R. 46.03(3) iyo 46.03(4).

Hababka Ashtakada

A. Go'aan ka Gaarista aan Rasmiga Ahayn Arrinta Ku Saabsan Isticmaalka celcelinta Jirka

Ka hor inta aysan bilaabin habka astakada rasmiga, ardayda ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ee wax ka qaba isticmaalka celcelinta jirka, waxay raadsan karaan in ay xalliyaan arrimaha ay qabaan ee ku saabsan isticmaalka celcelinta jirka marka ay arrinta la soo qaadaan agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga. Ardayga iyo/ama waalidiintooda/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waa in ay arrimahooda ku saabsan isticmaalka celcelinta jirka u diraan agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga muddo toban (10) maalin gudahooda laga bilaabo marka waalidka/ilaaliyaha helo warbixin qoran oo ka socoto dugsiga kor lagu sheegay. Agaasimeyaasha/madaxda qeybta sare dugsiga waxay iskudayi doonaan, sida hoos timaado awoodooda, in ay la shaqeyaan qofka si ay u xalliyaan ashtakada, sida xaqa yahay iyo dhakhso. Haddii ardayga iyo/ama waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka aysan ku qanacsaneyn go'aanka, ama haddii ardayga iyo/ama waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ardayga aysan dooranin go'aan aan rasmi ahayn, markaas ardayga iyo/ama waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka waxay ku dhaqaaqi karaan habka ashtakada rasmiga ee hoos lagu tafatiray.

B. Go'aanka Rasmiga ee laga gaaro Arrinta ku saabsan Isticmaalka Celcelinta Jirka

Ardayga ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga, ee wax ka qaba celcelinta ee sida gaarka ah loo adeegsado, waxay raadsan karaan in wax laga qabto arrimahooda ku saabsan isticmaalka celcelinta jirka iyaga oo ashtako qoran u gudbiya Xafiiska Maamulaha (Office of Superintendent). Ardayga iyo/ama waalidiintooda/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waa in ay warqadaan u gudbiyaan Xafiiska Maamulaha (Office of Superintendent) muddo labaatan (20) maalin gudahooda laga bilaabo marka waalidika/ilaaliyaha helaan warbixinta qoran uu soo diro dugsiga kor lagu tafatiray. Ashtakada qoran waxaa ka mid ah (a) magaca ardayga; (b) magaca dugsiga meesha ay ka dhacday celcelinta jirka ee la soo sheegay; (c) magaca dadka ku lugta leh celcelinta jirka la soo sheegay; (d) aasaaska ashtakada ama arrinta; iyo (e) talaabada lagu saxo ee la soo raadsaday.

Xafiiska Maamulaha (Office of the Superintendent), iyadoo adeegsaneyso kuwa ay u xilsaartay, waxay baaritaan isla markiiba baaritaan ku samayn doontaa ashtakada kaddib marka ay hesho ashtakada. Inta uu socdo baaritaanka, Xafiiska Maamulaha iyo/ama cidda loo xil saaray waxay la xariiri doonaa dadka lagu tilmaamay in ay hayaan macluumaad muhiim oo la xariira ashtakada. Waqti go'an looma dajin karo fullinta baaritaanka maxaa yeelay daruufaha jira waa kala duwan yahiin. Xafiiska Maamulaha iyo/ama cidda loo xilsaaray waxay hubsan doonaan in ashtakada looga shaqeeyo sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtogalka ah. Kaddib marka la dhamaystiro baarista rasmiga, Xafiiska Maamulaha wuxuu la xariiri doonaa qofka soo gudbiyay ashtakada arrinta ku saabsan natiijada ka soo baxda baaritaankeeda iyo go'aanka ay gaartay hadddi loo baahan yahay dhaqan celin.

Waxaa Kaloo la Heli Karaa Habab Kale oo lagu Ashtakoodo

Waa in la xasuusto in qodobada ku jiro qeybtaan aysan ardayga ka reebin in uu adeegsado habka ashtakada ee ku qoran qeybta "Siyaasadda Aan Takoorka Lahayn iyo Mamnuuca Ka Soo Horjeedo Kadeedka Jinsiga" ("Non-Discrimination Policy and Prohibition Against Sexual Harassment" si loo raadiyo

xalka ashtakooyinka takoorka ama kadeedka ee ku saleysan sifo uu sharciga badbaadiyo sida isirka, midabka, asal qaran, jinsiyadda, abtirsiino, diin, da', itaal darri, macluumaadka geneetikada, xaaladda ciidanka, xaaladda guurka, jinsiga, qofka waxa uu yahay, aqoonsiga qofka waxa uu yahay, jinsiga qofka, xaamilonimo, ama xaalad la xariirto xaamilonimada. Sidoo kale waa in la xasuusto in qodobada ku jira qeybtaan aysan ka reebin ardayga in uu isticmaalo habka ashtakada ku qoran Qeybta 23.0 *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda* in uu raadsado in xal laga gaaro ashtakooyinka la xariira marka ardayga laga xayuubiyo xuquuqda ku qoran *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda*.

XEERARKA ASLUUBTA

(Siyaasadaha)

16. Horudhaca

Dugsi kasta wuxuu leeyahay sharciyo u gaar ah - loo yaqaan sharciyada ku saleysan dugsiga - oo ardayda la filaayo in ay raacaan. Haddii ardayga uu jebiyo sharci u dagsan dugsiga, waxaa dhici karto in la mariyo dishibiliinka. Sharciyada ku saleysan dugsiga waxaa qora guddi ka kooban maamuleyaal, macalimiin, waalidiin/ilaaliyeyaal/bixiyeyaasha daryeelka iyo ardayda dugsiga dhexe ee ka tirsan dugsi kasta, waxaana la fiiriyaa horaanta kuleyle (spring) kasta. Sharciyada ku saleysan dugsiga waxaa lagu soo dhajiyaa gudaha fasal kasta iyo waxaa loo diraa guriga oo loo dhiibaa ardayga. Raacidda sharciyada ku saleysan dugsiga kaddib, dugsi kasta waa in uu sidoo kale raaco koodka asluubta ku qoran *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook)*. *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook)* wuxuu soo taxaa sharciyada la filaayo in dhamaan ardayda raacdo. Waxaa dhici karto in ardayga jebiya sharciyadaan in laga joojiyo ama laga saaro dugsiga. Sharciyada u dagsan dugsiga iyo *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook)* waxaa lagu dabaqaa dabeecadda ardayda inta ay ku sugan yahiin dugsiga, joogaan hawl dugsiga kafaalo qaaday, iyo inta ay u socdaan ama ka soo noqdaan dugsiga.

Xoos waxaa ku qoran soo koobidda *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook)* . Waxaad agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga heli kartaa koobiga sharciyada ku saleysan dugsiga uu cunugaada tago. Waxaad kadoo agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ka heli kartaa koobiga *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook)* . Waxaa kaloo lagu soo dhajiyaa bogga internetka dugsiga.

Intaas kaddib, waxaa hoos lagu soo qoray sharaxaad kooban oo ku saabsan siyaasadaha kala duwan ee CPS, kana mid ah siyaasadaha ka soo horjeedo takoorka. Shaqaalaha ama ardayda jebisa siyaasadahaan waxaa dhici karto in laga qaado talaabo dishibiliin. Si aad u heshid koobi laga qaaday siyaasadahaan, la xariir agaasimaha dugsiga/madaxa qeybta sare dugsiga.

17. Falsafada

Siyaasadaha dishibiliinka Guddiga Dugsiga Cambridge waxay dhamaan shaqaalaha ku dhiiri geliyaan in ay kaalmeyaan ardayda si ay u xalliyaan dhibatooyinka iyagoo aan qaadan talaabo dishibiliin fog. Aadaab darrada ardayga waxay tilmaan u noqon kartaa dhibatooyin adag oo hoos yaala uu ardayga laga yaabaa in uu la leeyahay dugsiga iyo bulshada, iyo waa in ay ku dadaalaan dugsiyada hoose si loogu kaalmeeyo ardayda iyo waalidiintooda ama bixiyeyaasha daryeelka si ay wax uga qabtaan dhibatooyinkaan. Badanaa ka-joojinta ama ka-saaridda waa tallada ugu dambeyso ee la qaato. Shaqaalaha dugsiga waxaa lagu dhiirigelinaa in ay raacaan iyo dhamaystiraan dhamaan ciqaabta la heli karo iyo ku habboon ama talaabadaha dishibiliinka si loo horumariyo aqoonta iyo asluubta wanaagsan ee ardayga ka hor inta aan la raacin ka-joojin ama ka-saarid.

Dugsiyada waxay iskudayi doonaan in ay hal-hal ula shaqeyaan ardayda, iyaga oo iskudaya in ay helaan meesha ay ka dhallatay dhibaatada kaddibna ku talliyaan tale kalo. Marmar waxaa lagama maarmaan ah in lala shiro waalidka/ilaaliyaha/bixiyeha daryeelka, ama in la soo booqdo dugsiga. Isgaarsiinta ka dhexeyso guriga iyo dugsiga waxay muhiim u tahay guul kasta. La-talliyeyaasha dugsiga ama takhatiirta cilmu nafsiga waa ilo laga helo tallooyin iyo xal. Dhexdhexaadinta asxaabta, tababarada ay bixiyaan macalimiinta, Big Brothers iyo Sisters, waa hanti qiimo badan.

Cambridge waxay aad ugu nasiib badan tahay in ay leedahay Kooxaha horumarinta bulshada oo ka jawaaba una arka muhiim baahida ardayda qabta dhibaato. Tusaalooyinka qaar Kooxahaan waa: Kooxaha Taageerada Ardayga (Student Support Teams) (SSTs); Kooxaha Taageerada Macalinka (Teacher Assistance Teams) (TATs); iyo Kooxaha Jawaabta Maamulka (Administrative Response Teams) (ARTs). Wakaaladaha bulshada waa iskaashato muhiim ah xagga bixinta adeegyada taageerada la qiimeeyo. Wakaaladahaan waxay waano qaali ah siiyaan Kooxaha dugsiga, iyo waxay qofqof ama kooxo ula shaqeyaan ardayda Adeegyada ka-hortagga noocaan waa wax ka sii jeediya dabeecadda aan habbooneyn, ka-joojin suurtogal ah, iyo sida suurtogalka ah, marka la fiiriyo muddada dheer, in ardayda ka tagaan dugsiga.

Siyaasadaha Dabeecadda iyo Dishibiliinka

18. Cabidda Sigaarka: Siyaasadda Ka Madaxbanaan Tubaakada

Sharciyada Guud ee Massachusetts (Massachusetts General Laws), Cutubka 71, Qeybta 37H waxay mamnuuceen in qofka ama dhamaan shaqaalaha dugsiga isticmaalaan badeecada tubaakada gudaha dhismooyinka dugsiga, xerada dugsiga ama gudaha basaska. Siyaasadda waxay la xariirtaa dhamaan dugsiyada la kafaalo qaaday, munaasabadaha la xariira iyo cayaaraha atleetikada. Shaqaalaha iyo ardayda jebiya sharciyadaan waxaa laga qaadi doonaa talaabo dishibiliin. Xubin kasta oo ka tirsan shaqaalaha oo arka arday sigaar ku cabba hantida dugsiga, waa in uu ardayga weydiiyo magaciisa una sheego sigaarka uu mamnuuc ka yahay hantida dugsiga. Magaca ardayga waxaa la siin doonaa agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama kaaliyaha agaasimaha ee ogeysiin doono kalkaalinta dugsiga iyo waalidka ama ilaaliyaha labadaha. Brograamka Kaalmada Tubaakada (Tobacco Assistance Program) (TAP) waxaa laga heli karaa dugsiyadena dadweynaha, waxaa loola jeedaa in lagu kaalmeeyo kuwa doorto in ay joojiyaan isticmaalka tubaakada.

19. Mamnuuca ka soo Horjeedo Mukhadaraadka, Hubka iyo Weerarka Loo Geysto Shaqaalaha Dugsiga

(Statutory Prohibition Against Drugs, Weapons and Assault on School Staff)

Sharciyada Guud Massachusetts (Massachusetts General Laws) cutubka 71, qeybta 37H waxaa ku qoran, qeybta munaasabka ah, in:

Arday kasta oo jooga xerada dugsiga ama munaasabo dugsiga kafaalo qaaday ama munaasbo la xariirta dugsiga, sida cayaaraha atleetikada, oo haysta hub halis ah, kana mid ah, balse ku ekeen, qori ama middi; ama maado la kantaroolo sida ku sifeysan cutubka sagaashan iyo afar C, kana mid ah, balse ku ekeen, hashiish, cocaine iyo heroin, wuxuu agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ka saari karaa dugsiga ama dugsiga dagmada.

(b) Arday kasta oo weerar ku qaada agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga, kaaliyaha agaasimaha, Madaxa Kulliyadda, macalin, kaaliyaha macalinka ama shaqaale kale oo ku sugan xerada dugsiga ama joogamunaasabo uu dugsiga kafaalo qaaday ama munaasabo dugsiga la xariirto, sida cayaaraha atleetikada, waxay hoos imaan karaan in Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga uu ka saaro dugsiga.

(c) Arday kasta oo lagu soo eedeeyo jebinta baragaraafka (a) ama (b) waa la ogeysiin doonaa, qoraal ahaan, fursadda dhageysiga; hase ahatee, ardayga wuxuu la imaan karaan cidda mattasha, iyo fursadda in uu soo bandhigo caddeyn iyo marqaatiyo lagu qabto dhageysiga la soo sheegay, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga hortiisa

Dhageysigaas kaddib, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu go'aan ku gaari karaa, hadba sida ay u gartaan, in ay ardayga ka joojiyaan baddalkii ay ka saari lahayeen ardayga uu agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga u gartaan in uu jebiyay baragraafka (a) ama (b).

(d) Arday kasta oo laga saaro dugsiga dagmada sida waafaqsan qodobadaan wuxuu xaq u yeelan doonaa in uu racfaan ka qaato maamulaha. Ardayga la saaray wuxuu haysan doonaa toban maalin laga bilaabo taariikhda ka-saaridda ee loo baahan yahay in maamulaha lagu ogeysiiyo racfaankiisa. Ardayga wuxuu

xaq u leeyahay in la siiyo la-talliye inta uu socdo dhageysiga maamulaha hortiisa. Xaajada mowduuca racfaanka kuma koobnaan doonto keliya xaqiiqada haddii ardayga uu jebiyay qodobada ku jira qeybtaan.

Marka ardayga laga saaro sida hoos timaado qodobada qeybtaan, ma jiro dugsi ama dugsiga dagmada oo ka tirsan Commonwealth oo lagu qasbi karo in ay ogolaadaan ardayga noocaas ama in ay siiyaan adeegyada waxbarashada. Haddii ardayga la soo qaaday soo dalbado gelitaanka dugsi kale ama dugsiga dagmada, maamulaha dugsiga dagmada la soo dalbaday wuxuu codsan karaan, wuxuuna maamulaha dugsiga fulliyay ka-saaridda ardaygaas oraah qoran oo ku saabsan asbaaba loo fulliyay ka-saariddaas.

20. Siyaasadda Mukhaadaraadka

Ardayga waxaa loo arkaa in uu jebiyay siyaasadda mukhaadaraadka haddii lagu helo xerada dugsiga, baska, ama munaasabadaha dugsiga kafaalo qaaday ama la xariira dugsiga, sida cayaaraha altleetikada, haysashada maadada la kantaroolo sida ku sifeysan Cutubka 94C sida, balse kuma eka, xashiiska, kokaine ama heroin. Kiisaska noocaas, waxaa dhici karto in agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga uu ardayga ka saaro dugsiga.

21. Siyaasadda Hubka

Ardayga wuxuu jebiyay siyaasadda hubka haddii: ardayga uu hub keeno dugsiga; isticmaalo hub gudaha xerada dugsiga ama meel ay ka socoto hawsha dugsiga; ama uu hub ku haysto lokarka ama jeebka, ama, inta uu joogo dugsiga, saaran yahay baska ama saacadaha dambe joogo hawsha dugsiga.

Hubka sharci ahaan halis ah waxaa ka mid ah shay kasta oo la qaato loona adeegsado in lagu cabsisiiyo ama la rabo in waxyeelo lagu gaarsiiyo qof kale. Hubka noocaas waxaa ka mid ah:

Hubka xabbadda ka dhacdo nooc kasta, kana mid ah qoryaha BB iyo qoryaha hawada,

- Middi kasta oo labada af ku leh sakiin, sakiinta la baddali karo ama middi kasta oo ku shaqeyso moolada automaatikada taasoo sakiinta ka soo bootiso gacan qabadka; fiiqan kasta ama ableey kasta;
- Birta la gashto faraha, garuunka (nunchaku), biraha la tuuro (shuriken) ama shay kale oo fiiqan oo la mid ah sida xiddigga oo loogu talogalay in uu dhaawaco qofka marka la tuuro;
- Garuunka la tuuro (black jacks) iyo qoryaha la afuufo (blow guns);
- Suun kasta oo lagu xerto gacanta hoose ama labbis ka sameysan maqaar ee lagu suray birar, dhibco ama ulal iyo qalab kasta oo la mid ah oo laga sameyay maado kale;
- Masaarta (mace), qoryaha gaaska (tear gas), ama maado kasta oo kale oo loo adeegsado in lagu naafeeyo qof kale;
- Hawlaha dabka ama qaraxyada nooc kasta; iyo
- Dhamaan hubka noocaas sida ku sharaxan Sharciyada Guud ee Massachusetts (Massachusetts General Laws) 269, Qeybta 10.

Waxaa jira waxyaabo kale, aan lagu sifeynin in ay yahiin hub sida hoos timaado Sharciyada Guud ee Massachussetts (Massachusetts General Laws) 269, Qeybta 10, loo ogoleyn xerada dugsiga, munaasabadaha dugisiga kafaalo qaado, iyo/ama munaasabadaha la xariiro dugsiga, sida cayaaraha atleetikada. Isticmaalka waxyaabahaan la mamnuucay waxay dhallin doontaa ka-joojin iyo waxay dhallin doontaa in laga saaro dugsiga. Waxaa ka mid ah:

- Middiyada nooc kasta, qaab kasta ama dherer, sida middiyada la geliyo faraantiga furaha iyo middiyada leysku laabo;
- Sakiinta cabbir kasta
- Sakiinta, sakiinta lagu jaro sanduuqyada; iyo
- Silsiladda, suunka birta, ama bi kale aan laga lahayn ujeedo waxbarasho.

Waxaa kaloo jira waxyaabo kale oo caadi ah oo haddii loo adeegsado siyaabo halis ah oo cabsi geliya dadka, taasi waxay dhallin kartaa in qofka laga joojiyo ama laga saaro dugsiga. Erayada noocaas waxaa ka mid ah:

- Laabisyada, maqasta, cirbadaha iyo biinanka, masaamiirta, qalabka looxa, iwm.
- Ka qeybgalka ama iskudayidda in laga qeybgalo farsamo atleetiko halis ah iyo aan macquul ahayn oo khatar gelisa caafimaadka ama ammaanka qofka, sida isticmaalka koofida birta ama qalabka kale isboortiga ee loo isticmaalo sida hub.

Xasuusin: Waxyaabaha ilmaha ku caryaraan, nooc kasta, sida qoryaha iyo middiyada, looma ogola xeryaha dugsiga, munaasbadaha dugsiga kafaalo qaaday ama munaasbadaha la xariira dugsiga, kana mid ah cayaaraha atleetikada· Waxyaabaha sida kuwaan waa lala wareegi doonaa, waxayna dhallin karaan ka-joojin iyo ka-saarid haddii agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama kaaliyaha agaasimaha u gartaan in la jebiyay siyaasaddaan·

22. Weerarka Shaqaalaha

Arday kasta oo weerar ku qaada agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga, kaaliyaha agaasimaha, macalinka, kaaliyaha macalinka ama shaqaale kale oo ku sugan xerada dugsiga ama jooga munaasabo uu dugsiga kafaalo qaaday ama munaasabo dugsiga la xariirto, sida cayaaraha atleetikada, waxaa dhici karto in uu ka saaro agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga. Falka waxaa loo arkaa weerar haddii ardayga:

- Si ula kac, ogsoon, ama taxadir la'aan uu dhaawaca jirka u geysto qof kale;
- Uu si ula kac ah, ogsoon, ama taxadir la'aan dhaawaca jirka u geysto qof kale;
- Si ula kac ah ama ogsoon sababa, u hanjaba ama isticmaala xoogga jirka ka soo horjeedo qof kale daruufaha si uu u abuuro cabsi macquul ah oo ku saabsan halista ku soo socota iyo awoodda iminka muuqata in la fulliyo iskudayidda haddii aan laga hortagin.

23. Ardayda Lagu Eedeeyo ama Lagu Xakumo Dambi Culus

Haddii ardayga lagu eedeeyo dambi culus (felony) iyo joogitaankooda dugsiga ku sii socda in uu dibaato ka sii darta u keeno danaha guud ee dugsiga, ardayga waxaa dhici karto in laga joojiyo ilaa maxkamadda ka soo saarto xukun. Haddii la xakumo, waxaa dhici karto in agaasimaha/madaxa dugsiga sare uu ardayga ka saaro haddii joogitaankooda sii socoocidda ee dugsiga uu waxyeelo darran oo la arki karo ku leeyahay wanaagga guud ee dugsiga.

Labada xaalad, ardayga iyo waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka waa la ogeysiin doonaa qoraal ahaan waxa lagu soo eedeyay iyo asbaabta dhallisay dishibiliinka ka hor inta aan la saarin kaddibna la siin doono fursad lagu dhageysto. Haddii la saaro dishibiliin, ardayga waxaa la siin doonaa ogeysiis qoran oo ku saabsan xaqa ay u leeyahiin in ay racfaan qaataan iyo socodsiinta racfaanka laga qaato dishibiliinka; hase ahatee, dishibiliinka wuxuu shaqeyn doonaa ka hor inta aan la qaadanin dhageysiga racfaanka uu fulliyo Maamulaha ama cidda loo xil saaray.

24. Kadeedka

Kadeedka waxaa loola jeedaa dhaqanka ama habka bilaabidda fasalka ardayga ama kooxda, haddii lagu sugan yahay hantida dadweynaha ama hantida gaarka, taasoo si ula kac ah ama si taxdir la'aan ah halis u gelisa caafimaadka jirka ama madaxa arday kale. Dhamaan ardayda dugsiga sare waxaa laga rabaa in ay saxiixaan oraah ka socoto Waaxda Aqoonta Dugsiga Hoose iyo Sare ee Massachusetts (Massachusetts Department of Elementary and Secondary Education) kuna saabsan kadeedka.

Kadeedka waa jebinta siyaasadda dugsiga. Waxaa dhici karto in dugsiga laga joojiyo ardayda ku lugta yeesah kadeedka. Waxaa la gudbin doonaa ashtakada dambiga. Macluumaadka ku saabsan mowduucaan waxaa loo qeybiyaa dhamaan ardayda marka la gaaro waqtiga la furo dugsiga. *Sharciyada Guud ee Massachusetts (Massachusetts General Laws), Cutubka 269, Qeybta 17*

Dambiga Kadeedka; Sifeynta; Ciqaabta

Qof kasta oo ah abaabulaha ugu muhiimsan ama ka qeybgala dambiga kadeedka, sida ku sifeysan halkaan waxaa lagu ciqaabi doonaa ganaax aan ka badneen saddax kun doolar ama xabsi guriga dhaqan celinta muddo aan ka badneen hal sanno, ama labadaba ganaaxa iyo xabsiga noocaas.

Erayga kadeed, sida loo isticmaalay qeybtaan iyo qeybaha toban iyo sideed iyo toban iyo sagaal waxaa loola jeedaa dhaqan kasta ama habka ku bilaabidda ururka ardayga, ha ku sugnaado hantida dadweynaha ama hantida gaarka, taasoo si ula kac ah ama si taxadir la'aan halis u gelisa caafimaadka jirka ama madaxa ee arday kasta ama qof kasta. Dhaqanaka noocaas waxaa ka mid ah karbaashka, summadeynta, qasabka jimicsiga,

u dhigidda cimilada, qasabka cuntada, qamrada, cabbitaanka, mukhadaraadka ama maado kale, ama daweynta ama jimicsiga laga yaabo in uu waxyeelo gaarsiiyo caafimaadka jirka ama ammaanka arday ama qof noocaas ah, taasoo culeys baddan saarta ardayga ama qofka noocaas, sida muddada dheer ee qofka laga ilaaliyo hurdada ama nasashada ama muddo dheer laga fogeeyo dadka.

Iyadoo aan la fiirinin qodobada kale ee ku jiro qeybtaan kana soo horjeedo, ogolaashada ma aha wax qofka ka difaaca xukunka hoos yimaada qeybtaan.

Waxaa ku soo darray St. 1985, c. 536; waxaa baddalay St. 1987, c. 665. Sharciyada Guud ee Massachusetts (Massachusetts General Laws) Qeybta 269, Qeybta 18

Waajibka in la soo Sheego Kadeedka

Qof kasta oo ogsoon in qof kale yahay dhibanaha kadeedka sida ku sifeysan qeybta toban iyo todobo taasoo ah goobta dambiga noocaas uu ka dhacay, ilaa qofka noocaas uu sidaas samayn karo lana kulmin khatar ama halis u soo jiidin naftiisa ama dadka kale, u sheego dambiga noocaas sarkaal ka tirsan ciidanka hirgelinta sharciga ee ku habboon sida ugu dhakhsiyaha badan oo macquul ah Qof kasta oo ku dhaca in uu soo sheego dambiga noocaas waxaa lagu ciqaabi doonaa ganaax ama in ka yar kun doolaar.

Waxaa ku soo darray St. 1985, c. 536; waxaa baddalay St. 1987, c. 665. Sharciyada Guud ee Massachusetts (Massachusetts General Laws) Qeybta 269, Qeybta 19

Sharciyada La Siiyo Kooxsaha Ardayda (Student Groups); Oraahda u Hoggaansamida (Compliance Statement) iyo Siyaasadda Dishibiliinka (Discipline Policy) Loo Baahan Yahay

Hay'ad kasta oo ka shaqeyso waxbarashada sare iyo hay'ad kasta oo la shaqeyso dadweynaha iyo dannaha gaarka xagga waxbarashada ka dambeyso dugsiga sare waxay koox kasta ardayda, Kooxda ardayda ama ururka ardayda ee qeyb ka ah hay'ad kasta ama hay'adda u aqoonsan tahay ama u ogoshahay in uu isticmaalo ama hay'adaheeda ama hay'adda u taqaan in ay jirto sida koox arday aan cidna la safneen, Kooxda ardayda ama ururka ardayda, koobiga qeybtaan iyo qeybaha toban iyo todobo iyo toban iyo sideed; hase ahatee in u hoggaansamida hay'adda sharuudaha qeybtaan in arrinta la xariirta oo koobi ka samayso qeybtaan iyo qeybta toban iyo todobo iyo toban iyo sideed la siiyo kooxaha ardayda aan la safneen, Kooxda ama ururada ma ahaan doonaan caddeyn la xariira aqoonsiga ururka ama la wadaagga kooxaha ardayga aan la safneed, Kooxaha ama ururada.

Koox kasta oo noocaas ah, Kooxda ama ururka waxay koobiga qeybtaan iyo qeybaha toban iyo todobo iyo toban iyo sideed u qeybin doonaan mid kasta oo ka mid ah xubnaha, dadweynaha caadiga, ballan qaadyada ama dadka soo dalbada in ay xubin ka noqdaan. Koox kasta oo ka mid ah kooxaha noocaas, Kooxda ama ururka, uu mattalo sarkaalka loo xil saaray, in uu sannad kasta geeyo, hay'adda aqoonsi la xaqiijiyay oo sheega in kooxda noocaas, Kooxda ama ururka heshay koobiga qeybtaan iyo qeybaha toban iyo todobo iyo toban iyo sideed, in mid kasta oo ka mid ah xubnaheeda, xubnaha cusub, ballan qaadyada, ama arjiileyaasha helaan koobiga qeybaha toban iyo todobo iyo toban iyo sideed, iyo in kooxda noocaas, Kooxda ama ururka fahamto iyo waafaqdo in ay u hoggaansanto qodobada qeybtaan iyo aqeybaha toban iyo todobo iyo toban iyo sideed.

Hay'ad kasta oo qaabilsan waxbarashada dugsiga sare iyo hay'ad kasta oo ka shaqeeysa dadweynaha ama gaar waxay, ugu yaraan, sannad kasta ama bilowga diiwaan gelinta, qof kasta oo isku qora sida arday waqti buuxa hay'adda noocaas koobiga qeybtaan iyo qeybaha toban iyo todobo ilaa toban iyo sideed.

Hay'ad kasta oo ka shaqeyso waxbarashada dugsiga sare iyo hay'ad kasta oo u shaqeyso dadweynaha ama dannaha gaarka xagga waxbarashada dugsiga sare waxay guddiga waxbarashada sare u gudbin doontaa, ugu yaraan sannad kasta, warbixin iyo marka laga hadlo hay'adaha sare, guddiga waxbarashada ee qaabilsan shahaadeynta in hay'adaha noocaas u hoggaansantay mas'uuliyadda saaran si loo ogeysiiyo kooxaha ardayda, Kooxaha ama ururada iyo si loo ogeysiiyo arday kasta oo ku qoran waqti buuxa ay iyada ku qortay in ay jiraan qodobo qeybtaan iyo qeybaha toban iyo todobo iyo toban iyo sideed iyo sidoo kale shahaadeynta in hay'adda laga hadlay qaadatay siyaasadda dishibiliinka xagga abaabuleyaasha iyo ka qeybgaleyaasha kadeedka, iyo in siyaasadda noocaas la dajiyay laguna xoojiyay gudaha buugga ardayga ama isla siyaabaha isgaarsiinta siyaasadaha ardaydeeda. Guddiga waxbarashada sare iyo, marka laga hadlo hay'adaha sare, guddiga

waxbarashada waxay soo saari doonaan sharciyo lagu maamulo nuxurka iyo soo noqnoqnoshada warbixinada noocaas, kaddibna waxay warbixin siin doonaan xeer ilaaliyaha guud xagga hay'ad kasta oo ku guul dareysata in ay soo gudbiso warbixinta noocaas.

Waxaa ku soo darray St. 1985, c. 536; waxaa baddalay St. 1987, c. 665; St. 1998, c. 161, ss. 557, 558

25. Jejebinta

Qofna looma ogola in uu jejebiyo, burbur u geysto, haleeyo ama ruqsad la'aan galo hantida dugsiga. Dhamaan ardayda iyo shaqaalaha waxaa lagu dhiiri gelinaa in ay daryelaan iyo xushmeyaan dhismooyinka dugsiga. Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxay mas'uul ka noqon doonaan burbur kasta uu cunugga gaarsiiyo dhismaha. Waaxda dugsiga waxay dacwad ku qaadi kartaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka. Dadka warar ka haaya burburka loo geesytay dhismaha ama waxa ku dhex jira waa in ay u soo sheegaan Xafiiska Ammaanka iyo Nabad Gelyada (Office of Safety and Security) In sida aan habbooneyn loo qoro ama la buufiyo dugsiga ama wareegga dugsiga - darbiyada lagu qoro, miiska la xariiqo, la dayaco buugga, jebinta dariishadda, ama burburinta qalabka, ama burburinta alaabta dhamaan waa gafaf lagu samayay xaqa bulshda dugsiga u leedahay jawi nadiif ah. Ardayda burburinta iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxaa loo qabsan doonaa in ay mas'uul ka yahiin.

26. Dagaalka/Weerarka Jirka

Waxaa dhici in talaabo dishibiliin darran oo degdeg ah in laga qaado dadka ka qeybgala dagaal ama dhiirigeliya si kastaba ha ahaatee. Hubaal, looma dulqaadan doono dabeecadda carqaladeynta noocaan. Ciqaabta dabeecadaan waxay ahaan kartaa ka-joojinta hal maalin ilaa toban maalin, taasoo ku xeran heerka qeybta ugu lug leedahay, tirada gafafka iyo/ama sida dhacdada u culus tahay. Waa in la xasuusto in weerarka ama weerarka iyo garaaca loo geysto qofka yahiin dambi, iyo in boliiska la ogeysiiyo dhamaan weerarka jirka, iyo in waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka la ogeysiiyo xaqa ay u leeyahiin in ay ashtako u gudbiyaan maxkamadda dagmada Middlesex County Court. Sida ku xeran daruufaha, CPS wuxuu soo gudbin karaa ashtako la xariiro dambi ku saabsan weerar iyo/ama seerar iyo garaac. Ardayda waa ogsoon yahiin goorta ay la kulmaan qilaaf, waxaana laga filaa in ay raadsadaan kaalmo haddii loo baahdo, in qilaafka lagu xalliyo nabad. Ardayga wuxuu mas'uul ka yahay in uu iska ilaaliyo dagaalka iyo in uu xaaladda gaarsiiyo sarkaal kasta oo ka tirsan dugsiga. Dhexdhexaadiyeyaasha ardayga-kulliyadda waxaa laga heli karaa Xafiiska Ammaanka iyo Nabad Gelyada (Office of Safety ana Security) si loo xalliyo qilaafaadka.

Tilmaamaha soo socda waxaa loo isticmaali karaa in dishibiliin la mariyo ardayda ka qeybgasha dagaal ama weerarka jirka.

Qeybta 1aad - Kiciye/Horumariye/Bilaabe:

Ardayga laga cosdaday in uu ka tago agagaarka goobta muranka iyo qaska ka dhacay ama dagaal ee diida in uu sidaas sameeyo, wuxuu hoos yimaada qeybtaan.

> Gafka Kowaad - Ilaa ka joojinta ilaa saddax maalin dibadda dugsiga. Waalidka/Ilaaliyaha/Bixiyaha Daryeelka notified.
>
> Gafka Labaad - Ka-joojinta dibadda dugsiga saddax maalin ilaa shan maalin. Shirka Waalidka/Ilaaliyaha/Bixiyaha Daryeelka.
>
> Gafka Saddaxaad - ka-joojinta dibadda-dugsiga muddo shan-maalin ilaa toban-maalin. Shirka Waalidka/Ilaaliyaha/Bixiyaha Daryeelka. Dhageysiga ka Saaridda oo lagu qabto xafiiska Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga.

Qeybta 2 - Weerarka iyo Garaaca Loo Geysto Qofka:

Weerarka lagu qaado qofka iyo/ama weerarka iyo garaaca loo geysto qofka waa dambi. Waa la ogeysiin doonaa boliiska kaddibna dhibaneyaasha waxaa la ogeysiin doonaa xaqa ay u leeyahiin in ay ashtako ka soo gudbiyaan dambiga. CPS waxay soo gudbin kartaa ashtakada dambiga ka soo horjeedo qofka geystay dambiga.

> Gafka Kowaad - Saddax maalin ilaa shan maalin ka-joojinta muddo shan maalin. Shirka Waalidka/Ilaaliyaha/Bixiyaha Daryeelka.
>
> Gafka Labaad - Shan maalin ilaa toban maalin ka joojinta ddibadda dugsiga Dhageysiga ka Saaridda oo lagu qabto xafiiska Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga.

Qeybta 3aad - Dagaalka/Weerarka Leys Dhaafsado iyo Garaaca:

Gafka Kowaad - Ilaa saddax maalin oo laga joojiyo dugsiga. Shirka Waalidka/Ilaaliyaha/Bixiyaha Daryeelka. Dhexdhexaadinta la diyaariyo lana dhiirigeliyo marka lagu soo noqdo dugsiga.

Gafka Labaad - sadda ilaa shan maalin oo laga joojiyo dugsiga. Shirka Waalidka/Ilaaliyaha/Bixiyaha Daryeelka. Waxaa la heli karaa lana dhiirigeliyaa dhexdhexaadin marka lagu soo noqdo dugsiga.

Gafka Saddaxaad - Ka joojinta dibadda dugsiga muddo shan maalin ilaa toban maalin. Dhageysiga ka Saaridda oo lagu qabto xafiiska Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga.

Qeybta 4aad – Dagaalka/Weerarka leys dhaafsado iyo Garaaca gudaha fasalka, makhaayadda qaxwadda, isu imaashada, suramada, waqtiga la maro, ama dheesha dugsiga, iwm. Dagaalada (gacan qaadka ama afka), waxay xaalad aan dagganeyn ka abuuraan gudaha jawiga dugsigena marka ay qarxaan waqti kasta balse gaar ahaan marka ay joogaan dad badan. Dabeecadaan ku dhisan carqaladeynta iyo waxyeelada waxaa loo baahan yahay in laga qaado talaabo dishibiliin adag. Tusaalooyinka waxaa ka mid ah: waqtiga qadada gudaha makhaayadda, dibadda waqtiga la fasaxo ama marka la soo galo dhismaha, munaasabadaha isboortiga, ama isu imaasho kasta oo laga fulliyo dugsiga ama munaasabo la xariirto.

Gafka Kowaad - Ilaa saddax maalin ka joojinta dibadda dugsiga. Shirka Waalidka/Ilaaliyaha/Bixiyaha Daryeelka. Dhexdhexaadinta la diyaariyo lana dhiirigeliyo marka lagu soo noqdo dugsiga.

Gafka Labaad: Ka-joojinta dibadda dugsiga saddax maalin ilaa shan maalin. Shirka Waalidka/Ilaaliyaha/Bixiyaha Daryeelka. Waxaa la heli karaa lana dhiirigeliyaa dhexdhexaadin marka lagu soo noqdo dugsiga.

Gafka Saddaxaad - ka-joojinta dibadda-dugsiga muddo shan-maalin ilaa toban-maalin. Dhageysiga ka Saaridda oo lagu qabto xafiiska Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga.

27. Siyaasadda ka soo Horjeedo Gardareysiga iyo Ka Hortagga Gardareysiga iyo Qorshaha Faragelinta

CPS waxay ballan qaaday in ay dhamaan ardayda u abuurto jawi waxbarasho oo ku dhisan xushmad, daryeel, oo ammaan ah iyo waxay si adag u hirgelisaa kana mamnuucday gardageysiga loo geysto ardayda iyo waxay kaloo si adag u hirgelisaa mamnuuca ka soo horjeedo aar gudashada qof kasta oo soo sheega gardareysiga, bixiya macluumaad inta ay socoto baaritaanka gardareysiga ama arka ama haaya macluumaad leysku haleyn karo oo ku saabsan gardareysiga. Qorshooyinka ku shaqeeyo bogga, ay wadajir uga shaqeyeen maamulka dugsiga iyo shaqaalaha, ardayda, qoysaska iyo xubnaha bulshada waxay ku dadaali doonaan in: (1) uu ku kaalmeeyo ardayda, dhamaan da' kasta iyo awood kasta, in ay helaan ammaan, u dhaqmaan si xikmad ku jirto, iyo in ay isku kalsoonadaan; iyo (2) in dadka waaweyn lagu kaalmeeyo in ay si wanaagsna uga jawaabaan warbixinta ardayda iyo fikradahooda.

Gardareysiga waxaa lagu sifeyaa isticmaalka lagu celceliyo uu geysto hal arday ama ka badan, ama xubin kar tirsan shaqaalaha dugsiga sida, balse kuma eka, tababare, maamule, kalkaalinta dugsiga, shaqaalaha makhaayadda, ilaaliyaha, wadaha baska, tababaraha atleetikada, la-talliyaha hawsha ka baxsan manhajka ama farsamo yaqaanka soo jeedinta qoran, laga sheego afka ama elataroonig ah ama fal laga sameeyo jirka ama dhaqaaq ama isu keenidooda, loona jeediyo dhibane: (i) taasoo waxyeelo u geysata jirka ama caatifadda dhibanaha ama burbur u geysata hantida dhibanaha; (iii) dhibanaha gaarsiisa cabsi in loo geysto waxyeelo naftooda ama burburinta hantidooda; (iii) abuurto jawo ku dhisan cadaawad loo geysto dhibanaha; (iv) u gafta xuquuqda dhibanaha jooga dugsiga; ama (v) maadiyan iyo dhab ahaan carqaladeyso hawsha waxbarashada ama nidaamka hawsha ka socoto dugsiga. Xagga siyaasaddaan, gardareysiga waxaa ka mid ah gardareysiga internetka.

Sida waafaqsan sharciga gobolka, Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay aqoonsan yahiin in ay jiraan arday u nugul in loo geysto gardaro ama kadeed taasoo ku saleysan sifooyinka loo arko ama dhab ahaan jira ee kala duwanaanta, sida: isirka, midabka, asal qaran, jinsiyadda, abtirsiino, diin, da', itaal darri,

macluumaadka geneetikada, xaaladda ciidanka, xaaladda guurka, jinsiga, qofka waxa uu yahay, aqoonsiga qofka waxa uu yahay, jinsiga qofka, xaamilonimo, ama xaalad la xariirto xaamilonimada, xaaladda bulsho-dhaqaale, guri la'aanta, xaaladda aqoonta, muuqaalka jirka, ama xaaladda waalidnimada, ama xariirka lala leeyahay qof qaba ama loo arko in uu qabo mid (1) ama ka badan sifooyinkaan.

Gardareysiga internetka waxaa kaloo loo sifeyaa sida gardareysiga marka la isticmaalo farsamada ama isgaarsiinta elataroonigga, kana mid ah, balse ku ekeen, wareejinta ama calaamadaha, baaqyada, qoraalka, sawirada, dhawaaqyada, xogta ama sirta nooc kasta oo si dhamaystiran ama qeyb ahaan lagu gudbiyo fiilo, raadiyo, elettromaqnatiis, slsawirka elatraroonk ama sawirka siistemka muraayadda, kana mid ah, balse ku ekeen, warqadaha elataroonigga, isgaarsiinta internetka, fariimaha degdegga ama isgaarsiinta fakska. Gardareysiga internetka waxaa kaloo ka mid ah (i) abuurista bogga internetka ama blog halkaas uu abuuraha u qaato aqoonsiga qof kale ama (ii) leyska dhigo qof kale sida qoraha qoraalka la soo geliyay amafariinta, haddii abuuraha iskadhigidda abuurto xaaladaha ku qoran weedha (i) ilaa (v), ee la xariira xaaladda gardareysiga. Gardareysiga internetka waxaa kaloo ka mid ah qeybinta loo adeegsado hababka isgaarsiinta elataroonigga marka lala xariiro in ka badan hal qof ama marka qoraal la soo geliyo habka elataroonigga taasoo ay heli karaan hal qof ama ka badan, haddii qeybtinta ama soo gelinta abuurto xaaladaha ku qoran weedha (i) ilaa (v) ee ka tirsan sifeynta gardareysiga.

Qofka soo qaada dagaalka ama fulliyaha waxaa lagu sifeyaa in uu yahay arday ama xubin ka tirsan shaqaalaha dugsiga sida, balse kuma eka, tababaraha, maamulaha, kalkaalinta dugsiga, shaqaalaha makhaayadda, haayaha, wadaha baska, tababaraha atleetikada, la-talliyaha hawsha ka baxsan manhajka ama farsame yaqaanka, qof iskaa wax u qabso ugu shaqeeyo dugsiga ama iibiye, qandaraasle ama qof kale oo ku shaqeeyo heshiis uu la galay dugsiga dagmada oo ka kaca gardareysi, gardareysiga internetka, ama aar gudasho.

Jawi ku dhisan cadaawadda, sida uu ku sifeeyo M.G.L. c. 71, § 37O, waa xaalad ay gardareysiga sabab u tahay in jawiga dugsiga ku faafo handadaad, jeesjees, ama aflagaado aad u xun in ku filan ama ku baahsan ilaa heer ay ka baddasho xaaladaha waxbarashada ardayga.

Aar gudashada waxaa lagu sifeyaa foom ka mid ah cabsi gelinta, aar gudashada, ama kadeedka loo geysto ardayga soo sheego gardareysiga, bixiya macluumaad inta uu socdo baaritaanka gardareysiga, ama marqaati ka ah ama haaya macluumaad leysku hallen karo oo ku saabsan gardareysiga.

Shaqaale waxaa ka mid ah, balse kuma eka, tababareyaasha, maamuleyaasha, la-talliyeyaasha, kalkaalinta dugsiga, shaqaalaha makhaayadda waxwada, ilaaliyeyaasha, wadeyaasha baska, tababareyaasha atleetikada, la-talliyeyaasha hawlaha dheeraadka ku ah manhajka, shaqaalaha taakuleynta, ama kaaliyeyaasha aqoonyaanada.

Bartilmaameedka ama Dhibanaha waxaa lagu sifeyaa ardayga ama qaangaarka loo geystay gardareysiga, gardareysiga internetka, ama loo geystay aar gudashada.

Gardareysiga waxay qaadan kartaa qaabab badan iyo waxay ka dhici kartaa xaalad kasta. Gardareysiga waxaa ka mid noqon kara, balse kuma eka, cabsi gelin sida qofka oo magacyo loogu yeero ama handadaad, fogeynta sida inkiraadda ama faafinta xanta; ama weerarka jirka sida dagaalka lagu qaado ama weerarka loo geysto hantida ardayga. Gardareysiga wuxuu dhamaan xubnaha bulshada dugsiga ku abuuri karaa jawi ku dhisan cabsi. Waxay kaloo abuuri kartaa murugo aan loo baahneyn lana rabin oo saameysa awoodda ardayga u leeyahay in uu tago dugsiga, wax ku barto dugsiga, socdo suramada dugisiga, wax ku cuno makhaayadda qaxwada, ku cayaaro deydka dugsiga ama meelaha lagu nasto, ka qeybgalo ama tago hawlaha khaaska ama hawlaha ka baxsan manhajka ama tago kana soo noqdo dugsiga. Gaar ahaan, "jawiga cadaawada" waxaa lagu sifeyaa xaalad uu gardareysiga sabab u yahay in jawiga dugsiga laga buuxiyo cabsi, jees-jees ama aflagaado oo in ku filan culus ama lagu adkeysto si wax looga baddalo xaaladha waxbarashada ardayga. Dabeecadaha gardareysiga aan laga hadlin waxay u horseedi karaan waxyeelo oo burbur u keeno dhallinta, sida murugada, ku dhicidda shaqada dugsiga iyo imaashada. Fashilka in wax laga qabto dabeecadaha gardareysiga waxay ardayda kale u dirtaa fariinta in lagu dhaqaaqi karo dabeecadaha xunxun.

Sharciga wuxuu mamnuucay gardareysiga ardayda ee ka jirto dugsiyada mana u dul qaadan doonto CPS. Xagga siyaasaddaan, "dugsiga" waxaa ka mid ah dugsiyada, xerada dugsiga, tagidda iyo ka soo noqoshada dugsiaga iyo/ama munaasabadaha uu dugsiga kafaalo qaado iyo xafladaha, hantida ku dhinac taal xerada dugsiga, hawlaha dugsiga kafaalo qaado ama la xariira dugsiga, xafladaha, brograamyada haddii ay ka socdaan xerada dugsiga ama ay dibadda ka yahiin xerada dugsiga (sida munaasabadaha bulshada, safarada, munaasabadaha isboortiga, ama munaasbadaha la midka uu dugsiga kafaalo qaaday iyo xafladada), meesha baska joogsado, marka baska la saaran yahay ama baabuur kale uu leeyahay, la soo kireeyay ama dugsiga dagmada isticmaalo ama dugsiga, marka loo socdo ama laga soo noqdo dugsiga ama isticmaalka farsamada ama qalab elataroonig uu dugsiga leeyahay, la soo kireeyay ama uu dugsiga dagmada isticmaalo ama dugsiga iyo meel, hawl, xaflad ama brograamaan la xariirin dugsiga ama uu isticmaalo dugsiga dagmada ama dugsiga, haddii falka jawi cadaawad uu abuurto dhibanaha ama marqaatiyada, farageliso xuquuqda dhibanaha ama marqaatiyada jooga dugsiga ama maadiyan iyo dhab ahaan u carqaladeyso hawsha waxbarashada ama nidaamka hawsha ka socoto dugsiga. Sida waafaqsan sharciga gobolka, Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay aqoonsan yahiin in ay jiraan arday u nugul in loo geysto gardaro ama kadeed taasoo ku saleysan sifooyinka loo arko ama dhab ahaan jira ee kala duwanaanta, sida: isirka, midabka, asal qaran, jinsiyadda, abtirsiino, diin, da', itaal darri, macluumaadka geneetikada, xaaladda ciidanka, xaaladda guurka, jinsiga, qofka waxa uu yahay, aqoonsiga qofka waxa uu yahay, jinsiga qofka, xaamilonimo, ama xaalad la xariirto xaamilonimada, xaaladda bulsho-dhaqaale, guri la'aanta, xaaladda aqoonta, muuqaalka jirka, ama xaaladda waalidnimada, ama xariirka lala leeyahay qof qaba ama loo arko in uu qabo mid (1) ama ka badan sifooyinkaan.

CPS waxay si culus u qaadataa eedeynta gardareysiga, waxayna degdeg uga jawaabi doontaa ashtakooyinka iyo eedeynta gardareysiga. Intaas kaddib, waa la mamnuucay aar gudashada ka soo horjeedo qofka soo sheega gardareysiga, bixiya macluumaad inta ay socoto baarista gardareysiga ama arka ama haaya macluumaad leysku halleyn karo oo ku saabsan gardareysiga.

Haddii uu jiro arday, waalidiin/ilaaliyeyaal/bixiyeyaasha daryeelka ee arday, xubin ka tirsan shaqalaha ama xubin kale oo ka tirsan bulshada aaminsan yahay in loo geystay gardaro, ama aar gudasho bacdamaa ay soo sheegeen gardareysi, bixiyaan macluumaad inta ay socoto baaritaanka gardareysiga ama marqaati ka noqdaan ama hayaan macluumaad leysku halleyn karo oo ku saabsan gardareysiga, waa in ay xaajada u soo jeediyaan agaasimaha dugsiga/mada qeybta sare dugsiga uu ardayga tago. Tani waxaa laga sheegi karaa afka ama qoraal ahaan. Warbixinta ku saabsan gardareysiga iyo/ama warbixinta aar gudashada gardareysiga, bixinta macluumaad la xariira gardareysiga ama in qofka uu arko ama haayo macluumaad leysku haleyn karo oo ku saabsan gardareysiga waxaa si aan la ogaan karin loo gudbin karaa agaasimaha dugsiga/madaxa qeybta sare dugsiga uu ardayga tago. Fadlan xasuuso: hase ahatee, in talaabo dishibiliin aan laga qaadi doonin ardayga maxaa yeelay waxaa la helay warbixin aan la aqoonin cidda soo dirtay.

Dhamaan shaqaalaha dugsiga, balse kuma eka, tababareyaasha, maamuleyaasha, kalkaalinta dugsiga, shaqaalaha makhaayadda, ilaaliyeyaasha, wadeyaasha baska, tababareyaasha atleetikada, la-talliyeyaasha hawlaha dheeraadka ku ah manhajka ama kaaliyeyaasha aqoonyaanada) waxaa sannad kasta tababar lagu siiyaa Siyaasadda Ka Soo Horjeedo Gardareysiga iyo Qorshaha Faragelinta iyo Ka Hortagga Gardareysiga ee CPS. Waajibaadka iyo mas'uuliyadda waaran shaqaalaha waxaa kaloo lagu soo qoray Qorshaha Ka Hortagga Gardareysiga iyo Qorshaha Faragelinta CPS (CPS' Bullyinga Prevention and Intervention Plan).

La Shaqeynta Qoysaska

Dugsiyada Soo Dhaweynta/Iskuduwaha Jawiga Dugsiga (Welcoming Schools/School Climate Coordinator) iyo Xariiriyeyaasha Qoyska (Family Liaisons), ee la xariira xafiiska bartamaha iyo agaasimeyaasha/madaxda qeybta sare dugsiga, waxay fursad siin doonaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka sida loo aqoonsado gardareysiga loona waxyeelada ay ku leedahay bartilmaameedyada, dadka aysan quseynin iyo dadka geysta gardareysiga.
Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyaha daryeelka waxaa kaloo la ogeysiin doonaa manhajka gardareysiga dugsiga cunugooda; sida gardareysiga u socdo iyo ammaanka internetka iyo gardareysiga internetka; saamaynta sharciga ku leeyahay gardareysiga iyo ciqaabta

suurtogalka ah ee lala kulmi karo haddii cunugga ama xubin ka tirsan shaqaalaha ka qeybgalo gardareysiga iyo habka loo gudbiyo ashtakooyinka gardareysiga iyo sharuudaha qarsoodiga nidaamka diiwaanka ardayga Massachusetts, 603 C.M.R. 23.00, iyo Sharciyada Sharciga Xuquuqda Aqoonta Qoyska Federaalka (Family Educational Rights) sharciyada Asturnaanta (Privacy Act) 34 C.F.R. Qeybta 99, sida ku qoran 603 C.M.R. 49.07 xagga ogeysiiska maamulaha/madaxa qeybta sare ogeysiiyo waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka taasoo ku saabsan arrin dhacday ama warbixin ku saabsan gardareysiga ama aar gudashada.

Faragelinta iyo Sharuudaha Warbixinta

Hase ahatee, waxaa muhiim ah in la xasuusto in dhamaan shaqaalaha dugsiga loo baahan yahay in ay isla markiiba soo sheegaan dhacdo kasta oo gadareysi ah ama aar gudasho iyaga arkeen ama ogaadaan una soo sheegaan agaasimaha/madaxa qeybga sare dugsiga ama qofka dugsiga u xilsaaray. Shardiga in loo sheego agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xilsaaray ma soo koobi karto awoodda xubinta shaqaalaha in uu ka jawaabo dhacdooyinka dabeecadda ama dishibiliinka ee waafaqsan siyaasadaha iyo hababka u dagsan dugsiga dagmada xagga maamulka dabeecadda iyo dishibiliinka.

Marka la helo ashtakada, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu islamarkiiba ogeysiin doonaa:

- Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka qofka la soo sheegay
- Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka qofka soo qaaday weerarka ama qofka lagu eedeyay weerarka haddii uu yahay xubin ka tirsan shaqaalaha dugsiga
- Xafiiska Ammaanka iyo Nabad Gelyada

Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu isla markiiba fullin doonaa baaritaanka ashtakada soo gaartay.

Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu la tashan doonaa Sarkaalka Ilaha Dugsiga (School Resource Officer) balse lama qeybsan doono macluumaadka aqoonsiga qofka ay quseeyso ama qofka geystay weerarka.

Xagga ogeysiinta waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka bartilmaameedka iyo qofka geystay weerarka, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waa in ay u hoggaansamaan sharuudaha qarsoodiga sharciyada Diiwaanka Ardayga Massachusetts (Massachusetts Student Record), 603 C.M.R. 23.00, iyo Sharciga Federaalka ee ku saabsan Asturnaanta iyo Xuquuqda Waxbarashada Qoyska and the (Federal Family Educational Rights and Privacy Act regulations), 34 C.F.R. Qeybta 99, sida ku qoran 603 C.M.R. 49.07. Gaar ahaan, agaasimaha/madax qeybta sare dugsiga ma u kashifi karaan waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka, macluumaad laga soo qaaday diiwaanka ardayga oo la xariira bartilmaameed ama dagaal ooge Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu kashifi karaa go'aanka laga gaaray gardareysiga ama aar gudashada loo geysto wakaaladda hirgelinta sharciga deegaanka sida hoos timaado 603 C.M.R. 49.06 iyadoo aan la haysanin ogolaashada ardayga ama waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka hase ahatee agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxay saraakiisha hirgelinta sharciga kala xariiri doonaan siyaabaha loo badbaadiyo asturnaanta bartilmaameedyada, marqaatiyada ardayga, iyo kuwa soo qaaday weerarka ilaa inta suurtogalka ah marka la fiiriyo daruufaha. Intaas kaddib, haddii qofka soo qaaday uu xubin ka yahay shaqaalaha dugsiga, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu qaadi doonaa talaabo dishibiliin, oo gaarta ilaa kana mid ah ka-joojinta shaqada. Intaas kaddib, haddii agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga go'aan ku gaaro in ay jirto cabsi gelin degdeg ah oo muuqata kuna timaada ammaanka ardayga ama dadka kale, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxay kashifi karaan macluumaadka diiwaanka ardayga ee ku saabsan qofka loo geystay weerarka ama qofka soo qaaday weerarka dhinacyada ku habboon iyo hirgelinta sharciga sida la xariirta degdegga caafimaadka ama amaanka ardayga ama dadka kale sida ku qoran 603 C.M.R. 23.07(4)(e) iyo 34 C.F.R. 99.13(a)(10) iyo 99.36. Xaaladaan dambe, kashifaadda waxay ku kooban tahay muddada degdegga iyo agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxaa looga baan yahay in ay qoraal ka reebaan kashifaadda iyo asbaabta ka dambeyso go'aanka agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga in ay jirto degdegga caafimaad iyo degdeg ku saabsan ammaanka.

Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu koobiga Siyaasadda Takoor La'aanta CPS iyo

Mamnuuca Ka Soo Horjeedo Kadeedka Jinsiga iyo Siyaasadda Ka Soo Horjeedo Gardareysiga (CPS' Non-Discrimination Policy and Prohibition Against Sexual Harassment and Anti-Bullying Policy) siin doonaa dhamaan dhinacyada, kana mid ah qofka soo jeediyay ashtakada, ardayga loo geystay waxyeelada, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga loo geystay waxyeelada, qofka soo qaaday weerarka iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga loo geystay waxyeelada, qofka geystay weerarka iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha, haddii qofka geystay weerarka yahay arday.

Warbixinta gardareysiga iyo/ama aar gudashada ee la xariirta soo sheegidda gardareysiga waxaa si aan la ogeyn loo jeedin karaa agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga meesha uu ardayga tago. Fadlan xasuuso, hase ahatee, in aan talaabo dishibiliin laga qaad karin arday maxaa yeelay waxaa la helay warbixin aan la ogeyn cidda soo dirtay.

Baaritaanka Ashtakada

Marka CPS la gaarsiiyo ashtako ku saabsan gardareysi ama aar gudasho la xariirta soo sheegidda gardareysiga, macluumaad la siiyo baarista gardareysiga ama la arko ama la haaysto macluumaad leysku halleyn karo oo ku saabsan gardareysiga, CPS waxay isla markiiba baari doonaan eedeynta, si xaq iyo si degdeg ah. Baaritaanka waxaa loo fullin doonaa iyaabo lagu dhowro qarsoodiga ilaa inta suurtogalka ah marka la fiiriyo daruufaha iyo si qofka soo sheega gardareysiga, bixiya macluumaad inta ay socoto baaritaanka gardareysiga ama arko ama haaya macluumaad leysku halleyn karo oo ku saabsan falka gardareysiga.

Baaritaanka waxaa ka mid ahaan kara wareysi lala yeesho ardayga, waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka, xubinta shaqaalaha ama xubinta bulshada soo jeedisay ashtakada, ardayga loo haysto in uu yahay dhibanaha gardareysiga ama aar gudashada, ardayga (ardayda) ama xubinta (xubnaha) shaqaalaha loo haysto in ay geysteen gardareysiga ama aar gudashada, marqaatiyada dhacdooyinka la soo sheegay ama dadka kale hadba sida dugsiga u garto. Kaddib marka la go'aansado in gardareysi ama aar gudasho dhacday, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xil saaray wuxuu arrintaan iyo hababka looga jawaabo, dhakhso u ogeysiin doonaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka qofka la bartilmaameedsaday iyo qofka soo qaaday weerarka iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka qofka soo qaaday weerarka, haddii qofka soo qaaday weerarka yahay arday. Waxaa jiri karaa daruufo uu agaasimaha, madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xilsaaray ula xariiri karaan waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ka hor inta aan la fullinin baaritaan. Ogesiinta waxay waafaqsanaan doontaa sharciyada u dagsan gobolka ee laga helo 603 C.M.R. 49.00. Tan ku saabsan ogeysiinta waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka bartilmaameedka iyo qofka geystay weerarka, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waa in uu u hoggaansamo sharuudaha qarsoodiga sharciyada Diiwaanka Ardayga Massachusetts (Massachusetts Student Record), 603 C.M.R. 23.00, iyo Sharciga Federaalka ee ku saabsan Sharciga Xuquuqda Wabarashada Qoyska iyo Asturnaanta, 34 C.F.R. Part 99, sida ku qoran 603 C.M.R. 49.07. Gaar ahaan, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ma kashifi karo macluumaad laga soo qaaday diiwaanka ardayga bartilmaameedka ama qofka soo qaaday dagaalka mana siin karo waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka haddii macluumaadka uusan ku saabsaneyn cunugga u gaarka ah waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu kashifi karaa go'aanka laga gaaray gardareysiga ama aar gudashada loo geysto wakaaladda hirgelinta sharciga deegaanka sida hoos timaado 603 C.M.R. 49.06 iyadoo aan la haysanin ogolaashada ardayga ama waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka hase ahatee agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxay saraakiisha hirgelinta sharciga kala xariiri doonaan siyaabaha loo badbaadiyo asturnaanta bartilmaameedyada, marqaatiyada ardayga, iyo kuwa soo qaaday weerarka ilaa inta suurtogalka ah sida hoos timaado daruufaha. Intaas kaddib, haddii agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga go'aan ku gaaro in ay jirto cabsi gelin degdeg ah oo muuqata kuna timaada ammaanka ardayga ama dadka kale, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxay kashifi karaan macluumaadka diiwaanka ardayga ee ku saabsan qofka loo geystay weerarka ama qofka soo qaaday weerarka dhinacyada ku habboon iyo hirgelinta sharciga sida la xariirta degdegga caafimaadka ama amaanka ardayga ama dadka kale sida ku qoran 603 C.M.R. 23.07(4)(e) iyo 34 C.F.R. 99.13(a)(10) iyo 99.36. Xaaladaan dambe, kashifaadda waxay ku

kooban tahay muddada degdegga iyo agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxaa looga baahan yahay in ay qoraal ka reebaan kashifaadda iyo asbaabta ka dambeyso go'aanka agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga in ay jirto degdegga caafimaad iyo degdeg ku saabsan ammaanka. Intaas kaddib, sida waafaqsan sharciga gobolka, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka qofka la bartilmaameedsaday waxaa la ogeysiin doonaa natiijadaha ka soo baxay baarista iyo talaabooyinka la qaadi doono si looga hortago falalka dheeraadka ah ee ku saabsan gardareysiga ama aar gudashada haddii la ogaado in lala kulmay dhaqanka noocaas.

Intaas kaddib, sida waafaqsan sharciga gobolka iyo qodobada Qoraalka Isfahamka (Memorandum of Understanding) ee ka dhexeeyo Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Schools) iyo Waaxda Boliiska Cambridge (Cambridge Police Department), haddii la ogaado in ay meesha ka dhacday gardareysi ama aar gudasho, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga, lana shaqeeyo Agaasimaha Ammaanka iyo Sekuritiga (Director of Safety and Security) waxay:

- Ogeysiin doonaan Sarkaalka Ilaha Dugsiga haddii agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga leeyahay aasaas macquul ah uu ku aamino in eedeynta dambiga lala dabageli karo qofka soo qaaday weerarka ama go'aan ku gaaray in ay jirto cabsi gelin muuqata oo degdeg u soo food saartay caafimaadka ama ammaanka ardayga ama dadka kale.
- Qaadi doonaan talaabada dishibiliinka ku habboon sida waafaqsan *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook).*
- Ogeysii waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka qofka soo qaaday weerarka (weerarada) haddii qofka soo qaaday weerarka uu yahay ardayg ama ogeysii qofka soo qaaday weerarka haddii u yahay xubin ka tirsan shaqaalaha.
- Ogeysii waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka qofka (dadka) la bartilmaameedsaday, ilaa heer waafaqsan sharciga gobolka iyo federaalka iyo xeerka, ogeysii iyaga talaabada la qaaday si looga hortago falal dheeraad ah oo la xariir gardareysiga ama aar gudashada.

Intaas kaddib, haddii dhacdada gardareysiga ama aar gudashada ku lug leedahay arday ka socota in ka badan hal dugsi, dugsiga dadweynaha ee madax banaan, dugsiga aan u adeegin dadweynaha, dugsiga maalinlaha la ogol yahay ee gaarka loo leeyahay ama dugsiga meelaha la daggan yahay ama dugsiga iskaashiga, dugsiga dagmada ama dugsiga marka kowaad la ogeysiiyay gardareysiga ama aar gudashada waxay, sida waafaqsan sharciga gobolka iyo federaalka, isla markiiba ogeysiin doonaan maamulaha ku habboon ee dugsiga kale dagmada ama dugsiga si labadaba u qaadan talaabada ku habbboon.

Mar kasta, kaddb marka la helo warbixinta gardareysiga ama aar gudashada, sida baarista kaddib, haddii agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xilsaaray uu qabo aasaas macquul ah uu ku aamino in la soo oogo eedeynta dambiga ka soo horjeedoi qofka soo qaaday weerarka, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga, kaddib marka uu la xariiro Agaasimaha Ammaanka iyo Sekuritiga (Director of Safety and Security), wuxuu ogeysiin doonaa ciidanka hirgelinta sharciga deegaanka. Ogeysiiska waxaa la waafajin doonaa sharuudaha 603 C.M.R. 49.00 iyo qodobada Warqadda Isfahamka (Memorandum of Understanding) ee ka dhexesyo CPS iyo Waaxda Boliiska Dambridge (Cambridge Police Department). Intaas kaddib, haddii dhacdada gardareysiga ka dhacdo xerada dugsiga kuna lug leedahay arday hore oo ka yar 21 sanno kaasoo aan weli lagu qorin dugsiga dagmada deegaanka, dugsiga dadweynaha ee madax banaan, dugsiga aan ka mid ahayn dugsiyada dadweynaha, dugsiga maalinlaha ee la ogol yahay ama dugsiga deegaanka ama dugsiga iskaashiga, dugsiga dagmada ama dugsiga la ogeysiiyay gardareysiga ama aar gudashada waxay la xariiri doonaan hirgelinta sharciga sida waafaqsan sharciga gobolka ama federaalka iyo xeerka. Si uu u gaaro go'aankaan, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu, sida waafaqsan Qorshaha, siyaasadaha dugsiga dagmada iyo hababka iyo qodobada Memorandumlka Isfahamka (Memorandum of Understanding) ee dhexmaray CPS iyo Waaxda Boliiska Cambridge, la tashan doonaa sarkaalka ilaha dugsiga iyo dad kale uu agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama loo xilsaaray u garto in ay habboon tahay.

Falalka Dishibiliinka/Jawaabta Laga Bixiyo Gardareysiga

Ujeedada Dugsiyada Dadweynaha Cambridge xagga dishibiliinka waxay tahay in la abuuro jawi ay ardayda ku bartaan sida loo hagaajiyo khasaaraha loo geystay bulshada oo idil marka xubnaha keli ahaan ay wax isgaarsiiyaan Haddii la ogaado in la geystay gardareysi ama dhaqan kale aan habbooneyn, CPS waxay qaadi doonaan talaabo ku habboon daruufaha. Talaabada dishibiliinka la qaaday waxay miisaan u noqon doontaa baahida loo qabo xisaabtanka iyo baahida loo qabo in la hagaajiyo khasaarada loo geystay bulshada dugsiga, isla markaasna la baro dabeecadda ku habboon. Isticmaalka nidaamka caddalaadda bulshada sida habboon, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xilsaaray wuxuu fullin doonaa xiilado ku habboon oo laga badbaadiyo gardareysiga ama ka aar gudashada arday oo soo sheegay gardareysiga ama aar gudashada, arday arkay gardareysiga ama aar gudashada, arday macluumaad bixiya inta ay socoto baaritaanka, ama arday haaya macluumaad leysku haleyn karo oo ku saabsan fal la soo dheegay oo ku saabsan gardareysi ama aar gudasho.

Ka hor inta aan si buuxdo loo baarin eedeynta gardareysiga ama aargudashada, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu qaadi doonaa talaabooyin lagu qiimeeyo baahida loo qabo in qofka la bartilmaameedsaday loo soo celiyo dareenka ammanka iyo/ama laga badbaadiyo in aan loo geysanin dhacdooyin dheeraad ah. Jawaabaha lagu horumariyo ammaanka waxaa ka mid ah, balse kuma eka, abuurista qorshaha amaanka qofka; horay u qeybinta kuraasta ay ku fadhiistaan qofka la bartilmaameedsaday iyo/ama qofka soo qaaday weerarka gudaha fasalka, qadada, ama gudaha baska; aqoonsiga xubin ka tirsan shaqaalaha oo u adeegi doono sida "qofka qaabilsan ammaanka" qofka la bartilmaameedsaday; iyo baddalaadda loo geysto jadwalka qofka soo qaaday weerarka iyo la xariirka qofka la bartilmaameedsaday. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xilsaaray waxay qaadi doonaan talaabo dheeraad ah si loo horumariyo ammaanka inta ay socoto baarista iyo kaddib, hadba sida loogu baahdo.

Waxaa jira fursado badan oo qofka lagu baro dabeecadda habboon sida: siinta kullamada dhismaha-xirfadaha ku kooban qofka; sida loo sameeyo nidaam iyo isticmaalka dhaqanka wada tashiga; bixinta hawlaha waxbarashada la xariira ama kooxaha ardayda, la tashiga la talliyeyaasha dugsiga iyo shaqaalaha kale ee ka tirsan dugsiga in ay ardayga ku kaalmeyaan taageerada dabeecadda wanaagsan ee la xariirta aqoonta iyo midda aan aqoonta la xariirin si ardayda loogu kaalmeeyo in ay fahmaan siyaabaha raacsan bulshada loona gaaro ujeedooyinkooda; lala kulmo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka in ay helaan taageero iyo si loo xoojiyo ka hortagga gardareysiga iyo hawlaha dhismaha xirfadaha bulshada guriga; ku dhaqanka qorshooyinka dabeecadda laguna daro in xoogga la saaro horumarinta xirfadaha bulshada.

Talaabada laga qaado ardayda lagu helo in ay ka qeybgaleen gardareysi waxaa ka mid ah in qofka qaaday weerarka uu la shaqeeyo shaqaalaha dugsiga si loo hagaajiyo dabeecadda; kala tallinta, adeegyada taageerada ama faragelin kale oo lagu daweeyo ardayga iyo kuwa ku habboon xubnaha qoyska ardayga; ciqaabta dishibiliinka la siiyo ardayga ilaa kana mid ah ku lug yeelashada maxkamadda; ama dishibiliinka la xariira dugsiga sida waafaqsan *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook)* ilaa kana mid ka-joojinta, ka-saaridda iyo/ama ku lug yeelashada maxkamadda. Talaabada laga qaado shaqaalaha ka qeybgala gardareysiga waxaa ka mid ah talaabo dishibiliin, ilaa, kana mid ah in la ruqseeyo iyo/ama in maxkamadda soo gasho.

Dhamaan ardayda iyo xubnaha shaqaalaha ee loo arko in ay ka qeybgaleen gardareysiga waxaa la ogeysiin doonaa la mamnuucay aar gudashada iyo ficil kasta oo aar gudasho ah dhallin doonto talaabo dishibiliin.

Marka go'aan laga gaaro in lala kulmay dhaqan aan habbooneyn, Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay dhakhso ku dhaqaaqi doonaan in ay tirtiraan dhaqanka iyo waxay qaadi doonaan talaabo lagu saxo hadba sida loogu baahdo, taasoo u dhexeyso in gafaha laga dalbado in uu shaqaalaha dugsiga kala shaqeeyo dabeecadda wanaagsan, tallada la-tallinta ama adeegyo kale oo la xariira daweynta iyo/ama talaabo dishibiliin meesha ay ku habboon tahay, ilaa kana mid ah ka-joojinta, ka-saaridda dugsiga iyo/ama ku lug yeelashada maxkamadda. Intaas kaddib, sida waafaqsan sharciga gobolka, haddii go'aan lagu gaaro in ay meesha ka dhacday gardareysi ama aar gudasho, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga, lana xariira Agaasimaha Ammaanka iyo Sekuritiga (Director of Safety and Security, waxay (i) ogeysiin doonaan

hirgelinta sharciga deegaanka haddii agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga aaminsan yahay in la eedeyn doono qofka soo qaaday dagaalay; (ii) in laga qaadi doono talaabo dishibiliin ku habboon iyo (iii) in la ogeysiiyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyha daryeelka qofka soo qaaday weerarka; iyo (iv) in la ogeysiiyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/daryeelka dugsiga qofka la bartilmaameedsaday/dhibanaha, iyo ilaa her waafaqsan sharciga gobolka iyo federaalka, la ogeysiiyo iyaga talaabada la qaaday si looga hortago falal kale oo dheeraad ah oo ku saabsan gardareysiga ama aar gudashada. Intaas kaddib, haddii la ogaado in ardayga, isaga oo ogsoon, uu soo jeediyay eedeyn been ah oo ku saabsan gardareysi ama aar gudasho, ardayga waxaa la saari doonaa dishibiliin sida waafaqsan qodobada ku jira *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook)* kana mid ah ka-joojin, ka-saarid iyo/ama ku lug yeelashada maxkamadda.

Horumarinta Ammaanka la Siiyo Qofka ay Quseeyso iyo Dadka Kale

Si loo soo celiyo dareenka ammaanka ardayga loo geystay gardareysiga lana qiimeeyo baahida uu bartilmaameedka u qabo badbaadinta, waxaa shir lala geli doonaa ardayga, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga, iyo shaqaalaha dugsiga ku habboon (macnaha agaasimaha dugsiga, madaxa qeybta sare dugsiga, kaaliyaha agaasimaha, madaxa ardayda, ku-takhasusaha ammaanka iyo/ama sarkaalka ilaha dugsiga). Ujeedada shirkaan waxay ahaan doontaa in laga hadlo horumarinta iyo fullinta qorshaha ammaanka ardayga, kana mid ah shaqaalaha laga yaabo in ardayga siiyo warbixin haddii ay soo baxaan arrimo Hadba sida ku habboon, waxaa dhici karto in CPS ku talliso la-tallin, adeegyada taageerad ama faragelin daweyn kale oo la siiyo ardayga iyo xubnaha qoyska ku habboon ee ardayga.

Muddo macquul ah gudaheeda kaddib marka go'aan laga gaaro kaddibna ammar lagu bixiyo toosinta iyo talaabada dishibiliinka, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xil saaray waxay la xariiri doonaan qofka la bartilmaameedsaday si loo ogaado haddii mar kale ay soo noqotay dabeecadda la mamnuucay iyo haddii loo baahan yahay taageero dheeraad ah. Haddii ay sidaas tahay, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama qofka loo xilsaaray wuxuu la shaqeyn doonaa shaqaalaha dugsiga ee ku habboon si loo fulliyo isla markiiba.

Haddii uu jiro ammarka ka-celinta, hal ujeedo uu shirka leeyahay waxay ahaan doontaa in la fiiriyo sida ay u saamayso ammarka ka-celinta iyo hababka loo gudbiyo warbixinta haddii la jebiyo ammarka ka-celinta. Haddii ammarka celcelinta uu ka soo horjeedo arday kale ama shaqaale, waa in shir gaar ah lala galo qofkaas si loo fiiriyo ammarka celcelinta iyo waxa ka dambeeyo, waxa laga filaayo iyo ciqaabta ka dambeyso jebinta ammarka.

Eedeyn Been ah/Aar Goosadka

Haddii go'aan lagu gaaro in arday uu isaga ama iyada oo ogsoon jeedisay eedeyn been abuur ah oo ku saabsan gardareysi ama aar gudasho, waxaa la saari doonaa dishibiliin sida waafaqsan qodobada *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook).*

Dhamaan ardayda waxaa la siin doonaa badbaadin isla mid ah iyadoo aan la fiirinin xaaladooda sida sharciga hoos timaado.

Fiirinta Falalka ku Saleysan-Dugsiga

Haddii qofka soo jeediyay ashtakada ku saabsan gardareysiga, qofka loo geystay gardareysiga iyo/ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka qofka loo geystay gardareysiga aysan awood u yeelanin in ay xalliyaan arrimahooda kaddib marka si daacad ah leysugu dayo in la adeegsado habka aan rasmiga ahayn ee kor lagu tafatiray, lala shaqeyay Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga, waxaa ashtako qoran loo gudbin karaa Maamulaha ama Sarkaalka Hawlwadeenka Sare. Ashtakada qoran waxay sheegi doontaa arrimaha iyo waxaa ku jiri karaa oraah gaaban oo ku saabsan xaqiiqada iyo wax qabashada la soo codsaday.

Muddo todobo (7) maalin kaddib marka la helo ashtakada qoran, Maamulaha ama qofka loo xilsaaray waxay soo diri doonaan ogeysiis ku qoran taariikhda iyo waqtiga la qaban doono shirka looga hadlo arrimaha. Shirka kaddib, Maamulaha ama qofka loo xilsaaray waxay gaari doonaan go'aan haddii gardareysi ama dhaqan kale aan habbooneyn uu dhacay, talaabada ku habboon ee laga qaaday, si loo hubsado in gardareysiga ama dhaqanka kale aan habbooneyn joogsado iyo haddii loo baahan yahay talaabooyin kale oo lagu taageero. Warqad ka hadleyso xaajadaan iyo

falalka kale ee dheeraadka ah uu dugsiga dagmada soo qaadi doono si wax looga qabto arrimaha la soo qaaday waxaa la soo saari doonaa muddo shan (5) maalin gudahooda laga bilaabo shirka.

Haddii qofka ku hawlan in uu soo gudbiyo ashtako ku saabsan gardareysiga, qofka loo bartilmaameedsaday gardareysiga iyo/ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka qofka loo bartilmaameedsaday gardareysiga aysan weli awood u lahayn in ay xallian arrimaha iyo fikradaha laga qabo, kaddib marka lala shiro Maamulaha ama qofka loo xilsaaray, waxaa dhici karto in codsiga fiirinta loo gudbiyo Guddiga Dugsiga. Guddiga Dugsiga, hadba sida uu u garto, wuxuu dhageysan karaa marqaatiyada, wuxuu qaban karaa caddeyn dheeraad ah, iyo wuxuu fiirin karaa natiijadaha iyo talooyinka la soo jeediyay heerka dugsiga iyo sidoo kale natiijadaha iyo talooyinka uu soo jeediyo Maamulaha ama shirka fib u fiirinta qofka loo xilsaaray. Muddo shan (5) maalin gudahooda laga bilaabo marka la fulliyo fiirinta, Guddiga Dugsiga wuxuu soo saari doonaa go'aan qoran kaasoo xaqiijin doono, go'aan ka gaari doono ama baddala natiijadaha iyo talooyinka uu soo jeediyo Maamulaha, sida wax ka qabasahada, haddii ay jiraan, falal dheeraad ah uu dugsiga dagmada qaadi doono si looga hadlo arrimaha la soo qaaday.

Waxaa Kaloo la Heli Karaa Habab Kale oo lagu Ashtakoodo

Sidoo kale waa in la xasuusto in qodobada ku jiro hababkaan kor lagu tafatiray qeybtaan iyo Siyaasadda Gardareysiga Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Schools Anti-Bullying Policy) iyo Ka Hortagga Gardareysiga iyo Qorshaha Faragelinta (Bullying Prevention and Intervention Plan) kama reebaan ardayga in uu adeegsado habka ashtakada ku qoran "Siyaasadda Takoor La'aanta iyo Mamnuuca Ka Soo Horjeedo Kadeedka Jinsiga" ("Non Discrimination Policy and Prohibition Againsta Sexual Harassment Policy") in uu raadsado xallinta ashtakooyinka takoorka ama kadeedka ee ku saleysan sifo uu sharciga badbaadiyo sida isirka, midabka, asal qaran, jinsiyadda, abtirsiino, diin, da', itaal darri, macluumaadka geneetikada, xaaladda ciidanka, xaaladda guurka, jinsiga, qofka waxa uu yahay, aqoonsiga qofka waxa uu yahay, jinsiga qofka, xaamilonimo, ama xaalad la xariirto xaamilonimada.

Sidoo kale waa in la xasuusto in qodobada ku jira qeybtaan aysan ka reebin ardayga in uu isticmaalo habka ashtakada ku qoran Qeybta 23.0 *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook)* in uu raadsado in xal laga gaaro ashtakooyinka la xariira marka ardayga laga xayuubiyo xuquuqda ku qoran *uquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook).*

Xariirka uu la Leeyahay Sharciyada Kale

Sida waafaqsan sharciyada u dagsan federaalka iyo gobolka iyo sharciyada iyo siyaasadaha dugsiga dagmada, lama ogola in qofna la takooro xagga ogolaashada dugsiga dadweynaha ku yaal magaalo kasta ama tuulo kasta ama helitaanka fa'iidada, axsaanka iyo koorsooyinka waxbarashada dugsiga dadweynaha noocaas xagga isirka, midabka, asal qaran, jinsiyadda, abtirsiinada, diinta, da'da, itaal darrida, macluumaadka geneetikada, xaaladda ciidanka, xaaladda guurka, jinsiga, jaadka qofka, aqoonsiga jaadka qofka, jinsiga qofka, xaamilonimada, ama xaalad la xariirto xaamilonimada.

Ma jiro wax ku jiro qeybtaan Siyaasadda Ka Soo Horjeedo Gardareysiga Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Schools Anti-Bullying Policy) iyo Ka Hortagga Gardareysiga iyo Qorshaha Faragelinta (Bullying Prevention and Intervention Plan) oo dugsiga ama dugsiga dagamada ka reebta in ay qaado talaabo si ay u saxdo takoorka ama kadeedka ku saleysan ka tirsanaanta koox sharci ahaan la badbaadiyo sida hoos timaado sharciga deegaanka, gobolka ama federaalka ama siyaasadaha dugsiga dagmada. Intaas kaddib, ma jiro wax ku jiro qeybtaan ama Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook) ama Siyaasadda ka soo Horjeedo Gardareysiga iyo Ka Hortagga Gardareysiga iyo Qorshaha Faragelinta oo loo samayay ama loogu talogalay in lagu soo koobo awoodda dugsiga ama dugsiga dagmada u leeyahay in uu qaado talaabo dishibiliin sida hoos timaado M.G.L.c. 71, qeybaha 37H, 37H ½ iyo 37H ¾, sharciyada kale ee lagu dabaqi karo, ama siyaasadaha u dagsan dugsiga xaafadda ama deegaanka kana jawaaba dabeecadda dagaalka, waxyeelada ama carqaladeynta, iyadoo aan la fiirinin haddii qeybtaan *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook)*, ama Siyaasadda Ka Soo Horjeedo Gardareysiga iyo/ama Ka Hortagga

Gardareysiga iyo Qorshaha Faragelinta ka hadasho dabeecadda.

28. Siyaasadda Ka Soo Horjeedo Jujuubka Dhallinta

CPS waxay ballan qaaday in laga helo jawo wax lagu barto, aan loo dul qaadanin jujuubka. Sida waafaqsan falsfaddaan, CPS waxay ballan qaaday in ay horumariso jawi ka madax banaan jujuubka. Sidaas awgeed, CPS waxay raadisaa in ay kordhiso la socoshada jujuubka dhallinta iyo kaalmada si looga jawaabo baahida dhibaneyaasha iyo caruurta marqaatiga ka ah dagaalka noocaas.

Waa sharci darro jujuubka dhallinta, meel kasta ha lagu ballamiyo, mana loo dul qaadan doono dagaalka ballaminta ka dhaca gudaha dugsiga. Intaas kaddib, lama ogolaan doono in laga aargutto qof ka soo ashtakooday jujuubka loo dhigay qof dhallin yar ama la shaqeyay baaritaan la xariira dagaalka ballan loo dhigay qof dhallin yar. CPS waxay dhakhso ka jawaabi doonaan ashtakooyinka iyo warbixinta jujuubka ama aar gudashada, waxaana laga qaadi doono talaabo dhaqan celin meesha looga baahdo, sida talaabo dishibiliin meesha ay ku habboon tahay.

Sifeeynta la isticmaalo siyaasadaan waa sida soo socoto:

Dagaalka Guriga/Dagaalka Dhexmara Dadka Dagaalka Guriga waa saasaanka dabeecadda jujuubka hakaas uu hal qof iskudayo in uu kantaroolo qof kale una adeegsado hanjabaad ama dhab ahaan isticmaalo qorshe laga yaabo in ay ka mid yahiin kuwa soo socdo: jirka, jinsiga, afka, maaliyadda, ku xadgudubka cilmu nafsiga iyo/ama isticmaalka farsamada (sida gardareysiga internetka).

Dagaalka guriga wuxuu saameyaa bulsho kasta waddanka, iyadoo aan la fiirinin jinsiyadda, hiddaha, ama noloshii hore kooxda. Dadka jira da' kasta, heerarka dakhliga, diinta, jinsiga, lab/dhedig, aqoonsiga lab/dhedig iyo heerarka aqoonta waxay la kulmaan gacan qaadka guriga.

Jujuubka Dhallinta: Jujuubka (ama xariirka ku xadgugubka) waa sasaan uu qofka u adeegsado in uu ku kantaroolo saaxiibta gabarta ama saaxiibka wiilka. Dagaalka wuxuu qaadan karaa wijiyo badan, sida xumaanta loo geysto madaxa/caatifadda, xumaanta loo geysto jirka, xumaanta jinsiga iyo/ama marka la adeegsado farsamada (sida gardareysiga internetka). Qofka wuxuu mutteysan karaa jujuubka xattaa haddii aysan jirin ku-xadgudubka jirka. Taasi waxay ka dhici kartaa xaaladaha ballaminta aan lagu talogelin iyo xariirka muddada dheer ee dhabta ah.

Cunugga Marqaatiga/Ku Dhawaashada Dagaalka Guriga In cunugga uu arko dagaal waxay saamayn kartaa dhinac kasta nolosha cunugga, koriimadiisa, iyo horumarkiisa. Ku dhawaashada waxaa ka mid ah fiirinta ama maqalka xad gudubka, ogaashada waxyeelada xadgudubka (dhaawacayada soo gaara waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka, ama jebinta furnitureka, iwm.) iyo/ama dhaawac/waxyeelo ka soo gaara difaaca waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka kana soo hor jeeda dabeecadda ku xadgudubka.

Dagaalka Qoyska: Dagaalka qoyska waa sifeyn balaaran, waxaana ka mid ah ku xadgudubka loo geysto cunugga, ku xadgudubka loo geysto waayeelka, iyo falal kale sida dagaalka dhexmara xubnaha qoyska.

Dhibanaha/Qofka Badbaaday/Qofka la Garaacay: Qodobada leys dhaafsado si loo tixraaco qofka la gaarsiiyay waxyeelo, qofka la xumeyay ama lagu cabsi geliyay waxyeelo, haddii ay jirto ama haddii aysan dhab ahaan jirin xumaanta jirka.

Ku Xadgudbaha/Gafaha/Garaacaha: Qodobada leysku baddali karo si loo tixraaco qofka geysta xumaanta ee geysta waxyeelo, ha jiro ama yeysan dhab ahaan jirin xumaanta jirka.

Intaas kaddib, dhaqanka noocaas waxaa loo arki karaa in uu yahay kadeed, nooc ka mid ah takoorka, uu sharciga federaalka iyo gobolka mamnuuco; iyo/ama dhaqanka wuxuu noqon karaa gardareysi, kana mid ah, lana xadidin, gardareysiga internetka, kaasoo uu mamnuuco sharciga gobolka. Sidoo kale, Siyaasadda Takoor-La'aanta CPS (CPS Non-Discrimination Policy) iyo Mamnuuca ka soo Horjeedo Kadeedka Jinsiga (Prohibition Against Sexual Harassment) Siyaasadda ka soo Horjeedo Dagaalka (Anti-Violence Policy) iyo Siyaasadda ka soo Horjeedo Gardareysiga (Anti-Bullying Policy).

Aqoonsiga Calaamadaha Digniinta

Calaamadaha dabeecadda ku xadgudubka waxaa ka mid ah: in laga maseero haddii qofka lala wadaago nolosha la hadlo dad kale, leyskudayo in la maamulo waxa

qofka kale loo baahan yahay in uu sameeyo, qilaafaadka oo la buunbuuniyo, si joogto ah loo cabsi geliyo qofka kale in laga tagi doono, carro afka laga soo jeediyo, qofka kale lagu eedeeyo dhibaatooyinka u gaarka ah, iyo jir ahaan iyo niyad ahaan waxyeelo la gaarsiiyo saaxiibka ama falalka gardareysiga internetka.

Calaamadaha dhibaateynta waxaa ka mid ah: in si joogto ah loo joojiyo qorshaha laguna saleeyo asbaab aan u muuqanin in ay sax yahiin, mar kasta laga walwalo in ay ka xanaajiyaan qofka ay sharaakada la yahiin, in laga sabro waxyaabo qofka muhiim u ah, calaamadaha ku xadgudubka jirka oo muuqda, sida nabaro ama jeex, qofka oo culeys la saaro si loola sameeyo jinsi ama la dareensiiyo in ay yahiin shay jinsi, la yeesho qof laga rabo in uu diyaar ahaado mar kasta, iyo qofka oo laga ilaaliyo qoyska ama asxaabta ama loo geysto gardarada internetka.

Habka Warbixinta Jujuubka Dhallinta

Ardayda aaminsan in ay yahiin dhibaneyaal loo geystay Jujuubka dhallinta, aaminsan in ay ku jiraan halista dagaalka ballaminta dhallinta, ama ammarka celcelinta ka qaatay qof, waxay arrinta gaarsiin karaa mid ka mid ah dadka soo socda: (1) agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga, (2) kaaliyaha agaasimaha, (3) madaxa, (4) macalinka ama (5) kalkaaliyaha dugsiga.

Qofka la gaarsiiyo warbixinta waa in uu isla markiiba ogeysiiyo agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga.

Intaas kaddib, shaqaale kasta oo arka dhacdada jujuubka gudaha hantida dugsiga ama munaasabo la xariirta dugsiga, waa in isla markiiba ogeysiiyo agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga.

Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waa in uu isla markiiba sameeyo waxa soo socda: (1) ogeysii waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka dhibanaha, iyo (2) ogeysii Xafiiska Ammaanka iyo Sekuritiga (Office of Safety and Security).

Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waa in ay ardayga iyo/ama waalidiinta/ilaaliyeyaasha ardayga la xariiriyaan Siyaasadda Takoor La'aanta CPS iyo Mamnuuca Ka Soo Horjeedo Kadeedka Jinsiga (Prohibition Against Sexual Harassment) ee wax ka qabta hababka xallinta aan rasmiga ahayn iyo gudbinta ashtakooyinka rasmiga iyo Siyaasadda Ka Soo Horjeedo Gardareysiga ee CPS (CPS Anti-Bullying Policy) iyo in ay bixiyaan koobiyo marka la soo weydiisto.

Marka la helo warbixinta jujuubka dhallinta, haddii dhacdada ka dhacday meel ka baxsan hantida dugsiga ama ka dhacday hantida dugsiga, marka loo socdo ama laga yimaado dugsiga ama la joogo munaasabo la xariirto dugsiga, ama jebinta ammarka ka celinta mar lagu sugan yahay hantida dugsiga, marka loo socdo ama laga yimaado ama la joogo munaasabo la xariirta dugsiga, Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay dhakhso ogeysiin doonaan madaxda ku habboon dhacdada la soo sheegay. Soo sheegidda dhacdada noocaas waxaa loo fullin doonaa si loo dhowro qarsoodiga ilaa *inta la fullin karo* marka la fiiriyo xaaladda.

Waxaa muhiim ah in macluumaadka dhinaca saddaxaad la siiyo culeys marka ay quseeyso jujuubka dhallinta. Waxaa lagu talliyaa in xubin ka tirsan shaqaalaha dugsiga oo horay sida habboon loo tababaray in uu u tago ardayga iyo in uu kala hadlo waxa la maqlay iyo waxa suurtogalka ah. Haddii la aqoonsado in ay jirto ku-xadgudub, waa in laga shaqeeyo "qorshaha amaanka" iyo talo jeedin iyo qeybsiga tixraacinta la-tallinta, kooxaha taageerada, iyo kaalmada booliiska/maxkamadda.

Intaas kaddib, shaqaalaha dugsiga waa in ay xasuustaan in ay u hoggaansamaan dhamaan waajibaadka ka saaran waajibka warbixinta marka la tuhunsan yahay ku xadgudub iyo dayac (warbixinta 51A). Gudbinta ashtakooyinka 51A waa in la sameeyo lana raaco Tilmaamaha Warbixinta Ku Xadgudubka iyo Dayaca Cunugga ee CPS (CPS Child Abuse and Neglect Reporting Guidelines) kana mid ah ogeysiinta agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ku xadgudubka iyo dayaca la tuhunsan yahay, Intaas kaddib, shaqaalaha dugsiga waa in ay xasuustaan in ay dhamaan dambiyada u sheegaan boliiska. Shaqaalaha waa in ay ogeysiiyaan agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga, kaasoo ogeysiin doono Agaasimaha Amaanka iyo Nabadgelyada, iyo iskuduwi doono ogeysiiska la siiyo boliiska. Soo sheegidda dhacdada noocaas waxaa loo fullin doonaa si loo dhowro qarsoodiga ilaa inta la fullin karo marka la fiiriyo xaaladda.

Hababka Marka Dugsiga la Siiyo Koobiga Ammarka Celcelinta

Marka ardayga uu ammarka celcelinta ka qaato qof kaddibna keeno uu dugsiga la yimaado koobiga ammarka, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waa in ay la shiraan shaqaalaha ama ardayga iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga in ay fiiriyaan ammarka ka-celinta iyo macnaha ay leedahay. Waa in laga shaqeeyo "qorshaha ammaanka" si wax looga qabto baahida dhibanaha iyo arrimaha, kana mid ah shaqaalaha uu ardayga siin doono warbixin haddii ay soo baxaan arrimo ama la jebiyo ammarka ka celinta inta ardayga ama shaqaalaha ku sugan yahay xerada dugsiga ama munaasabo la xariirta dugsiga. Haddii ammarka celcelinta uu ka soo horjeedo xubin kale oo ka tirsan bulshada dugsiga, waa in la shir gaar ah lala galo qofka si loogu noqdo ammarka celcelinta iyo waxa ka dhallan karo, waxa laga filaayo iyo ciqaabta ka dambeeyso jebinta ammarka. Horumarinta "qorshaha ammaanka" waxaa loo fullin doonaa siyaabo lagu dhawro qarsoodiga ilaa inta suurtogalka ah sida hoos timaado daruufaha.

Talaabada Dishibiliinka

Haddii go'aan lagu gaaro in la geystay dhaqan aan habbooneyn, Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (CPS) waxay ka qaadi doonaan talaabo hadba sida ay u aragto in ay ku habboon tahay daruufaha. Falka noocaas wuxuu u dhexeeyaa la-tallin iyo/ama dishibiliin ilaa, kana mid ah, ka-joojin ama ka saaridda dugsiga.

Waxyaabaha Kale ee Laga Qabto

Soo sheegidda dhacdada jujuubka dhallinta kaddib marka la joogo hantida dugsiga, marka loo socdo ama laga soo noqdo dugsiga, ama la joogo munaasabo la xariirta dugsiga sida waafaqsan hababka kore, ardayda aaminsan in ay ahayeen dhibaneyaal xagga dagaalka ballaminta dhallinta ee ka dhacday hantida dugsiga, marka loo socdo ama laga yimaado dugsiga, ama la joogo munaasabo la xariirto dugsiga waxay kaloo soo gudbin karaan ashtako ku saabsan kadeedka iyo/ama gardareysiga sida waafaqsan hababka ku qoran Siyaasadda Takoor La'aanta CPS (CPS Non-Discrimination Policy) iyo Mamnuuca Ka Soo Horjeedo Kadeedka Jinsiga (Prohibition Against Sexual Harassment) iyo/ama Siyaasadda Ka Soo Horjeedo Gardareysiga CPS. Intaas kaddib, ardayda aaminsan in ay ahayeen dhibaneyaal la xariira jujuubka dhallinta ee ka dhacday xerada ka baxsan dugsiga iyo/ama saacadaha aan dugsiga la joogin waxay boliiska u sheegi karaan dhacdada la soo seegay.

Ardayda aaminsan in ay ku jiraan halis waxay kaloo raadsan karaan ammarka celcelinta si ay qofka uga badbaadiyaan xanuunka jirka ama dhaawac ama cabsi gelinta xanuunka ama dhaawac marka ay ammarka celcelinta ka dalbadaan maxkamadda deegaanka.

Dacwadaha Dishibiliinka (Habka Sharciga)

Hababka dishibiliinka waxay ku qoran yahiin *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook)*. Waxaa ku xiga soo koobid gaaban oo ku saabsan hababkaan:

29. Ka-Joojinta

Waa siyaasadda u dagsan CPS in lagu dadaalo in lagu taageero ardayda in ay xalliyaan dhibatooyinka dabeecadda iyadoo aan la kaashanin disibiliin xag jir ah. Ka-joojinta dugsiga waa talaabada ugu dambeyso oo lagu talliyo. Si loo gaaro taa, agaasimeyaasha/madaxda qeybta sare dugsiga ama kuwo loo xil saaro waxaa lagu dhiiri gelinaa in ay raacaan iyo dhamaystiraan dhamaan faragelinta kale ee ku habboon iyo talaabadaha dishibiliinka si loo fududeeyo waxbarashada iyo asluubta wanaagsan ee ardayga ka hor inta aan la adeegsanin ka-joojinta. Hase ahatee, kiisaska noocaan, marka dabeecadda ardayga ay carqalad ku tahay dugsiga, waxyeelo gaarsiiso naftooda ama dadka kale, ama ku lug leedahay hawl ay mamnuucaan sharciyada Commonwealth of Massachusetts, markaas waxaa dhici karto in loo baahdo ka-joojin.

Ka-joojinta ardayga waa in ay fulliyaan agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama cidda loo xil saaray. Waxaa la tixgelin doonaa xaaladaha ka sii darra ama yareeya ka hor inta aan la gaarin go'aan go'aanka ka-joojinta. Fiiri *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook)* si aad u heshid macluumaad dheeraad ah.

Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu ardayga ka joojin karaa dugsiga muddo hal ilaa toban maalin haddii uu jebiyo sharciyada dugsiga ee lala kulma inta uu ku sugan yahay dhismooyinka dugsiga,

dhulka dugsiga, marka uu u socdo ama ka soo noqdo dugsiga, ama inta uu ku hawlan yahay hawsha dugsiga, ha ku sugnaado xerada dugsiga ama yuu ku sugnaanin. Sida ku xeran cuslaanta dhacdada, ardayga waxaa laga joojin doonaa muddo hal ilaa toban maalin haddii ardayga la arko in uu jebiyay xeerka asluubta ku qoran Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook) ama jebiyay sharciyada ku saleysan dugsiya. Dhaqan sabab u noqon kara ka-joojinta, waxaa ka mid ah, balse kuma eka, kuwa soo socda:

- isticmaalka dagaal, xoog, jujuub, handadaad, cabsi gelin ama dhaqan kale oo la mid ah;
- dab qabadsiiya ama burburiya dhismaha ama hantida dugsiga;
- garaaca digniinta dugsiga lana ogsoon yahay in aysan jirin degdeg la xariira dab;
- haysan jiray ama haysta hub;
- haystay ama isticmaalay maado la kantaroolo ama qamro;
- lagu eedeyay dambi culus lana gaaray go'aan in joogitaankooda sii socda dugsiga ay waxyeelo darran oo la taaban karo ku leedahay wanaagga guud ee dugsiga;
- hor istaagay ama iskudayay in uu hor istaago isagoo adeegsaday xoogga jirka, isu keenidda ama shaqada sii socoto ee dugsi kasta ama shir kasta oo macquul ah oo lagu qabto hantida dugsiga.
- khasaariyay ama xaday hanti uu gaar u leeyahay qof kale ama lagu arkay in uu haysto hanti qof kale leeyahay oo la soo xaday inta uu ku sugan yahay dugsiga;
- sababay ama iskudayay in uu sababo burbur loo geysto hantida dugsiga, xaday ama iskudayo in uu xado hantida dugsiga;
- si ula kac ah sababay ama iskudayay in uu sababo dhaawaca jirka oo loo geysto ardayga:
- ku fashilay in uu u hoggaansamo tilmaamaha ay siiyaan shaqaalaha dugsiga oo sharciga waafaqsan awoodooda rasmiga taasoo dhallisay carqaladeyn ku timaada waxbarashada ardayda kale;
- farageliyay ama iskudayay in uu farageliyo shaqaalaha dugsiga ama ardayga marka uu adeegsado cabsi gelin, kadeed ama jujuub ama carqaladeeyo hawsha dugsiga, ha isticmaalo xoog ama yuusan isticmaalin xoog ama dagaal.
- ka qeybgalay hawsha ay sharciyada Commonwealth of Massachusetts mamnuuceen taaso darqaladeysay hawsha dugsiga;
- sababay ama fulliyay kuna delceliyay fal u dhiganta in uu si ogsoon iyo si ua kac ah u jebiyay sharciyada iyo mas'uuliyadda ku qoran *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda*;
- ku lug yeeshay hawl kasta oo jebisay sharciga Massachusetts oo mamnuuca dhaqanka kadeedka (G.L. c.269, Qeybaha 17-19);
- u hanjabay, kadeeday ama cabsi geliyay qof kasta inta uu ku sugan yahay xerada dugsiga, hawsha dugsiga, gudaha ama dibadda xerada dugsiga;
- ka qeybgalay dhaqan jebiya M.G.L. c. 71, Qeybta 37H iyo/ama 37H ½; iyo/ama
- ka qeybgalay dhaqab jebiya sharciyada ku saleysan dugsiga ama *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda*.

Inta ardayga ku sugan yahay ka-joojin, ardayga waa in uusan ku dhawaanin agagaarka dugsiga mana u laha xaq uu kaga qeybgalo ama tago munaasabadaha ama hawsha dugsiga. In lagu guul dareysto in loo hoggaansamo sharuudahaan waxay dhallin kartaa in agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga dheereyaan ka-joojinta.

30. Ka Saaridda

Waa siyaasadda u dagsan CPS (Dugsiyada Dadweynaha Cambridge in ay bixiso jawi ammaan ah ay ardayda wax ku baran karaan kana qeybgeli karaan dhamaan brograamyada.

Nasiib darro, bacdamaa ay jiraan xaalado marka dabeecadda ardayga halis geliso caafimaadka iyo ammaanka ardayda kale ama shaqaalaha waaxda dugsiga, waxaa lagama maarmaan ah in ardayga laga saaro dugsiga.

Sida hoos timaado Sharciyada Guud ee Massachusetts (Massachusetts General Laws), Cutubka 71, Qeybta 37H, agaasimaha/madaxa qeybt sare dugsiga wuxuu saari karaa ama ka joojin karaa ardayga haysta hub halis

ah, haysta maado la kantaroolo, iyo/ama weerar ku qaada xubin ka tirsan shaqaale.

Sida hoos timaada Sharciyada Guud Massachusetts (Massachusetts General Laws), Cutubka 71, Qeybta 37H ½, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga wuxuu ilaa abid ka joojin karaa ardayga lagu soo eedeyay dambi culus, waxaana dhici karto in uu ka saaro ardayga lagu xakumay dambi culus haddii ardayga sii joogo dugsiga taasii waxyeelo darran gaarsiin karto wanaagga guud dugsiga.

Habka Racfaanka Ka-Saaridda: Haddii, dhageysiga kaddib, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga go'aan ku gaaro in uu saaro ardayga, marka uu jebiyo sharciga sida hoos timaado M.G.L.c. 37H, ardayga wuxuu heli doonaa toban maalin laga bilaabo taariikhda dhageysiga si loo ogeysiiyo Maamulaha racfaanka. Xaajada racfaanka kuma koobnaan doonto keliya go'aanka xaqiiqada haddii ardayga uu jebiyay qodob ku jira qeybtaan. Dhageysiga kaddib, haddii agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga go'aan ku gaaraan in ay ardayga ka saaraan ama ka joojiyaan dugsiga muddo aan la xadidin, taasoo la xariirto jebinta M.G.L.c. 71, Qeybta 37H ½, ardayga wuxuu leeyahay shan maalin laga bilaabo taariikhda dhageysiga uu Maamulaha ogeysiiyo racfaanka. Ardayga wuxuu ku sugnaan doonaa dibadda dugsiga ilaa go'aan laga gaaro racfaan kasta. Ardayga wuxuu xaq u leeyahay qareen, dhageysiga la hor keeno Maamulaha ama cidda loo xil saaro. Maamulaha ama qofka loo xil saaray wuxuu qoraal ahaan ogeysiin waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka go'aanka ku saabsan racfaanka. Fiiri *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook)* si aad u heshid macluumaad dheeraad ah.

31. Baaritaanka iyo Su'aalaha la Weydiiyo Ardayga

Siyaasadda Guddiga Dugsiga Cambridge (Cambridge School Committee) ee la xariirta baaritaanada lagu sameeyo ardayga iyo su'aalaha ay weydiiyaan sekuritiga dugsiga waa sida soo socoto:

HEERKA DARAJADA K-8: Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga, kaaliyaha agaasimaha ama qofka loo xil saaray waa in ay fasaxaan baarista iyo su'aalaha ay sekuritiga dugsiga weydiiyaan ardayga ama shaqaalaha kale aan ku saleysneyn dugsiga.

HEERKA DARAJADA 9-12: Agaasimaha, kaaliyaha agaasimaha, madaxa ardayda ama qofka loo xilsaaray waa in uu bixiyaa ammarka ku saabsan baarista ardayga

DHAMAAN HEERARKA DARAJADA (K-12): Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga, kaaliyaha agaasimaha, madaxa ardayda, qofka loo xilsaaray madaxa qeybta sare dugsiga, marka ay macquul tahay sida suurtogalka ah, waxay codsan karaan qofka shaqaalaha sekuritiga loo baahan yahay in loo diro dugsiga iyo/ama bulshada waxbarashada yar.

HEERKA DARAJADA K-8: Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga, Kaaliyaha Agaasimaha ama qofka loo xilsaaray waa in ay joogaan inta ay socoto baaritaanka iyo marka sekuritiga dugsiga, ama shaqaalaha aan ka tirsaneyn dugsiga ay su'aalo weydiinayaan ardayda.

HEERKA DARAJADA 9-12: Agaasimaha, kaaliyaha agaasimaha, madaxa ama qofka loo xil saaray waa in ay joogaan inta ay socoto baaritaanada ardayda taasoo ay fulliyaan sekuritiga dugsiga ama shaqaalaha kale aan ku saleysneyn dugsiga.

HEERKA DARAJADA K-8: Qof ka tirsan jinsi la mid ah jinsiga ardayga, marka ay suurtogal tahay sida macquulka ah, waa in uu joogo marka sekuritiga dugsiga ay su'aalo weydiinayaan ardayda. Dhamaan baarista lagu sameeyo ardayda waa in uu fulliyo qof, jinsi ahaan la jinsi ah ardayga, oo ka tirsan sekuritiga dugsiga.

HEERKA DARAJADA 9-12: Dhamaan baarista lagu sameeyo ardayda waa in uu fulliyo qof, jinsi ahaan la jinsi ah ardayga, oo ka tirsan sekuritiga dugsiga.

HEERKA DARAJADA K-8: Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga, kaaliyaha agaasimaha ama qofka loo xil saaray, waa in ay ogeysiiyaan waalidiinta ama ilaaliyeyaasha ka hor inta aan la fullinin baarista lagu sameeyo ardayga uu sekuritiga dugsiga fulliyo. Haddii ogeysiiska hore aan lagu guuleysanin, waxaa kaddib la ogeysiin doonaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtogalka ah, kaddibna waxaa la diri doonaa warqad isla maalintaas.

HEERKA DARAJADA 9-12: Agaasimaha, kaaliyaha agaasimaha, madaxa ardayda ama qofka loo xilsaaray waa in uu dhakhso ogeysiiyo

waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka kaddib marka sekuritiga dugsiga fulliyo baarista. Kaddib, warqad ayaa la diri doonaa isla maalinta.

HEERKA DARAJADA K-8: Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga, kaaliyaha agaasimaha ama qofka uu magacaabo, waa in ay ogeysiiyaan waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ama qofka lagala xariiro arrimaha degdegga ka hor inta sekuritiga dugsiga aysan su'aalo weydiinin ardayga. Haddii ogeysiinta hore aan lagu guuleysanin, waalidka/ilaaliyeyaha/bixiyaha daryeelka waa la ogeysiin doonaa sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtogalka ah, kaddibna waxaa loo diri doonaa warqad isla maalintaas.

XASUUSIN: Xariirka degdegga waa qof uu waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka u magacaabay in uu jawaab ka bixiyo xaaladaha ku lugta leh arrimaha dishibiliinka, sida weydiinta su'aalaha ama baarista. Sannad kasta waxbarasha, waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxaa laga codsan doonaa in ay qof u magacaabaan xariirinta degdeggaxagga arrimaha dishibiliinka, kana mid ah weydiinta su'aalaha ama raadinta, iyo in xariirkaas u shaqeeyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka xagga arrimaha dishibiliinka, sida weydiinta su'aalaha ama raadinta, ilaa inta waalidka/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ogol yahiin.

DHAMAAN HEERARKA DARAJADA (K-12): Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga, kaaliyaha agaasimaha, maamulaha guriga ama qofka loo xil saaray waa in ay ogeysiiyaan ardayda xuquuqda ay leeyahiin ka hor inta aan la baarin ama aysan wareysanin sekuritiga dugsiga.

HEERKA DARAJADA 9-12: looma baahna ogeysiinta waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka marka sekuritiga dugsiga ay su'aal weydiiyaan ardayga.

Sekuritiga dugsiga ma bilaabi doono baaritaan madax banaan haddii Maamulaha uusan horay u ogolaanin.

XASUUSIN: Baaritaanka madax banaan wuxuu tixraacaa baaritaan kasta oo cabsi ulus ku haaya ammaanka ardayda, kulliyadda iyo/ama shaqaalaha ee socda mana aha waxa ka dhasha dhacdo gooni ah. Baaritaanka waa in uu sidoo kale ku lug leeyahay hal dugsi ama ka badan ama CRLS_ada dagmada.

32. Habka Cabbashada Ardayga

Marka ardayga ama waalidka/ilaaliyaha aaminsan yahiin in xuquuqda ardayga ee ku qoran *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook)* uu jebiiyay shaqaale ka tirsan waaxda dugsiga, kaddibna lagu guuldareystay isku dayidda dhamaan daacad laga yahay si loo xalliyo xaaladda, ardayga ama waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka waxay ashtako qoran u gudbin karaan Maamulaha. Ashtakada qoran waxaa ka mid ah cabbashada, xaqa la diiday, oraah gaaban oo ku saabsan xaqiiqada, iyo codsi lagu doonaayo in wax laga qabto. Haddii Maamulaha uusan awoodin in uu xalliyo cabbashada ilaa dhinaca la xumeeyay ka noqdo raali muddo todobo maalin dugsiyeed gudaheeda kaddib marka la helo ashtakada qoran, Maamulaha wuxuu ogeysiis u diri doonaa labada dhinac.

Ogeysiiska waxaa ku jira:

- waqtiga iyo goobta uu ka dhici doono shirka la qaban doono ugu dambayn toban maalin kaddib marka la helo ashtakada, marka laga reebo labada dhinac oo la siin doono shan maalin dugsiyeed si ay isugu diyaariyaan dhageysiga; oraahda cabbashada ku qoran ashtakada;
- oraah buuxda oo ku saabsan xaqiiqada, sida magacyada marqaatiyada;
- oraah ku saabsan naxariista la codsaday, iyo;
- oraah ku saabsan xuquuqda ay leeyahiin dhamaan dhinacyada kana mid ah xaqa in dhamaan dhinacyada la yimaadaan qareen ama qof kale oo iyaga ka mattala shirka, in ay keenaan marqaatiyo iyo caddeyn iyo in ay su'aalo weydiyaan marqaatiyada ka soo horjeedo.

Shirka wuxuu waafaqsanaan doonaa tilmaamaha soo socdo:

- waa in lagu fulliyo Maamulaha ama qofka loo magacaabo hortiisa,
- waa in lagu fulliyo kulan xeran, aan rasmi ahayn,
- dhamaan dhinacyada waxay xaq u leeyahiin in uu mattalo qareen ama qof kale ay iyaga soo xushaan,
- dhamaan dhinacyada waxay fattashi karaan diiwaanada dugsiga iyo warqadaha kale ee la xariira ashtakada, iyo

- dhamaan dhinacyada waa in loo ogolaado in ay su'aalo weydiiyaan marqaatiyada iyo waa in ay xaq u leeyahiin in ay soo gudbiyaan marqaatiyo iyo caddeyn.

Haddiii maamulaha ama qofka loo xilsaaray go'aan ku gaaro in la jebiyay xuquuqda ardayga, isaga/iyada wuxuu go'aan ka gaari karaa in la siiyo garta ku habboon.

33. Ka qeybgalka Hawlaha Ka Baxsan Manhajka

Maamulka CPS iyo Waaxda Amaanka iyo Nabadgelyada waxay reebteen xaq ay u leeyahiin in ay ogolaasho u diidaan hawlaha dheeraadka ku ah manhajka qof kasta oo halis suurtogal ku ah ammaanka iyo sekuritiga dadka daawada iyo ka-qeybgaleyaasha.

Ardayda ku dhaca sharuudaha ku qoran hoos waxaa laga saari doonaa atleetikada, draamada, muusikada, dheesha, prom, safaraka dibadda iyo hawlaha kale ee dheeraadka ku ah manhajka ay dadka daawadaan:

- Ardayda laga joojiyay;
- Ardaydii hore ee dugsiga laga saaray; iyo/ama
- Ardayda ku qoran brograam kale taasoo ugu wacan arrimo dishibiliin

Arday kasta oo soo gala qeybaha kore oo dareema in dabeecadooda u baahan tahay in la tixgeliyo si loo ogolaado waa in uu codsi u soo gudbiyo Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga (Principal/Head of Upper School), Kaaliyaha Agaasimaha (Assistant Principal) ama Madaxa Ardayda (Dean of Students). Waa in la gaaro heshiis ka dhexeeyo Agaasimaha Sekuritiga (Director of Security) iyo Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga (Principal/Head of Upper School), Kaaliyaha Agaasimaha ama Madaxa Ardayda si ardaygaan u helo ruqsad uu ku tago hawsha dheeraadka ku ah manhajka.

CPS waxay reebaneysaa xaqa ay u leedahay in ay xubnaha bulshada ka reebto atleetikada, drama, muusikada, dheesha, proms, safarada dibadda, iyo hawlaha kale ee dheeraadka ku ah manhajka ee leh daawadeyaal.

- Ku lug yeeshay dhaco culus oo ka dhacday gudaha bulshada;
- Leh taariikh dagaal; iyo/ama
- Wax carqaladeeyay iyo/ama sharaf darro u geystay shaqaalaha.

XUQUUQDA IYO AXSAANKA

34. Takoor La'aanta ka soo Horjeedo Ardayda

Cutubka 76, qeybta 5 Sharciyada Guud Massachusetts (Massachusetts General Laws), qeybaha munaasabka ah, in: "qofna laga reebi karin ama la takoori karin xagga gelitaanka dugsiga dadweynaha ee magaalo kasta, ama helitaanka fa'iidada, axsaanka iyo koorsooyinka la barto ee dugsiga dadweynaha noocaas xagga isirka, midabka, jinsiga, diinta, asal qaran, aqoonsiga jaadka qofka ama rabitaanka jinsiga."

CPS waxay ballan qaaday in ay bixiso jawi ay dhamaan ardayda wax ku baran karaan kana qeybgeli karaan dhamaan hawlaha la xariira waxbarashadooda. Waa mamnuuc in qofka loo geysto nooc kasta oo ka mid ah ciqaabta jirka. Intaas kaddib, lama ogola dabeecad kasta oo aflagaado u geysata sharafta dadka kale, faragelisa xoriyadda qofka u leeyahay in uu waxbarto, ama abuurta jawi waxbarasho oo cadaawad ku dhisan, waxay dhallin doontaa in laga qaado talaabo dishibiliin. Intaas kaddib, cabsi gelin kasta, kadeed, sharaf darro, yasniin ama dabeeca kale oo aargudasho ah oo loo geysto ardayda looma dul qaadan doono, waxayna dhallin doontaa in laga qaado talaabo dishibiliin. Shaqaalaha dugsiga iskuma dayi doonaan in ay hor istaagaan ama in ay ka niyad jebiyaan ardayda ama waalidiintooda/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka in ay dhaqanka noocaas u soo sheegaan saraakiisha dugsiga. Faragelin kasta oo nooacaas ah waa in isla markiiba loo sheego Maamulaha.

Hoos waxaad ka heli doontaa sharaxaad gaaban oo ku saabsan siyaasadaha ka soo horjeedo CPS.

35. Siyaasadda Guryaha Macquulka iyo Hababka

CPS ma samayso takoor xagga gelitaanka, daweynta ama la xariirka brograamyada ama hawlaha iyo ama shaqada la xariirto brograamyadeeda iyo hawlaheeda. Waa siyaasadda CPS in fududeyn macaquul ah la siiyo

ardayda la ogsoon yahay in ay qabaan itaal darrida jirka iyo madaxa. Codsiyada fududeynta Qeybta 504 (Section 504) ee loogu talogalay ardayda waxaa toos loogu gudbin karaa Iskuduwaha 504 (504 Coordinator) ee ku sugan dugsiga ardayga. Iskuduwaha 504 (504 Coordinator) ee dugsiga dagmada waa Assistant Superintendent for Student Services, Cambridge Public Schools, 159 Thorndike Street, Cambridge, MA 02141, 617-349-6500.

36. Ogeysiiska Xuquuqda Hoos Yimaada Qeybta 504 Sharciga Dayactirka 1973

Xuquuqdaan waxaa lagu dabaqaa waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo ardayda qaangaaray, taasoo Massachusetts ka ah 18 (toban iyo sideed) sanno, waana sida soo socoto:

1. Waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ama ardayga qaangaaray wuxuu xaq u leeyahay in uu helo koobiga ogeysiiska xuquuqda habka loo wado hawsha marka dugsiga dagmada aqoonsato, qiimeyso, diido in ay qiimeyso, fulliso meeleynta aqoonta cusub, diido meeleynta aqoonta cusub ama samayso isbaddal la taaban karo xagga meeleynta ardayga taasoo ugu wacan itaal darrida ardayga ama itaal darrida la tuhunsan yahay.
2. Waalidka/Ilaaliyaha/Bixiyaha Daryeelka ama ardayga qaangaaray wuxuu xaq u leeyahay in la qiimeeyo ardayga haddii dugsiga dagmada la tahay in ay jirto sabab in cunugga uu qabo naafonimada madaxa ama jirka oo si la taaban karo u soo koobta waxbarashada ama hawl kale oo weyn nolosha. Waalidiintooda/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ama ardayga qaangaaray wuxuu xaq u leeyahay qiimeyntaan ka hor inta aan la samaynin qorshaha meeleynta iyo ka hor inta aan isbaddal macno leh lagu samaynin meeleynta waxbarashada cunugga. Tusaale ku saabsan isbaddal la taaban karo xagga meeleynta waxbarashada waa tixraacin in laga saaro.
3. Ardayga wuxuu xaq u leeyahay waxbarasho lacag la'aan ah oo ku habboon dadweynaha. Waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka wuxuu mas'uul ka yahay isla kharashka sida waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka caruurta aan itaalka darneyn.
4. Ilaa inta ugu badan ee suurtogalka ah, ardayga wuxuu xaq u leeyahay in uu wax la barto caruur aan itaal darri qabin.
5. Waalidka/Ilaaliyaha/Bixiyaha Daryeelka ama ardayga gaaray toban iyo afar sanno ama ka badan ama galay darajada sagalaad wuxuu xaq u leeyahay in uu fiiriyo dhamaan diiwaanada la xariira uu dugsiga ka haayo ardayga.
6. Waalidka/Ilaaliyaha/Bixiyaha Daryeelka ama ardayga qaangaaray wuxuu xaq u leeyahay dhageysiga nidaamka aan dhinacna jirin haddii ay rabaan in ay ka hortagaan taalabo kasta ay qaadaan Dugsiyada Dadweynaha Cambridge xagga aqoonsiga ardaygooda, qiimeynta, ama meeleynta sida hoos timaado Qeybta 504 Sharciga Dayactirka (Section 504 Rehabilitation Act).
7. Haddii waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ama arday qaangaaray doono in uu ka doodo talaabo ay qaaday Kooxda Qeybta (Section Team) 504 marka la adeegsado dhageysi dhexdhexaad ah oo ilaaliya nidaamka, Codsiga Dhageeysiga (Request for Hearing) waa in loo gudbiyo xafiiska racfaanada khaaska Bureau of Special Education Appeals (BSEA), One Congress Street, 11th Floor, Boston, MA 02114, ama faks ku socdo BSEA, 617-626-7270. Codsigaan qoran oo lagu dalbanaayo dhageysi waa in sidoo kale loo gudbiyo Superintendent of Schools, Cambridge Public Schools, 159 Thorndike Street, Cambridge, MA 02141. Haddii waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ama ardayga qaangaaray ugu dambayntii qilaafo go'aanka sarkaalka dhageysiga, waxay xaq u leeyahiin in ay raadsadaan go'aankaas kaddib markay ay ashtako u soo gudbiyaan maxkamadda dagmada federaalka.
8. Haddii waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ama ardayga gaaray qaangaar uu qabo arrimo kale oo ku wareegsan waxbarashada ardayga, aan si gaar ah ugu lug lahayn aqoonsiga, qiimeynta ama meeleynta, waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ama ardayga qaangaaray waxay xaq u leeyahiin in ay Iskuduwaha Qeybta 504 dugsiga dagmada u gudbiyaan cabbasho ama ashtako, kaasoo ah Kaaliyaha Maamulaha Adeegyada Ardayga. Xafiiska wuxuu ku yaal dabaqa kowaad 159 Thorndike Street, Cambridge, Massachusetts. Namabarka

telefoonka Xafiiska Adeegyada Ardayga (Office of Student Services) waa 617-349-6500.

9. Waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ama ardayga qaangaaray wuxuu kaloo xaq u leeyahay in uu ashtako u soo gudbiyo Office of Civil Rights of the United States Department of Education, 5 Post Office Square, 8th Floor, Boston, MA 02109-3921 Telefoonka: 617-289-0111; Faks: 617-289-0150; TDD: 1-800-877-8339; Email: OCR.Boston@ed.gov

37. Waxbarashada Khaaska

Sharciga federaalka iyo midka gobolka waxay arday kasta ka ballan qaadeen xaqa uu u leeyahay waxbarasho lacag la'aan ah oo ku habboon dadweynaha iyadoo aan la fiirinin itaal darrida. Haddii aad aaminsan tahay in cunugaada u baahan yahay adeegyada waxbarashada khaaska, waxaad xaq u leedahay in aad raadsatid in qiimeyn lagu sameeyo cunugaada haddii uu xaq u leeyahay adeegyada noocaas. Haddii xubin ka tirsan shaqaalaha uu qabo arrin gaar ah oo ku saabsan baahida loo qabo aqoonta iyo/ama baahida loo qabo bulshonimada iyo dabeecadda, waa in ay arrimahaas u soo jeediyaan agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga si loo bilaabo Jawaab la siiyo Faragelinta iyo/ama habka Kooxda Taageerada Waxbarashada (Instructional Support Team).

38. Ardayda Qabta IEP iyo Qorshooyinka 504

Ardayda qaata waxbarashada khaaska ama kuwa qaata Qorshooyinka 504 (504 Plan) waxay hoos yimaadaan qodobada Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook). Ardayda itaalka darran iyo ardayda qabta Qorshooyinka 504 (504 Plans), sida ku sifeysan sharciyada federaalka iyo gobolka iyo xeerarka, waxay hoos imaan doonaan sharciyada *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda,* marka laga reebo sida ku qoran qeybta 18 *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda.* Gaar ahaan, IEPS iyo Qorshooyinka 504 waxay muujin doonaan haddii ardayga laga filan karo in uu la kulmo koodka dishibiliinka caadiga sida ku qoran Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook ama haddii itaal darrida ardayga u baahan tahay habab dishibiliin gaar ah oo wax ka qabata baahida ardayga. Haddii itaal darri saameyso dabeecadda ardayga, dabeecadaha noocaas waxaa wax looga qaban doonaa IEP_da iyo/ama hawsha Kooxda 504. Sida la xariirta qaadashada go'aanka maamulka sida hoos timaada *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda*, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga (ama qofka loo xilsaaray) wuxuu ogeysiin doonaa Xafiiska Adeegyada Ardayga (ama qofka loo xilsaaray) gafka laga dhaafi karo ardayga itaalka darran kaasoo IEP loo sameyay iyo/ama Qorshaha 504 (504 Plan) uusan muujinin baahida loo qabo in baddalaad lagu sameeyo xeerka dishibiliinka ku qoran *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda* ama sharciyo kasta oo ku saleysan dugsiga, iyo koobiga ogeysiiska ka-joojinta loo gudbin doono Xafiiska Adeegyada Ardayga.

Shaqaalaha ka socda Xafiiska Adeegyada Ardayga (Office of Student Services) wuxuu ka qeybgeli doonaa dhamaan go'aanada maamulka sida hoos timaado Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook) ee ku lugta leh ardayda itaalka darran. Haddii go'aanka maamulka ee hoos yimaado *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda* uusan saamaynin meeleynta ardayga iyo/ama uusan dhallinin isku darka tirada ka-joojinta in ka badan toban (10) maalin dugsiyeed halkii sanno dugsiyeed, looma baahna shirka TEAM. Haddii go'aanka maamulka ee hoos yimaada *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda* saamayn doono meeleynta ardayga iyo/ama uu dhallin doono iskudarka ka-joojinta in ka badan toban (10) maalin dugsiyeed muddo hal sanno dugsiyeed, waxaa loo baahan yahay in la qabto shirka TEAM ka hor inta aan la gaarin go'aanka maamulka in la saaro dishibiliin. Ka hor inta uusan gaarin go'aanka maamulka ee hoos yimaada *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda*, Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga waxay go'aan ka gaari doonaan haddii ardayga loo aqoonsaday in uu yahay arday itaal darran iyo ama haddii loo dirray qiimeynta waxbarashada khaaska balse aan weli la ogaanin in uu xaq u leeyahay adeegyada waxbarashada khaaska. Ardayga aan loo arkin in uu xaq u leeyahay waxbarashada khaaska iyo adeegyada la xariira iyo ka qeybgalay dabeecad jebisay sharciga ama xeerka aadaabta wuxuu ku adkeysan karaa badbaadinta uu ka helo sharciyada waxbarashada khaaska ee gobolka iyo federaalka ka hor inta dabeecadda ka dambaysay talaabada dishibiliinka.

Waaxda dugsiga waxaa loo haystaa in ay ogsoon tahay in ardayga uu yahay arday qaba itaal darri haddi ka hor dabeecadda dhallisay talaabada dishibiliinka lala kulmay waxa soo socda:

- Waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka wuxuu qoraal u soo jeediyay shaqaalaha kormeerka ama maamulka ama macalinka cunugga in ardayga u baahan yahay adeegyada waxbarashada khaaska; ama
- Waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka codsado in ardayga la qiimeeyo; ama
- Macalinka ardayga ama shaqalaha kale dugsiga waxay soo jeediyeen arrin u gaar ah oo ku saabsan sasaanka dabeecadda uu ardayga si toos ah u muujiyay Kaaliyaha Maamulka Adeegyada Ardayga ama shaqaale kale oo ka tirsan kormeerka Xafiiska Adeegyada Ardayga.

Waaxda dugsiga waxaa loo haaystaa in aysan ogsooneen in ardayga uu yahay arday qaba itaal darrii haddii:

- Waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ma ogolaanin in qiimeyn lagu sameeyo ardayga; ama
- Waalidka/llaaliyaha/Bixiyaha Daryeelka wuxuu diiday adeegyada la siiyo ardayga; ama
- Waa la qiimeyay ardayga kaddibna waxaa loo arkay in uusan xaq u lahayn waxbarashada khaaska iyo adeegyada la xariira.

Haddii waaxda dugsiga aan loo arkin in ay ogsoon tahay in ardayga uu yahay arday itaal darran, waxaa dhici karto in ardayga la saaro dishibiliin sida hoos timaado xeerka dishibiliinka ee ku qoran *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda* marka laga reebo xadidaadda soo socda:

- Haddii waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ee ardayga codsadaan qiimeynta muddada ardayga loo geysto dishibiliin, markaas qiimeynta waa in loo fulliyo si degdeg ah; iyo
- Ilaa laga dhamaystiro qiimeynta, ardayga waa in uu ku sugnaado meeleynta waxbarashada ay soo dajiyeen madaxda dugsiga.

Haddii go'aanka maamulka sida hoos timaado *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda* saamayn doono meeleynta ardayga iyo/ama dhallin doono iskudarka ka-joojinta muddo ka badan toban (10) maalin dugsiyeed muddo hal sanno dugsiyeed iyo/ama dhallin doonto ka-saarid, waxaa lagu dabaqi doonaa qodobada soo socdo:

Dugsiga, waalidiinta/ilaaliyeyaasha ardayga iyo xubnaha kale ee muhiimka ah kana tirsan Team_ka ardayga waxay fullin doonaan fiirinta soo jeedinta si loo ogaado haddii aadaab darrada ardayga ahayd shay muujiya itaal darrida ardayga. Si ay u gaarto go'aankaan, TEAM waxay tixgelin doontaa haddii: (a) dhaqanka su'aasha ka taagan tahay ka dambeeyo, ama uu toos xariir ula leeyahay itaal darrida cunugga; ama (b) dhaqanka su'aasha ka taagan tahay uu toos uga dhashay fullin la'aanta IEP_da ardayga iyo/ama Qorshaha 504. Sida ku xeran natiijada ka soo baxda go'aanka, waxaa dhici karto in la fulliyo iyo in aan la fullinin talaabada dishibiliinka la soo jeediyay. Haddii Kooxda go'aansato in dhaqanka ardayga yahay mid muujiya itaal darrida ardayga, ardayga waxaa lagu soo celin doonaa meeleynta laga soo waday ardayga haddii waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo dugsiga dagmada ku heshiyaan isbaddalka meeleynta in ay tahay sida qeyb ka tirsan qorshaha faragelinta dabeecadda ee ardayga. Intaas kaddib, TEAM waa in ay qaado talaabooyin degdeg ah si ay wax uga qabato waxa ka dhiman IEP_da ardayga iyo/ama Qorshaha 504, meeleynta ama fullinta sida waafaqsan sharciyada iyo xeerka lagu dabaqi karo ee gobolka iyo federaalka, kana mid ah fullinta qiimeynta dabeecadda shaqada ee ardayga, hase ahatee qiimeynta noocaas waa in ay tahay mid aan horay loo fullinin ka hor inta aysan dhicin dhaqanka u horseeday shirka lagu ogaado muujinta dabeecadda; iyo in la fulliyo qorshaha faragelinta dabeecadda lana baddalo hadba sida lagama maarmaanka ah qorshaha faragelinta dabeecadda jirta ee ardayga.

Haddii Kooxda go'aan ku gaarto in dabeecadda ardayga aysan muujinin itaal darrida ardayga:

- Kooxda waxay soo saari doontaa qorshe kale oo ardayga siiso waxbarashada dadweynaha ku habboon oo lacag la'aan ah;
- Kooxda waxay waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka u soo bandhigi doontaa qorsho kale oo la socdo ogeysiis qoran sida ay rabaan sharciyada iyo xeerka gobolka iyo federaalka. Diidmada ama marka waalidiinta/ilaaliyeyaasha ku guul dareystaan in ay ogolaadaan bixinta adeegyada hoos yimaada qorshe kale, taasi ma hor istaagi karto joojinta in la fulliyo

Haddii waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ardayga codsadaan dhageysi la hor dhigo Waaxda Waxbarashada Dugsiga Hoose iyo Sare ee Massachussetts, Xafiiska Racfaanka Waxbarashada Khaaska (Massachusetts Department of Education Bureau of Special Education Appeals), muddada ku meelgaarka, ardayga wuxuu sii wadi doonaa meeleynta waxbarashada kale uu dugsiga aqoonsaday taasoo ka dambeyso go'aanka maamulka ee hoos yimaada *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda* ilaa laga gaaro dhicidda qodobka dishibiliinka ama ammar uu soo saaro sarkaalka dhageysiga oo wax ka baddala meeleynta ardayga, hadba midka soo hor mara.

Dhamaan xaaladaha marka isbaddal ku yimaado meeleynta ama ka-joojin muddo toban (10) maalin dugsiyeed ama ka badan la saari doono, ardayga waa in la siiyo waxbarasho dadweynaha ku habboon oo lacag la'aan aha. Shaqaalaha dugsiga waxay tixgelin karaan daruufaha gaarka hadba sida kiisku yahay marka la rabo in go'aan laga gaaro haddii loo baahan yahay in la soo saaro ammar ku saabsan baddalaadda meeleynta ardayga jebyay xeerka asluubta.

Muddo toban (10) dugsiyeed gudahooda, taariikhda go'aanka maamulka kaddib, si looga qaato talaabo dishibiliin, waxaa dhici doono waxa soo socdo:

- Kooxda (TEAM) waa in ay isu timaado si ay u fulliso qiimeynta dabeecadda hawlgalka ardayga, haddii qiimeyntaas aysan horay u dhicin.
- Kooxda waa in ay fulliso qorshaha faragelinta dabeecadda ardayga haddii qorshaha noocaas aan la fullinin ka hor inta aan la gaarin dabeecadda ka dambeysay dishibiliinka; ama
- Kooxda TEAM waa in ay fiiriso, waxna ka baddasho qorshaha faragelinta dabeecadda ee loogu talogalay ardayga haddii qorshaha noocaas la fulliyay ka hor dabeecadda ka dhallatay dishibiliinka.
- TEAM waxay go'aan ku gaari kartaa meeleynta ardayga, ha la haysto ama yaan la haysanin ruqsadda waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka, loona baddalo waxbarasho kale oo ku meel gaar ah muddo aan ka badneen afartan iyo shan (45) maalin dugsiyeed, hase ahatee waa in la siiyo waxbarashada dadweynaha ku habboon mid ka mid ah xaaladaha soo socda:
- Ardayga hub u soo qaato dugsiga ama meel ay ka socoto hawsha dugsiga;
- Ardayga isaga oo ogsoon haysta, isticmaala, iibiya ama dalbada iibinta mukhadaraad sharci darro ah iyo ama maado la kantaroolo inta uu ku sugan yahay hawl ka socoto dugsiga; ama
- Marka ardayga uu dhaawac culus u geysto jirka qof kale inta uu joogo dugsiga, xerada dugsiga, ku sugan yahay xerada dugsiga, ama meel ay ka socoto munaasabad uu leeyahay dugsiga. "Halista dhaawaca jirka" waxaa si gaar ah loogu sifeyaa in ay ku lug leedahay halis la taaban karo oo dhallin kara dhimasho, xanuun badan oo ku yimaada jirka, muddo dheer baddalli kara qaabka ama mddo dheer lumin kara ama naafo ka dhigi kara hawsha xubin ka tirsan jirka, xubin ama awoodda madaxa.

Dugsiga wuxuu kaloo amar ka raadsan karaa Waaxda Aqoonta Dugsiga Hoose iyo Sare, Xafiiska Racfaanada Waxbarashada Khaaska ee Waaxda Waxbarashada Massachusetts (Massachusetts Department of Elementary and Secondary Education Bureau of Special Education Appeals) si ardayga looga saaro ilaa afartan iyo shan (45) maalin dugsiyeed lana geeyo waxbarasho kale oo ku meel gaar ah haddii dugsiga go'aan ku gaaro in sii joogidda ardayga u badan tahay in ay dhaawac u geysato ardayga ama dadka kale.

39. Talaabada Sinaanta (Affirmative Action)/ Ogeysiiska Takoorka La'aanta

CPS waxay xil iska saaray fikradda fursadaha siman xagga dhinac kasta hawlaheeda, xagga fursadaha aqoonta iyo shaqaaleynta, labadaba. Waxay mamnuucdaa mana samayso takoor ku saleysan isirka, midabka, asal qaran, isir, abtirsiino, diin, da', itaal darri, macluumaadka geneetikada, xaaladda ciidanka, xaaladda guurka, jinsiga, jaadka qofka, aqoonsiga jaadka qofka ama soo jeedinta, rabitaanka jinsiga, xaamilonimada, ama xaaladda la xariirta xaamilonimada xagga brograamyadeeda iyo hawlaha ama ogolaashada gelitaanka ama ka shaqeynta brograamyadeeda ama hawlaheeda waxbarashada. CPS waxaa kaloo bixisaa sinaanta la siiyo Boy Scouts iyo kooxaha kale dhallinta sida uu rabo sharciga federaalka Qofka soo socda waxaa loo xilsaaray in qabto su'aalaha ku saabsan

siyaasadaha ka soo horjeedo takoorka: Director of Diversity Development, 159 Thorndike Street, Cambridge, MA 02141, 617-349-6457.

Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan takoor la'aanta, waxaad kaloo la xariiri kartaa Xafiiska Xuquuqda Madaniga (Office of Civil Rights) ee United States Department of Education, 5 Post Office Square, 8th Floor, Boston, MA 02109 Telefoonka: 617-289-0111; Faks: 617-289-0150.

40. Xariiriyaha Aqoonta Guri Laawaha

CPS waxay xil iska saartay in ay caruurta gurilaaweyaasha iyo dhallinta aan lala soconin siiso fursado siman ay ku helaan waxbarashada dadweynaha isla sida loo siiyo caruurta Cambridge. Kaalmada in wax laga qabto arrimaha la xariira waxbarashada caruurta guri laaweyaasha iyo dhallinta aan lala soconon, waa in loo jeediyo Xariiriyaha Waxbarashada Guri Laawaha (Homeless Education Liason) ee Dugsiyada Dadweynaha Cambridge. Xafiiska Xariiriyaha Waxbarashada Guri Laawaha (Homeless Education Liaison) wuxuu ku yaal xafiiska Cutubka I oo ah 159 Thorndike Street, Cambridge, MA 02141. Namabarka telefoonka waa 617-349-6487.

41. Xorriyadda Isu Imaashada

Ardayda waa in ay ka helaan xaqa ay u leeyahiin in ay si madax banaan oo nabad geliyo ku jirto isugu yimaadaan hantida dugsiga iyo in ay soo jeediyaan aragtidooda iyo fikradahooda. Ardayda qorsheystay isu imaasho ama shir waxay u baahan yahiin in ay ogolaasho ka helaan agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama kaaliyaha agaasimaha. Ardayda waxay kaloo xaq ku leeyahiin in ay casumaan iyo in ay dhageystaan dadka ka yimaada dibadda ee ka hadla gudaha dugsiga. Saraakiisha dugsiga waxay nidaamka u samayn karaan waqtiga iyo goobta laga jeediyo qudbadaha iyo waxay u baahan yahiin ogeysiis hore si looga maarmo qilaafaad loona hubiyo in sida habboon loo badbaadiyo bulshada dugsiga. Ardayda waxaa looga baahan yahay in ay magacyada af hayeenada dibadda u gudbiyaan Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga ama Kaaliyaha Agaasimaha si ay u helaan ogolaasho hore. Saraakiisha dugsiga waxay ogolaan doonaan qof dibadda ka yimaada oo soo jeediya qudbad haddii aysan jirin aasaas xaqiiqo laa aaminsan yahay in qofka qudbadda soo jeediyo uu sabab u noqon doono carqaladeynta hawlaha dugsiga. Shirarka dawladda ardayga iyo shirarka bulshada dugsiga waa meelaha ku habboon oo lagu qorsheeyo munaasabadaha noocaas.

42. Xoriyadda Hadalka

Ardayda ku jirta dugsiga waxay leeyahiin xuquuq hoos yimaada dastuurka sida maxkamadaha u sifeyeen. Ardayda waxay xaq u yeelan doonaan in ay sheegaan waxa ay qabaan iyagoo hadla, qora, qaata ama muujiya calaamadaha sida battanada, teesaraha, calaamadaha iyo suunka gacanta, ama hab kasta ama qaab kasta oo wax lagu soo jeediyo. Agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama kaaliyaha agaasimaha waxay soo jeedinta u samayn karaan nidaam haddii uu jiro aasaas, xaqiiqo, la taaban karo, oo la aamini karo in qaabka soo jeedinta ay sabab u noqon karto ama sabab u tahay carqalad u soo socota, la taaban karo, oo ku timaado hawlaha dugsiga. Carqaladeyntaada waxay ka koobnaan kartaa taageerada la siiyo dhamaan noocyada isirka, sawirada qaawanaanta, wararka aflagaadada ama sharaf tirka, ama kicinta dadka kale si loo jebiyo sharciyada u dagsan dugsiga.

43. Xoriyadda Qofka

Ardayda waxay xaq u leeyahiin in ay helaan ammaan iyo nabad geliyo inta ay ku sugan yahiin dhismooyinka dugsiga, dhulka dugsiga, marka ay u socdaan kana soo noqdaan dugsiga, iyo marka ay dugsiga ka jirto munaasabo habeysan. Looma ogola in ardayda, shaqaalaha dugsiga ama saraakiisha dugsiga isticmaalaan xoog hab kasta si ay u sababaan ama iskudayaan in ay sababaan dhaawac loo geysto arday kale, macalin ama sarkaal ka tirsan dugsiga. Waxaa dhici karto in macalinka ama sarkaal ka tirsan dugsiga isticmaalo xoog haddii xoogga macquul yahay loona baahan yahay. Saddaxda xaalad marka arrintaan la fasaxi karo:

- in la helo milkiyadda hub ama shay kale oo halis ah,
- xagga difaaca qofka naftiisa, iyo
- for the protection of another person or property.

Garashada caadiga iyo waayaha ayaa doona marka la adeegsado xoog loo baahan yahay. Waa la mamnuucay in xoogga jirka, hab kasta, loo adeegsado

ujeedada dishibiliinka ardayga ama in loo adeegsado ciqaab ahaan.

44. Siyaasadda Takoor La'aanta iyo Mamnuuca Kadeedka Jinsiga

CPS waxay xil iska saartay dayactirka jawiga waxbarashada iyo goobta shaqada halkaaso oo xanta iyo isu dul qaadasho la'aanta, kana mid ah takoorka ku saleysan isirka, midabka, asal qaran, jinsiyadda, abtirsiinada, diinta, da'da, itaal darrida, macluumaadka geneetikada, xaaladda ciidaanka, xaaladda guurka, jinsiga, jaadka qofka, aqoonsiga jaadka qofka ama soo jeedinta, rabitaanka jinsiga, xaamilonimada, ama xaaladda la xariirto xaamilonimada looma dul qaadan doono iyo waa meel aan la ogoleyn qaab kasta cabis gelinta, handadaadda, jujuubka, iyo/ama kadeedka aflagaado u geysta sharafta dadka kale iyo faragelisa xoriyadooda in ay wax bartaan ama shaqeyaan.

CPS waxay si adag u hirgeliyaan mamnuuca ka soo horjeedo kadeedka iyo takoorka, ha ahaado jinsiga ama si kale, ee ardaydeeda ama shaqaalaha, kana mid ah arday kale, macalin, kormeere, shaqaale, iibiye, ama dhinac saddaxaad, bacdamaa dabeecadda noocaas ka soo horjeedo ujeedada CPS iyo xilka ay iska saartay sinaanta fursadda xagga waxbarashada iyo shaqada.

Takoorka iyo kadeedka waxay ka kooban yahiin dhaqan aan la soo dhaweynin, ha ahaato mid afka laga sheego ama jirka, oo ku saleysan siffo sharciga badbaadiyo, sida isirka, midabka, asal qaran, jinsiyadda, abtirsiino, diin, da', itaal darri, macluumaadka geneetikada, xaaladda ciidanka, xaaladda guurka, jinsiga, jaadka qofka, aqoonsiga jaadka qofka ama soo jeedinta, rabitaanka jinsiga, xaamilonimada, ama xaaladda la xariirto xaamilonimada. "Kadeedka Jinsiga" waxaa lagu sifeyaa dabeecadda aan soo dhaweynta lahayn, nooca jinsiga. Waxaa ka mid ah ku dhawaashada jinsiga, codsiyada jinsiga, dabeecadda afka ama aan afka laga soo jeedinin ama jirka laga soo jeediyo marka:

- Ogolaashada ama diidmada soo jeedinta noocaas, codsiyada, ama dhaqanka loo sameeyo toos ama si dadban, sida qodob ama shardi lagu xero shaqada, heerka aqoonta, fursadaha la xariira dugsiga ama aasaas looga dhigo go'aanada shaqada.
- Soo jeedinta, codsiyada, ama dhaqan waxay ujeedadooda tahay ama waxaa ka dhasha in si aan macquul ahayn loo farageliyo aqoonta qofka ama shaqado uu qabto qofka taasi oo abuurta jawi ku dhisan handadaad, colaad, yasniin, ama jinsi ahaan shaqo ku dhisan gaf ama jawiga waxbarashada.

Kadeedka jinsiga kana mid ah falalka dagaalka jinsiga, sida balse ku ekeen falalka jinsiga jirka ee loo geysto qofka kana soo horjeedo rabitaanka qofka ama marka qofka uusan awood u lahayn in uu bixiyo ogolaasho taasoo ugu wacan isticmaalka dhibanaha ka sameeyo mukhadaraadka ama qamrada, ama uusan awoodin in uu bixiyo ogolaasho taasoo ugu wacan itaal darrida garashada ama itaal darri kale. Waxaa jir dhowr falal kala duwan oo soo gala qeybta dagaalka jinsiga, kana mid ah kufsiga, weerarka jinsiga, garaaca jinsiga iyo jujuubka jinsiga. Dhamaan falalka noocaas ee la xariira dagaalka jinsiga waa qaabab la xariira kadeedka jinsiga ee lagu soo qaado Cutubka IX.

CPS uma dul qaadan doonto kadeedka ama dhaqanka takoorka oo saameya shaqada ama xaaladaha waxbarashada, oo si aan macquul ahayn u faragelisa dugsiga qofka ama sida uu u shaqeeyo, ama abuurta jawi cabsi gelin, cadaawad, ama gafafka ka dhaco shaqada ama dugsiga. Sharciga wuxuu mamnuucay takoorka iyo/ama kadeedka shaqaalaha ama ardayga ee ka dhaca dugsiyada ama goobta shaqada mana u dul qaadan doonto CPS. Siyaasaddaan, erayada "goobta shaqada" ama "dugsi" waxaa ka mid ah munaasabadaha bulshada dugsiga-kafaalo qaaday, safarada gaaban, munaasabadaha isboortiga, safarada la xariira shaqada ama munaasabadaha la midka ah ee la xariira dugsiga ama shaqada, kana mid ah, iyadoo aan la soo koobin, hawlaha dheeraadka ku ah manhajka iyo atleetikada iyo brograamyada, safarka lagu tago loogana soo noqdo dugsiga ama safarka dibadda uu dugsiga kafaalo qaaday. Intaas kaddib, aar gudasho kasta oo ka soo horjeedo qofka ka soo ashtakooday takoorka, kadeedka ama aar gudashada; ama aar gudasho kasta oo ka soo horjeedo qofka la shaqeyay baaritaanka takoorka, kadeedka ama aar gudaahsada sidoo kale waa sharci darro mana loo dul qaadan doono.

CPS waxay eedeynta takoorka iyo kadeedka u qaadata si culus, waxayna dhakhso ka jawaabi doontaa ashtakooyinka. Marka go'aan lagu gaaro in la geystay dhaqan aan habbooneyn, CPS waxay wax ka qaban doonaan dhakhso si loo cirib tiro dhaqanka iyo waxay dul saari doonaan talaabo sixid hadba sida loogu baahdoi, sida talaabada dishibiliinka meesha ay ku

habboon tahay, oo laga yaabo in ay ka mid yahiin ka-joojinta shaqada ama dishibiliinka la xariira dugsiga.

Ardayga wuxuu macalinka aradayga, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga ama madaxa ardayda, Agaasimaha Horumarinta Kala Duwanaanta (Director of Diversity Development) ama Ku-Xigeenka Maamulaha Tababarka iyo Barashada (Deputy Superintendent of Teaching and Learning) kala hadli karaa ashtakooyinka la xariira dhaqanka takoorka aan rasmiga ahayn. Shaqaalaha wuxuu ashtakooyin u soo jeedin karaa kormeeraha, Agaasimaha Horumarinta Kala Duwanaanta (Director of Diversity Development) ama Agaasimaha Fullinta Xafiiska Ilaha Aadanaha (Executive Director of the Office of Human Resources). Xafiisyada Agaasimaha Horumarinta Kala Duwanaanta (Director of Diversity Development) iyo Ku Xigeenka Maamulaha Barista iyo Waxbarashada (Deputy Superintendent of Teaching and Learning) waxay ku yaalaan 159 Thorndike Street, Cambridge, Massachusetts. Nambarka telefoonka Agaasimaha Horumarinta Kala Duwanaanta (Director of Diversity Development) waa 617-349-6457, nambarka telefoonka Ilaha Aadanaha (Human Resources) waa 617-349-6438 iyo nambarka telefoonka Ku-Xigeenka Maamulaha Tababarka iyo Barashada (Deputy Superintendent of Teaching and Learning) waa 617-349-6418. Agaasimaha Horumarinta Kala Duwanaanta (Director of Diversity Development) wuxuu kaloo ka shaqeyaa ashtakooyinka rasmiga ee ku saabsan dhaqanka takoorka la soo sheegay.

Mararka qaar, dabeecadda laga soo ashtakooday waxay ahaan kartaa kadeedka jinsiga sida hoos timaado Cutubka IX iyo hawsha dambiga. Haddii aad aaminsan tahay in dhaqanka uu yahay dambi, waxaad xaq u leedahay in aad waqti kasta soo gudbisid ashtako la xariirta dambiga inta ay socoto baaritaanka dugsiga ku wado ashtakadaada.

Koobi dhamaystiran oo ku saabsan siyaasadda takoor la'aanta dugsiga dagmada iyo mamnuuca ka soo horjeedo kadeedka jinsiga waxaa laga heli karaa bogga internetka dugsiga dagmada ama waxaad koobi ka codsan kartaa agaasimaha dugsiga/madaxa qeybta sare dugsiga.

45. Guurka Ardayga, Xaamilonimada iyo Waalidnimada

Ardayda xaamilada ah, waalidiinta ama kuwa guursaday waxaa lagu dhiirigelinaa in ay sii wadaan dugsiga. Ardayda noocaas waxaa loo ogol yahay in ay ku jiraan fasaladooda waxbarashada caadiga iyo ardayda kale kala qeybgalaan hawlaha ka baxsan manhajka. Intaas kaddib, ardayda xaamilada ah, kaddib marka ay dhalaan, waxaa loo ogol yahay in ay ku soo noqdaan fasaladooda waxbarashada iyo hawlaha dheeraadka ku ah manhajka sida ka hor inta aysan dhallin. Ma jirto ardayad xaamilo ah, waalid ama guursaday oo loo diidi karo tababarka fasalka ama hawlaha ka baxsan manhajka, ama laga joojin doono, la saari doono, laga reebi doono ama haddii kale la saari doono dishibiliin taasoo ugu wacan guur, xaamilonimo ama waalidnimo.

46. Iskuduwaha Cutubka IX

CPS ma samayso takoor ku saleysan jinsiga xagga brograamyadeeda waxbarashada ama hawlaha ay ku shaqeyso mana samayso takoor ku saleysan jinsiga xagga gelitaanka ama shaqada brograamyadeeda waxbarashada ama hawlaha. Dhaawac kasta oo ku saabsan dhaqan gelinta Cutubka IX waa in loo jeediyo Iskuduwaha Cutubka IX ee dugsiga dagmada: Director of Diversity Development, Cambridge Public Schools, 159 Thorndike Street, Cambridge, MA 02141, 617-349-6457 ama ku socoto United States Department of Education, Office of Civil Rights, 5 Post Office Square, 8th Floor, Boston, MA 02109 Phone: 617-289-0111; Faks: 617-289-0150.

47. Xorriyadda Diinta

Sharciyada Guud ee Massachusetts (Massachusetts General Laws) cutubka 151C, qeybta 2B, waxaa ku qoran:

> Arday kasta oo jira hay'ad waxbarasho ama qaata tababarka farsamda, marka laga reebo hay'adaha diinta ama madaahibta waxbarashada ama hay'adda tababarka farsamada, aan awoodin, taasoo ugu wacan caqiidooyinka diintiisa, in uu tago fasalo ama ka qeybgalo imtixaan, daraasad, ama shaqada loo baahan yahay maalin gaar ah, waa laga fasixi doonaa imtixaanka noocaas ama daraasad ama baahida shaqada, waxaana la siin

doonaa fursad in uu gadaal ka sameeyo imtixaanka noocaas, daraasadda, ama shaqada looga baahan yahay uu isaga/iyada laga yaabaa in ay gaftay taasoo ugu wacan maqnaashada maalin gaar ah; hase ahatee, imtixaankaas ama shaqada gadaal laga sameeyo waa ina aysan culeys macquul ahayn ku abuurin dugsiga noocaas. Lama ogola in hay'adda soo dallacdo khidmado nooc kasta bacdamaa ay ardayga siisay fursadda noocaas. Lama ogola in ardayga loo geysto waxyeelo darran ama ka soo horjeeda maxaa yeelay ardayga ayaa diyaar u ah in uu la shaqeeyo qodobada qeybtaan.

Ardayda ka baaqata dugsiga maxaa yeelay waxay dhowraan fasaxa diinta waa in loo geliyo diiwaanka in loo fasaxay maqnaashada. Marka labaad, macalimiinta waxaa la weydiiyaa in ay ka haraan in ay ballamiyaan imtixanaadka muhiimka ah, hawlaha isu yimaada, warqadaha waaweyn ama warbixinada maalmahaas. Ugu dambayn, macalimiinta waa in ay ardaydooda siiyaan waqti macquul ah marka ay ku soo noqdaan fasalkooda si ay gadaal uga samayaan shaqada loo dhiibo maalmahaan.

48. Tilmaamaha Xilka Leyska Saaro u Hoggaansamida

Sharciyada Guud ee Massachusetts: Cutubka 71, Qeybta 69 wuxuu rabaa in:

> Bilowga fasalka kowaad, maalin kasta, dhamaan darajooyinka, dhamaan dugsiyada dadweynaha, macalimiinta waxay koox ahaan hoggaamin doonaan fasalka in ay koox ahaan akhriyaan "Xilka in ay Daacad u Yahiin Calanka" ("Pledge of Allegiance to the Flag").

Waxaa dhici karto in ardayga aan laga dalbanin in uu ka qeyb qaato ballanka u hoggaansamida Waxaa la filaayaa in arday kasta aan rabin in uu ka qeybqaato ballanka wuxuu xushmeyn doonaa xaqa ay leeyahiin dadka kale ee doonaaya in ay sidaas sameyaan iyagoo aan carqaladeynin ama rabsheynin.

SIYAASADAHA GUUD IYO TILMAAMAHA MAAMULKA

49. Siyaasadda Isticmaalka La Ogolaan Karo ee Shabakada Kombuyutarka

(Acceptable Use Policy for Computer Network) (AUP)

Waa siyaasadda u dagsan CPS in dhamaan farsamada loo adeegsado isgaarsiinta elataroonigga, kana mid ah iyadoo aan la soo koobin, farsamada loo adeegsado in lagu galo shabakada CPS iyo in lagu galo Internetka iyo qalabka elataroonigga la siiyo shaqaalaha iyo/ama ardayda ay CPS siiso (sida kombuyutarada, telefoonada, imw) waxaa loo isticmaali doonaa si mas'uul ah, sharciga waafqasan iyo asluubta.

Shabakada kombuyutarka CPS iyo qalabka elataroonigga waxaa la samayay ujeedo kooban xagga waxbarashada, mana loo samaynin sida adeeg ay heli karaan dadweynaha ama sida gole ka dhexeeyo dadweynaha. CPS waxay xaq u leedahay in ay xannibaad ku soo rogto isticmaalka siistemka kombuyutarka iyo dhamaan qalabka elataroonigga ay soo saarto, iyo in ay dadka isticmaala ka dalbadaan in ay u hoggaansamaan sharciyada siistemka iyo siyaasadaha Guddiga Dugsiga, sida balse kuma eka, Siyaasadda Takoor La'aanta CPS iyo Mamnuuca ka soo Horjeedo Kadeedka Jinsiga iyo Siyaasadda ka soo Horjeedo Gardareysiga (CPS' Non-Discrimination Policy and Prohibition Against Sexual Harassment and Anti-Bulling Policy) iyo in la badbaadiyo qarsoodiga macluumaadka diiwaanka ardayga iyo macluumaadka diwaanka qofka.

Inkastoo ay ilo badan oo qiimo leh ka jiraan Internetka, waxaa kaloo jiraa goobo badan oo lagu tilmaami karo in aysan ku habbooneyn ardayda oo aan lahayn qiimo waxbarasho. Dhamaan dadka isticmaala Internetka waa in ay si mas'uul ah u isticmaalaan shabakada kombuyutarka si loo hubiyo in loo adeegsado ujeedooyinka waxbarashada, iyo waa in ay waafaqsan yahiin hawlaha aqoonta CPS, waxayna hoos imaan doonaan kormeerka shaqaalaha CPU. Marka la isticmaalo ilaha macluumaadka shabakada CPS, kuwa isticmaala sida ardayga iyo qaangaarka waxay raali ka yahiin siyaasaddaan. Waa mamnuuc in ilaha macluumaadka shabakada CPS loo isticmaalo hawlo sharci darro ama hawlaha tijaarada.

CPS waxay adeegsataa siistemka filtarka oo loogu talogalay in laga hortago goobaha, waxbarasho ahaan,

aan habbooneyn, sida kuwa laga helo waxyaabo fadeexo ah, qaawanaan ama u darran ilamaha. Hase ahatee, waxaa muhiim ah in la fahmo in uusan jirin xal kaamil ah iyo in CPS uusan ka ballan qaadi karin in ardayda aysan gelin in ardayda aysan gelin goob aan habbooneyn. Ardayga ayaa mas'uul ka ah in uu macalin u soo sheego goobta aan habbooneyn iyo in uu ku soo noqdo mowduuca waxbarashada loo xil saaray.

Macalimiinta, maamuleyaasha iyo shaqaalaha kale dugsiga ee isticmaala Internetka taasoo qeyb ka ah tababaradooda waxay wici karaan Macluumaadka CPS, Siistemyada Farsamada iyo Isgaarsiinta (Communication and Technology Systems (ICTS) si ay u codsadaan in bogga lagu sameeyo blog ama la furo. Go'aanada noocaas waxaa gaari doono kuwa mas'uulka ka ah in ay kormeeraah siistemka filtarka CPS, iyaga oo la tashta shaqaalaha dugsiga ee ku habboon.

Isticmaalka kombuyutarada CPS, shabakada kombuyutarka, sida helitaanka Internetka iyo email, iyo qalabka kale sida elataroonigga (sida telefoonada gacanta iyo/ama PDA_yada) waa AXSAAN la samayay ee ma aha xaq loo leeyahay. ***Waxaa muhiim u ah dhamaan shaqaalaha CPS, ardayda iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha ardayda in ay fahmaan in diidmada in la saxiixo Aqoonsiga Helitaanka Siyaasadda Isticmaalka la Ogolaan karo (Acknowledgement of Receipt of the Acceptable Use Policy) iyo/ama jebin kasta oo loo geysto Siyaasadda Isticmaalka la Ogolaan karo ee Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay dhallin kartaa in la lumiyo kombuyutarka, Internetka, shabakada kombuyutarka, qalabka elataroonigga kale iyo/ama axsaanka email, iyo/ama falka talaabada dishibiliinka, iyo/ama la mariyo dacwadda sharciga gobolka iyo federaalka.***

CPS waxba ma ballan qaado, haddii ay tahay toos ama mid dadban, xagga adeegyada ay bixiso. CPS mas'uul kama aha burburka aad kala kullantid sida, balse kuma eka, xogta lunta, faragelinta adeegga, daahidda, geyn la'aanta, ama geynta laga baaqday, sabab kasta ha ka dambayso. CPS mas'uul kama aha sax ahaanta ama tayada macluumaadka laga helo ama ku keydsan shabakada, iyo isticmaalka macluumaadka noocaas waa khatar oo qofka u gaar ah. CPS mas'uul kama noqon doonto waajibaadka maaliyadda ee ka dhasha isticmaalka internetka.

Waa siyaasadda Guddiga Dugsiga Cambridge (Cambridge School Committee) iyo CPS in dhamaan gudbinta isgaarsiinta elataroonigga iyo keydinta dhamaan macluumaadka waxay hoos yimaadaan Siyaasaddaan Isticmaalka la Ogolaan Karo (Acceptable Use Policy), hadba sida loogu dabaqi karo. Dhamaan macluumaadka elataroonigga uu soo gudbiyay, laga helay ama lagu keydiyay waa hantida CPS iyo/ama Guddiga Dugsiga Cambridge, hadba sida loogu dabaqi karo, waxaana lagu qaadi karaa, si aan kala sooc lahayn, kormeer aan la tuhmi karin, keydinta iyo la soo bixidda. Waxaa muhiim u ah dhamaan shaqaalaha CPS, ardayda iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha ardayda in ay fahmaan in aysan jirin wax macquul ah oo la fisho xagga asturnaanta la xariirto isticmaalka shabakada kombuyutarka CPS, kana mid ah gelitaanka Internetka iyo email iyo in aysan jirin filasho macquual oo ku saabsan asturnaanta xagga nuxurka isgaarsiinta elataroonigga loo gudbiyay ama laga soo qaaday shabakada kombuyutarka CPS, kana mid ah gelitaanka Internetka iyo email iyadoo aan la fiirinin cidda iska leh qalabka isgaarsiinta elataroonigga ee la isticmaalay. CPS iyo Guddiga Dugsiga Cambridge waxay la socon karaan waana samayn karaan sidaas iyo waxay baari karaan isticmaalka faylada emailka, kombuyutarada, keydka (hard drives) iyo faylada isgaarsiinta elataroonigga kale, siistemyada, qalabka iyo brograamyada lagu shaqeeyo (platforms) iyadoo aan la fiirinin haddii laga galo dugsiga, shaqada ama meel fof haddii ay toos ula xariiraan shabakada (server) u gaarka ah dugsiga dagmada

Dadka mas'uuliyad iska saara isticmaalka shabakada ma isticmaali doonaan shabakada kombuyutarka CPS, kana mid ah, iyadoo aan la soo koobin, gelitaanka internetka iyo email:

(a) xagga ujeedooyinka ganacsiga, nooc kasta

(b) xagga hiilinta siyaasadda, in kastoo dadka isticmaal isticmaali karaan siistemka si ay ula xariiraan wakiilada iyo si ay u soo jeediyaan fikradooda ku saabsan arrimaha bulshada

(c) xagga hawlaha sharci darrada

(d) xagga soo dhajinta, kashifaadda ama si kale wareejinta macluumaadka qofka lagala xariiro kuna saabsan iyaga ama dadka kale, sida magaca, cinwaanka, telefoonka, dugsiga ama cinwaanka shaqada, iyadoo aan fasax hore laga helin maamulaha dugsiga, iyo horay

ruqsad laga helin qofka la rabo in la soo dhajiyo macluumaadka.

(e) xagga dhajinta, kashifaadda ama haddii kale faafinta macluumaadka diiwaanka ardayga iyadoo aan horay ruqsad laga helin maamulaha dugsiga, iyo horay ruqsad laga helin waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka ardayga haddii kashifaadda noocaas ama faafinta noocaas asan ogoleyn sharciyada diiwaanka ardayga Massachusetts.

(f) xagga dhajinta ama haddii kale faafinta fariin si gaar ah loogu soo diray iyagoo aan ruqsad ka helin qofka soo diray fariinta. Qodobkaan kama reebo qofka isticmaala in uu dhakhso u kashifo macalinka ama maamulaha dugsiga fariin kasta uu helo oo aan habbooneyn ama iyaga ku abuurta ammaan darro

(g) si loo handado, la liido, la gardareysto, la kadeedo, la cabsi geliyo ama macluumaad ku dhisan gaf loo diro qof kale ama la soo geliyo qof kale

(h) dhajinta warqadaha silsiladda, ka qeybgalka spam ama ka qeybgalka qaab kale aan habbooneyn lana xariira isgaarsiinta lagu diro shabakada kombuyutarka

(i) dhajinta, kashifaadda ama sida kale faafinta macluumaadka diiwaanka qofka iyadoo aan ruqsad horay looga qaadanin maamulaha dugsiga haddii kashifaadda noocaas ama faafinta noocaas uusan ogoleyn sharciga federaalka ama gobolka

(j) xagga fiirinta, milkiyadda, dhajinta, kashifaadda, dirists, qeybsiga ama sida kale faafinta sawiro dijitaal oo ku saabsan jinsiga, fariimaha qoraalka, emailada ama qoraalo kale oo la xariira jinsiga kuna jira kombuyutar kasta, telefoonka gacanta, ama qalab kasta oo elataroonig ah iyadoo aan la fiirinin haddii la jebiyay sharciga qaawanaanta federaalka ama gobolka ee cunugga.

(k) xagga hawlaha carqaladeeyo jawiga waxbarashada

(l) xagga hawlaha aadaabta darran, sida khayaanada hawsha loo diro ardayga ama imtixanaadka

(m) xagga hawlaha soo farageliya asturnaanta dadka kale

(n) xagga isticmaalka shakhsiga; marka lagu sheego erayo kale, shabakada Dugsiyada Dadweynaha Cambridge iyo qalabka elataroonigga waa in loo isticmaalo oo keliya ganacsiga iyo/ama ujeedooyinka dugsiga

(o) si looga qeybgalo dhaqan kale oo jebiya siyaasadda Dugsiyada Dadweynaha Cambridge iyo/ama qodobada Dugsiyada Dadweynaha Cambridge *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda* ama sharciyada si kasta ku saleysan dugsiga.

(p) in aan la isticmaalin ama loo ogolaanin ardayda in ay la xariiraan bogagga internetka ee codsada in la geliyo macluumaadka lagu aqoonsan karo qofka ama ardayga (sida magaca, cinwaanka, nambarka telefoonka, emailka, iwm.) haddii isticmaalka bogga internetke noocaas aysan soo ogolaanin ICTS

(q) la jebiyo qodobada M.G.L.c. 71, §37O, kana mid ah qodobada la xariira gardareysiga, gardareysiga internetka iyo aar gudashada.

Kuwa mas'uuliyad iska saara isticmaalka shabakada:

(a) marna ma muujin doonaan macluumaadka shakhsiga ee ku saabsan isticmaale kasta, sida cinwaanka, nambarka telefoonka, nambarka kaarka deynta, nambarka soshal sekuritiga, ilaa toos laga siiyo ruqsad qoran; iyo isticmaaleyaasha ardayda marna raali kuma noqon doonaan in ay la kulmaan qof ay ku kulmaan internetka iyaga aan haysanin ogolaashada waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka

(b) waxay ogeysiin doonaan maamulaha siistemka dhibatooyinka sekuritiga ay ka aqoonsadaan shabakada kombuyutarka

(c) waxay mas'uul ka noqon doonaan isticmaalka qalabkooda elataroonigga iyo xisaabta mar kasta iyo marna ma faafin doonaan mana siin doonaan qof kale erayga lagu galo qalabka ama xisaabta u furan.

(d) aqoonsan doonaan in aysan jirin asturnaanta waxyaabaha ku qoran emailka, faylada xogta ama shakhsiga ku jira qalab kasta oo elataroonig ah iyo/ama shabakada, iyo in dhamaan qalabka elataroonigga iyo siistemka hoos yimaadaan keydinta, dayactirka caadiga, gelitaanka iyo kormeerka fariimaha iyo faylada la heli karo daruufaha ku habboon.

(e) isla markiiba u kashifi doonaan macalinka ama maamulaha dugsiga bog kasta ay meel ku ogaadaan ama helaan kuna habbooneyn ama ku dhalliya dareenka ammaan darrada

(f) iskuma dayi doonaan in ay si sharci darro ah u galaan shabakada kombuyutarka CPS ama shabakad kale kombuyutar ama ka badsadaan gelitaanka loo

ogol, iskudayiaan in ay carqaladeyaan shabakada kombuyutarka ama burburiyaan xogta iyaga oo faafiya firusyada kombuyutarka ama hab kale, ama burburiyaan, farageliyaan, baurburiyaan ama farageliyaan shabakada kombuyutarka, brograamyada, xogta, faylada ama macluumaadka kale elataroonigga ama qalabka.

(g) sharfaan xuquuqda sharciga soo saareyaasha brograamyada, bixiyeyaasha shabakada, heshiisyada xuquuqda koobiga (copyright) iyo shattiga

(h) in aysan isticmaalin siistemka si ay u helaan qoraalo fool xun ama fadeexo (macnaha, qaawanaanta), oo u dooda falal sharci darro ah, u dooda dagaal ama takoor loo geysto dadka kale (macnaha hiddaha naceebka), ama ah sharci darro (macnaha qamaarka)

(i) u hoggaansamaan siyaasadaha Guddiga Dugsiga Cambridge (Cambridge School Committee) iyo CPS, sida, xad la'aan, Siyaasadda Takoor La'aanta (Non-Discrimination Policy) iyo Mamnuuca Ka Soo Horjeedo Kadeedka Jinsiga (Prohibition Against Sexual Harassment), Siyaasadda Dambiga U Dul Qaadasho La'aanta Naceebka (Non-Tolerance of Hate Crimes Policy) iyo Siyaasadda Ka Soo Horjeedo Gardareysiga (Anti-Bullying Policy) taasoo la xariirto isticmaalka shabakada kombuyutarka, siistemka kombuyutarka iyo email

(j) isticmaalka isla heerka daryeelka, go'aanka iyo aqoonta si loogu xariiro shabakada kombuyutarka, siistemka kombuyutarka iyo email sida ay u samayn lahayeen isgaarsiinta kale ee qoran ee waaxda dugsiga, sida xad la'aanta kuwa ku sugan waaxda dugsiga ama magaca warqadda dugsiga.

(k) warbixin ka soo gudbiyaan dhacdooyinka ama soo gaara hanjabaadda, sharaf darrada, gardareysiga, gardareysiga internetka, aar gudashada, kadeedka, cabsi gelinta ama isgaarsiinta gafafka (ha ahaado email, fariinta qoran, goobta shabakada bulshada ama si kale) sida waafaqsan qodobada Siyaasadda Takoor La'aanta CPS iyo Mamnuuca Ka Soo Horjeedo Kadeedka Jinsiga iyo Siyaasadda Ka Soo Horjeedo Gardareysiga

(l) marka la soo geliyo qoraal la xariira koorsada waxbarashada masaafada, la hubiyo in qoraalka la soo geliyay ay heli karaan ardayda rasmi ahaan ku qoran koorsada loo soo diray, haddii diristaas macluumaadka dijitalka tahay koorsada waxbarashada masaafada ama kabid ku ah koorso nool; la hubiyo in la hirgeliyo talaabooyin macquul ah si looga hortago ku celinta hawsha muddo ka dheer kullanka fasalka loogana hortago faafin aan la fasixin qoraalka (macnaha isticmaalka erayada lagu galo, xaqiijinta isticmaalaha iyo goobta taasoo loo adeegsado hubinta brotokolka internetka, dhicidda waqtiga, ka joojinta daabacaadda, iyo ka joojinta goynta iyo ku dhajinta), ardayda la siiyo ogeysiis cad in shaqada lagu badbaadiyo xuquuqda koobiga (copyright) lana soo geliyo qoraal waafaqsan sharciga, la helay kana tirsan hawl waxbarasho nidaamsan oo loo samayay fasalka iyo hoos timaada kantaroolka ama kormeerka tababaraha, loo isticmaalo hab la mid ah hawlaha ama muujinta fasal nool iyo qiyaasta qoraalka loo adeegsado waa in la barbar dhigi karo qiyaasta loo adeegsado fasalka nool lana soo gelinin hawlaha waxbarashada dijitalka.

(m) la hubiyo in ardayda loo tababaro dabeecadda internetka, sida la dhexgalo dadka u sugan goobaha shabakada bulshada, qolalaka lagu sheekeysto, iyo la ogaado gardareysiga internetka iyo jawaabta.

Dishibiliinka

Jebinta siyaasaddaan waxay dhallin kartaa burburinta axsaanka shabakada iyo/ama talaabo dishibiliin ku habboon sida waafaqsan sharciyada CPS, iyo talaabo sharci, haddii ay ku habboon tahay.

Isticmaale kasta oo loo aqoonsado in uu halis ku yahay ama leeyahay taariikh dhibaatooyin lagala kulmo siistemyada kombuyutaro kale, waxaa dhici karto in loo diido in uu galo shabakada, hadba sida waaxda dugsiga u garato.

Waaxda dugsiga waxay si buuxdo ula shaqeyn doontaa saraakiisha deegaanka gobolka ama federaalka xagga baaritaan kasta oo la xariira hawlaha sharci darrada laga fulliyo shabakada.

50. Xeerka Asluubta Brograamyada Kombuyutarka

In brograamka kombuyutarka laga samaysto koobiga xuquuqda waxay jebisaa sharciga iyo waxay ka soo horjeedaa heerarka dhaqanka CPS. CPS ma ogolaa koobiga laga sameeyo iyo waxay aqoonsan tahay mabaadiida soo socda sida aasaas looga hortago in aysan dhicin:

- CPS kama qeybgeli doonto mana u dulqaadan doonto in ay samayso ama isticmaasho koobiyada brograamka aan la fasaxin, daruufo kasta ha jiraan.
- CPS waxay bixin doontaa brograamyo waafaqsan sharciga si loola kulmo baahida loo qabo brograamyada sharciyeysan, waqti ku habboon iyo qiyaas ku filan xagga dhamaan kombuyutarada u baahan brograamka.
- CPS waxay u hoggaansami doontaa dhamaan qodobada shattiga ama qodobada iibka ee sharci u sameyay isticmaalka brograamka CPS qaadato ama isticmaasho.
- CPS waxay gudaha hirgelin doontaa kantarool looga hortago samaynta ama isticmaalka koobiyada brograamyada aan la fasaxin, kana mid ah talaabooyin shaqeeya si loo xaqiijiyo in loo hoggaansamo heerarkaan iyo talaabooyinka dishibiliinka ku habboon lana xariira jebinta heerarkaan.

51. Dadka soo Booqda Dugsiga

Si loo adkeeyo ammaanka iyo sekuritiga, dhamaan dadka soo booqda waxaa laga filaa in ay u soo sheegaan xafiiska weyn dugsiga ka hor inta aysan tagin meel kale gudaha dugsiga. Haddii qofka soo boqda farageliyo shaqada ardayda, macalimiinta ama shaqaalaha kale una dhaqmaan si aan habbooneyn ama ku adeysto booqashada waqtiyo aan habbooneyn, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxay soo koobi karaan awoodda qofka u leeyahay in uu soo booqdo dugsiga, kana mid ah balse ku ekeen, qabashada ballamada loo baahan yahay in la sameeyo ka hor inta aan la soo booqanin, la socdaan shaqaalaha dugsiga marka lagu jiro gudaha dhismaha, ama laga reebo in uu soo galo dhismaha. Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan siyaasadda dugsiga ee ku saabsan dadka soo booqda, la hadal agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga.

52. Lama Ogola Baabuurta Meelaha Looga Tago

Sharciga Guud ee Massachusetts (Massachusetts General Law) cutubka 71, qeybta 37H wuxuu dhamaan wadeyaasha basaska dugsiga iyo wadeyaasha baabuurta qofka leeyahay in ay baabuurta ku dhaafaan xerada dugsiga ama meel boqol (100) cag u jirta xerada dugsiga.

53. Lokarada Ardayga

Dugsiyo badan oo ka tirsan CPS, gaar ahaan kuwa cusub, waxay qabaan lokaro loo sameyay ardayda. Lokarada waa axsaan laguu sameyay. Ardayda la siiyo lokaro waa in ay u hoggaansamaan sharuudaha soo socdo:

Waa in lagu dadaalo in la sugo ammaanka lokarada lana asturo waxyaabaha ku jiro.

Ardayda waa in aysan wadaagin lokarada haddii qofka mas'uulka ka ah uusan sidaas ogolaanin.

Looma dul qaadan doono in wax lagu qoro darbiyada ama in aan la nadiifinin lana hagaajinin lokarada.

Lokarada waxaa loo sameyay labbiska ardayga iyo waxyaabaha wax lagu barto sida buugaagta, xasuus qorka, mashaariicda, saadka, qadada, iwm.

Ardayda waa in ay u hoggaansamaan sharciyada u dagsan sharciyada lokarka dugsiga, sida waqtiyada la geli karo, iwm.

Ardayda waa in ay lokarada ka qaataan waxa ay u baahan yahiin marka la gaaro dhamaadka sannad dugsiyeedka. Haddii loo baahan yahay in shay muhiim ah laga qaato lokarka, saacadaha dugsiga kaddib, waxaa loo baahan yahay in ruqsad laga qaato maamulaha.

Bacdamaa lokarada ka tirsan yahiin hantida waaxda dugsiga, dugsiyada waxay xaq u leeyahiin in ay baaraan lokarada haddii ay jirto sabab lagu aamino in lokarka la geliyay alaab suuqa madow, ama haddii ay jirto khatar in dhibaato ka soo gaari karto dugsiga ama shaqaalaha dugsiga ama ardayda. Dugsiyada waxay fullin doonaan fattashaadda lokarada lagu dhawaaqo iyo aan lagu dhawaaqin. Fiiri Qeybta 4.0 *Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook)* si aad u heshid macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan siyaasadda lokarka.

CPS kama aha mas'uul hantida lunta inta lagu dhex jiro sannad dugsiyeedka. Sidoo kale CPS kama aha mas'uul marka ay lumaan hantida lagu dhaafo lokarka marka la gaaro dhamaadka maalin dugsiyeedka. Sharciyadaan, xeerarkaan iyo hababka ku saleysan dugsiga waxaa kaloo lagu dabaqaa miisaska ardayda.

54. Macluumaadka Diiwaanka Gafaha Dambiga

CPS waxay ardaydeeda u raadisaa jawi ammaan ah oo ku habboon waxbarashada iyo waxay shaqaalaheeda u raadisaa jawi ammaan ah oo ku habboon shaqada. Sidaas darteed, waa siyaasadda CPS, sida waafaqsan qodobada M.G.L.c. 71, §38R, sida uu u baddalay Cutubka 385 ee Sharciyada (Acts) 2002 iyo M.G.L.c. 6, §172I, in la fulliyo hubinta nolosha dambiyada ("hubinta CORI") waqti ka waqti iyo ugu yaraan saddax (3) sanno kasta lagu sameeyo shaqaalaha iminka jira iyo kuwa la filaayo, bixiyeyaasha adeegga lala galay heshiis, kuwa ku shaqeeyo iskaa wax u qabso iyo bixiyeyaasha gaadiidka dugsiga sida shaqaalaha shirkadda taxiga Hubinta CORI waxaa lagu fullin doonaa shaqaalaha iminka jira iyo midka soo socdo iyo bixiyeyaasha adeegga ka hor inta aan la shaqaaleyn iyo/ama heshiis lala gelin iyo qofka ku shaqeeyo iskaa wax u qabso ka hor inta aan qofka loo qaadanin in uu yahay qof iskaa wax u qabso ku shaqeeyo ka hor inta aysan ogolaanin qofka sida qof ku shaqeeyo iskaa wax u qabso.

Intaas kaddib, sida waafaqsan sharciga gobolka, dhamaan shaqaalaha waxaa laga hubiyaa diiwaanka taariikhda dambiga gobolka iyo qaranka taasoo ku saleysan faraha laga qaado.

55. Safarada Dibadda

Guddiga Dugsiga Cambridge (Cambridge School Committee) wuxuu aqoonsan yahay in waayaha qofka toos ula kulmo ee laga helo safarada dibadda iyo safarada dugsiga kafaalo qaado in ay yahiin siyaabaha ugu waxqabadka badan iyo habka barashada qiimaha badan; sidaas darteed, Guddiga Dugsiga Cambridge (Cambridge School Committee) waxay dhiiri gelisaa safarada dibadda iyo safarada dugsiga kafaalo qaado in ay leeyahiin qiimo waxbarasho oo la xariira brograamka guud ee dugsiga iyo manhajka. Intaas kaddib, qiimaha waxbarashada safarada dibadda kaddib iyo safarada dugsiga kafaalo qaado awgeeed, in dhamaan ardayda awood u yeeshaan in ay ka qeybgalaan iyo in ay ka siman yahiin safarada dibadda iyo safarada dugsiga kafaalo qaado.

Sida waafaqsan ujeedadaan, Maamulaha Dugsiyada wuxuu soo saaray tilmaamo loo adeegsado safarada dibadda iyo safarada dugsiga-kafaalo qaaday.

Tilmaamahaan waxay ka hadlaan habka loo fulliyo baarista, qiimeynta iyo ogolaashada safarada dibadda iyo safarada dugsiga kafaalo qaaday si loo hubsado in la qaado dhamaan talaabadaha macquulka ah xagga caafimaadka, ammaanka iyo maslaxadda ka-qeybgaleyaasha iyo si loo hubsado in aan la carqaladeyn hawsha waxbarashada iyo qiimaha waxbarashada laga helo safarada dibadda iyo/ama safarka dugsiga kafaalo qaaday. Intaas daddib, tilmaamaha waxaa ku qoran in ardayga aan loo diidi karin in uu ka qeybgalo safarka dibadda ama safarka dugsiga kafaalo qaado sida ciqaab ama nooc ka mid ah ciqaabta ka dambeyso dabeecad la soo dhaafay oo ardayga horay loo mariyaya dishibiliin. Ardayga waxaa laga reebi karaa safarka dibadda ama safarka dugsiga kafaalo qaaday haddii taariikhda ama taariikhyada ka joojinta ama ka saaridda dugsiga, taasoo la xariirto jebinta sharciyada ku saleysan dugsiga ama xeerarka asluubta ee ku qoran Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda (Rights and Responsibilities Handbook) ku beegmo taariikhda la qabtay ama taariikhyada safarka dibadda ama safarka dugsiga kafaalo qaaday, ama haddii, sida agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga, dabeecaddii la soo dhaafay ama midda iminka jirto ee ardayga ay halis la taaban karo ku tahay caafimaadka, ammaanka iyo maslaxadda ardayga, ardayda kale iyo/ama shaqaalaha ka qeybgala safarka dibadda iyo/ama munaasabdda dugsiga kafaalo qaaday. Tilmaamaha waxay kaloo u baahan yahiin in ogolaasho hore oo ku saabsan dhamaan safarada dibadda ama safarada dugsiga kafaalo qaaday laa helo agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga, iyo in waqti hore ogolaasho laga helo Maamulaha iyo/ama qofka loo xi saaray xagga safarada la soo dhaxo habeenkii iyo safarada dibadda gobolka iyo safarada dibadda waddanka. Intaas kaddib, tilmaamaha waxay dajiyaan habab lagu sugo in: (i) dhamaan ardayda ruqsad ka haystaan waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka xagga safarka; (ii) in dhamaan safarada sida habboon loo kormeero, (iii) dhamaan taxadirka ammaanka la ilaaliyo, (iv) dhamaan faylalka ardayga la fiiriyay si ardayga uga qeybgalo una helo sinaan xagga safarka dibadda ama safarka dugsiga kafaalo qaaday, (v) dhamaan safarada wax la taaban karo ku biiriyaan brograamka waxbarashada, (vi) dagmada kormeerto haddii ardayda laga reebo in ay ka qeybgalaan iyo/ama helaan sinaan xagga safarada dibadda iyo/ama safarada dugsiga kafaalo qaaday, iyo haddii ay sidaas jirto, asbaabta ka

dambeyso; iyo (vii) waxaa jira habab ay waalidiinta/ilaaliyeyaasha racfaan ka qaadan karaan go'aanka si ardayga looga reebo ka qeybtalka iyo helitaanka safarka dibadda iyo/ama safarka dugsiga kafaalo qaaday.

Ogolaashada dhamaan safarada dibadda iyo safarada dugsiga kafaalo qaaday waa shay ku xeran shardi. Waxaa dhici karto in ogolaashada safarka dibadda ama safarka dugsiga kafaalo qaaday lala noqdo haddii daruufaha isbaddalaan, ha ahaado mid aadnaha samayay ama mid dabiici ah, waxay dhallin karaan joojinta safarkaan dibadda ama safarka dugsiga kafaalo qaaday taasoo dan u ah ammaanka ardayda iyo shaqaalaha CPS.

CPS iyo Guddiga Dugsiga Cambridge (Cambridge School Committee) kama ahaan doonto mas'uul waajibaadka kharashka maaliyadda la galay, taasoo ka dambayso qorsheynta safarka dibadda ama safarka dugsiga kafaalo qaaday, ama lacagaha aan dib loo soo celin karin ama luma taasoo ugu wacan joojinta safarka dibadda ama safarka dugsiga kafaalo qaaday ama taasoo ugu wacan ardayga laga reebay n uu ka qeybgalo iyo in uu helo safarka dibadda ama safarka dugsiga kafaalo qaaday taasoo ugu wacan marka ardayga laga joojiyo ama laga saaro dugsiga taariikhda ama taariikhyada safarka dibadda ama safarka dugsiga kafaalo qaado.

Dhamaan sharciyada iyo xeerarka loo sameyay xaq u yeelashada ardayga in uu ka qeybgalo safarka la soo jeediyay waa in loo qeybiyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo ardayda waqtiga lagu dhawaaqo safarka dibadda. Waqtiga safarak dibadda horaantii lagu dhawaaqo taasoo aan ka dambeynin ugu yaraan lex todobaad ka hor inta aan la qorsheynin safarka dibadda, shaqaalaha dugsiga ku habboon waa in ay fiiriyaan dhamaan faylalka ardayga si loo ogaado haddii loo baahan yahay jiif ama in isbaddal lagu sameeyo si ardayga uga qeybgalo safarka dibadda la qorsheyay. Haddii loo baahdo, shirka Kooxda waa in la qabto marka hore ee lagu dhawaaqo ama mar u dhaw safarka dibadda kana dambaynin ugu yaraan lex todobaad ka hor inta aan la qorsheynin safarka dibadda si loo fiiriyo loogana hadlo guryaha ama isbaddalada loo baahan yahay si ardayga uga qeybgalo lana xariiro safarka dibadda la qorsheyay.

Ma jiro arday loo diidi doono ka-qeybgalka safarka dibadda ama dugsiga uu kafaalo qaado safarka la fulliyo maalin dugsiyeedka (ma aha safarka la soo dhaxo habeen) maxaa yeelay ma jirto lagu bixiyo khidmadda. Naadi kasta, Koox Cayiman ama koox waxay mas'uul ka yahiin aruurinta dhamaan lacagta loo baahan yahay in lagu maal geliyo safarka dibadda ama safarka dugsiga kafaalo qaado ay soo jeediyaan koox arday. Waa in aan lacag loo aruurinin ama la diyaarinin safarka dibadda ama safarka dugsiga kafaalo qaaday ilaa laga soo ogolaado safarka dibadda ama safarka dugsiga kafaalo qaaday. Taageero maaliyad lagama heli doono CPS ama Guddiga Dugsiga Cambridge (Cambridge School Committee), xagga safarka dibadda-gobolka ama dibadda-waddanka.

CPS iyo Guddiga Dugsiga Cambridge (Cambridge School Committee) mas'uul kama noqon doonaan kharashka la galo kana dambeeyo go'aanka qofka wehliya in uu ardayga ka qeybgala uu horay u diro guriga baddalkii taariikhda soo noqoshada la ballamiyay taasoo ugu wacan dabeecadda aan la ogolaan karin ee ardayga. Ardayda iyo waalidiintooda/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxay mas'uul ka yahiin burburka la gaarsiiyo hoteelada, hantida la kireysto ama hantida qofka. Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waa in ay raali ka yahiin in ay bixiyaan burburka uu geysto cunugooda iyo/ama ku taageeraan saraakiisha dugsiga in ay aruuriyaan lacagta loo baahan yahay in sidaas la sameeyo.

Xagga dhamaan safarada dibadda ee u baahan gaadiid, gaadiidka waa in laga qato shirkad caadi ah oo haysata shatti in ay ka shaqeyn karto Commonwealth of Massachusetts oo shatti ku haysato gaadiidka rakaabka lagana qaato Maamulka Ammaanka Gaadiidka Federaalka (Federal Motor Carrier Safety Administration), ama baabuur shatti haysta ay CPS ogolaatay ama gaadiidka dadweynaha, sida MBTA, bas, treen ama nooc kale oo ka tirsan gaadiidka dadweynaha. Dhamaan adeegyada tababarka ee la xariira safarada dibadda ama safarada dugsiga kafaalo qaado waa la raaco qaade shatti ka haysto Commonwealth of Massachusetta si uu u bixiyo adeegyada tababarka "charter" kana haysto Maamulka Ammaanka Qaadidda Baabuurka Federaalka (Federal Motor Carrier Safety Administration) oo lagu qaado qaadidda rakaabka. Dhamaan iibiyeyaasha bixiya

gaadiidka safarada dibadda ama safarada dugsiga kafaalo qaaday waa in ay keenaan caddeyn in wadahooda (wadeyaashooda) haystaan shattiga Commonwealth of Massachusetts si ay u wadaan baabuurta loo adeegsado gaadiidka safarada dibadda iyo/ama adeegyada kirada safarada dibadda. Dhamaan iibiyeyaasha gaadiidka waa in ay qaataan ceymiska qaanta, ugu yaraan $500,000 (shan boqol kun doolar) halkii dhacdo xagga dhaawaca soo gaara jirka. Ma jiro iibiye gaadiid la isticmaali doono si uu u bixiyo gaadiida iyo/ama adeegyada safarada dibadda ee la soo kireysto ama safarada dugsiga kafaalo qaado haddii lagu sifeeyo "shardi" ama "liito" sida uu soo saaro Maamulka Ammaanka Gaadiidka Baabuurta Federaalka (Federal Motor Carrier Safety Administration). Ma jiro wax ku jiro siyaasaddaan safarka dibadda oo loo qaadan karo in lagu mamnuuco safarada dibadda marka ardayga ku safraan socod.

Isticmaalka baabuurta gaarka loo leeyahay ama faananka la soo kireystay si ardayda loo geeyo ama laga soo celiyo safarada dibadda, munaasabadaha ama safarada dugsiga kafaalo qaado waa mamnuuc marka laga reebo marka lala kulmo degdeg dhab ah. Go'aanka laga gaaro in ay jirto arrin degdeg ah waxaa gaari doono Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga iyo/ama Hoggaamiyaha Safarka haddii Agaasimaha/Madaxa Qeybta Sare Dugsiga uusan joogin. Shaqaalaha iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ee isticmaala baabuurtooda waxay galaan halista in loo qabsado dhaawac kasta oo soo gaara ardayga inta uu ku jiro baabuurka.

Waa in horay loo sameeyo qorshaha jiifka iyadoo maskaxda lagu haayo ammaanka iyo sekuritiga iyo, marka ay suurtogal tahay, safarka ka dhexeeyo saacadaha habeenka barka iyo 6:00 a.m. waa in leyska ilaaliyo, jidadka safarka waa in ay in ku filan ku talo galaan boos ay wadeyaasha ku nastaan sida waafaqsan sharuudaha adeegga saadacadaha la shaqeeyo sida Federaalka iyo sida macquulka ah ee la ogol yahay iyo in ay xisaabta ku daraan suurtogalka daahidda taasoo ugu wacan cimilada, baabuurta iyo qodobada aan la saadaalin karin.

Tilmaamo cayiman oo ku saabsan safarada dibadda waxaa laga heli karaa bogga siyaasadda boggena internetka: www.cpsd.us

56. Talaalka

Sharciga gobolka wuxuu rabaa in ka hor inta aan la diiwaan gelinin, ardayda dugsiga waa in laga talaalo xiiq dheer, qufac, teetano, qaamo qashiir, jadeeco (Jadeecada Jarmalka), qaamo qashiir, iyo cagaarshow B iyo cuduro kale oo leysku daaran karo sida waaxda caafimaadka dadweynaha soo sheegto waqti ka waqti. Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka waxay mas'uul ka yahiin qaadashada tallaalka ugu dambeeyo.

57. Ka-qeybgalka Qoyska

CPS waxay aqoonsan tahay in qoysaska ay yahiin macalimiinta kowaad ee caruurtooda. Sida mid kasta oo naga mid ah uu rabo iyo in la xushmeeyo qoyskena iyo kala duwanaanta hiddaha, CPS waxay dhiirigelisaa arday kasta, xubinta qoyska iyo tababaraha in uu dareemo iyo xushmeeyo kala duwanaanta aadanaha sida ka jirta bulshada dugsiga oo idil. Qoysaska waxaa lagu dhiiri geliyaa in ay: (a) la socdaan waxa cunugooda barto; (b) su'aalo weydiiyaan waxbarashada cunugooda; iyo (c) taageeraan waxbarashada cunugooda. Ujeedada ku lug yeelashada qoyska CPS waa horumarinta iskaashi dhex mara guriga iyo dugsiga taasoo hubisa in dhamaan caruurta noqdaan kuwo ku guuleysto waxbarashada noloshooda oo idil. Si aad u heshid koobiga Siyaasadda Ku Lug Yeelashada Qoyska CPS (CPS Family Involvement Policy CPS), la xariir agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga.

58. Gudubka iyo Celinta

Guddiga Dugsiga Cambridge (Cambridge School Committee) wuxuu aqoonsan yahay in cunugga kasta u koro, caatifad ahaan, iyo caqli ahaan, qadar u gaar ah cunugaas iyo in cunug kasta loo baahan yahay in la siiyo fursad uu horumar joogto ah ku gaaro jawiga bulshada dugsiga ee la kulma baahida u gaarka ah. Ardayga ku dadaala in uu ku guuleysto dugsiga wuxuu u gudbi karaa darajada xigta marka sida ay u gartaan agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga, taasoo ku saleysan fikradaha laga helo shaqaalaha dugsiga iyo waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka, in horumarinta tahay maslaxadda ugu wanaagsan ardayga.

Ardayda waxaa laga filaa in ay horumar ka gaaraan heerarka darajada. Marka ardayga ku dhibtoodo in uu gaaro heerarka darajada, shaqaalaha dugsiga, ardayda, iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha waxay ka wada shaqeyn

doonaan in ay soo saaraan adeegyada taageerada si ardayga loogu kaalmeeyo in uu guuleysto. Ku celinta waa in loo qaato sida tallada ugu dambeyso, waxayna dhici doontaa kaddib marka aad looga taxadiro fikradda iyo fullinta qorshaha faragelinta celinta. Marka laga reebo ardayda xanaanada oo, da'da awgeed laga yaabo in lagu celiyo isla darajada sannad labaad, ardayga lama celin karo in ka badan hal mar ka hor inta uusan gelin dugsiga sare. Go'aanada la gaaray ee la xariira ardayda qabta IEP_yada waa in ay waafgaqsan yahiin natiijadaha Kooxda IEP. Go'aanka in ardayga la celiyo waxaa gaari doono agaasimaha dhismaha/madaxa qeybta sare dugsiga, marka ay la tashtaan xubnaha shaqaalaha ku haboon iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha. Heerarka dugsiga hoose iyo sare, haddii waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka qilaafaan go'aanka, agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga waxay qori doonaan warqad la rabo in la geliyo galka guud ee ardayga taasoo muujisa tallada ay bixiyeen agaasimaha/madaxa qeybta sare dugsiga una ogolaata waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka in ay soo jeediyaan go'aanka ugu dambeeyo. Heerka dugsiga sare, xaaladda isku qoridda darajada waxay ku xeran tahay isu keenidda buundooyinka ku habboon haddii ays sidaas gaarin natiijadaha ka soo baxa Kooxda IEP.

Cunug ku guuleystay oo dhamaystiray darajada lama celin karo ama in uu ku celiyo darajo si uu u hagaajiyo ama u fidiyo xaq u yeelashadiisa in uu ka qeybgalo brograamyada atleetikada ee dheeraadka ku ah manhajka.

59. Siinta Daawada la Qoro iyo Maamulka Xasaasiyadda Raashinka Halista Geliya Nolosha

Waa siyaasadda CPS in ay leedahay nidaam ay ku ilaaliso ammaanka ay dawooyinka la qoro ku siiso ardayda tagta CPS iyo si wax looga qabto arrimaha la xariira maamulka xasaasiyadda raashinka cabsi geliya nafta gudaha xaaladda dugsiga. Hababka taageersan siyaasaddaan waxa laga heli karaa: bit.ly/CPSPolicies. Haddii cunugaada u baahan yahay in la siiyo daawada la qoro maalinimada dugsiga ama qorshe lagu maamulo xassaasiyadda halista raashinka ee nolosha cabsi geliya, la xariir agaasimaha dugsiga/madaxa qeybta sare dugsiga.

60. Siyaasadda Fiyoobida

Guddiga Dugsiga Cambridge (Cambridge School Committee) wuxuu aqoonsan yahay xariirka ka dhexeeyo fiyoobida ardayga iyo shaqada u qabto ardayga iyo muhiimadda ay leedahay siyaasadda dhamaystiran ee ku saabsan fiyoobida dagmada.

Guddiga Fiyoobida

Guddiga Dugsiga wuxuu faray Maamulaha Dugsiyadaha (Superintendent of School) iyo cidda Maamulaha (Superintendent) u magacaabay in ay sameyaan Guddiga Fiyoobida (Wellness Council) taasoo ilo u noqon kartaa xagga fullinta iyo qiimeynta siyaasaddaan.

Tilmaamaha Nafaqada

Ujeedada dugsiga dagmada waa in dhamaan ardayda helaan fursado, taageero iyo dhiirigelin si ay u sameyaan xullashada nafaqo caafimaadka u roon maalinimada dugsiga una adeegsada cuntada, cuntada fudud iyo cabbitaan qeyb ka ah brograamka cuntada dugsiga, mararka kale inta ay socoto maalinta dugsiga sida raashinka iyo tarjamada nafaqada oo la mideeyay manhajka caafimaadka, beeraha dugsiga, iyo munaasabadaha dugsiga ee la qabto saacadaha dibadda dugsiga.

Brograamka adeegga raashinka dugsiga dagmada wuxuu ardayda u fududeyn doonaa in ay helaan raashin iyo cabbitaan kala duwan, la awoodo, nafaqo leh oo dadka soo jiita ee:

* La kullan baahida caafimaadka iyo nafaqada ardayda kuna adkeyso sharciyada cuntada ee u dagsan dugsiga USDA
* La kulan sharciyada u dagsan Nafaqada Dugsiga Massachusetts (Massachusetts School Nutrition), hadba sida loogu dabaqi karo
* Soo dhaweynta kala duwanaanta diinta, isirka iyo hiddaha ee ardayda xagga qorsheyn cuntada
* Bixinta xaalada nadiif ah, ammaan ah iyo fiican iyo waqti ku filan ardayda ay wax ku cunaan; iyo ugu yaraan 20 daqiiqo waqtiga qadada iyo ugu yaraan 10 daqiiqo quraac ah, kaddib marka la fadhiisto.
* La hubsado in ardayna uusan baahanin inta uu ku sugan yahay dugsiga

* Dugsiyada waxay raaci doonaan heerarka nafaqada ay dajiso Waaxda Caafimaadka Dadweynaha Massachusetts (Massachusetts Department of Public Health) xagga raashinka iyo cabbitaanka habboon sida mashiinada laga iibiyo, waxyaabaha lagu qaato warqadda ee laga helo makhaayadda qaxwadda, munaasabadaha dugsiga kafaalo qaado ama la xariiro dugsiga.
* Intaas kaddib, dugsiyada waxay haysan doonaan isla heerarka Massachusetts si loo siiyo miiska ku wareejinta, xoojiyaha iibinta, hawlaha aruurinta qaaraanka iyo munaasabadaha dugsiga kafaalo qaado ama la leeyahay xariir.

Aqoonta Jimicsiga iyo Hawlaha Jimicsiga

Ujeedada dugsiga dagmada waxay tahay in dhamaan ardayda la siin doono fursado, taageero iyo dhiirigelin si ay u noqdaan kuwo jir ahaan firfircoon maalin dugsiyeedka oo idil iyaga oo qaata fasalada aqoonta jimicsiga (PE), ka hor inta aan la bilaabin hawlaha dugsiga ama kaddib, gaadiid shaqeeya iyo mideynta jimicsiga iyo manhajka aqoonta meesha ay ku habboon tahay. Intaas kaddib, waxaa jiri doono cayaaro iyo waqtiyo nasasho ay maalin kasta qaataan ardayda K-8.

Waaxyada Caafimaadka, Jimicsiga iyo Atleetikada waxay dhamaan ardayda, kana mid ah ardayda itaalka darran, kuwa qaba baahida daryeelka caafimaadka khaaska iyo ku jira xaalado waxbarasho kale siin doonaan fursado kala duwan xagga jimicsiga:

- Ku adkeyso ama ka badso Qaabka Manhajka Caafimaadka Dhamaystiran ee Massachusetts (Massachusetts Comprehensive Health Curriculum Framework) iyo Ururka Isboortiga iyo Heerarka Jimicsiga Qaranka (National Association for Sport and Physical Education Standards).
- La hubsado in ardayda bartaan xirfadaha hawlahooda inta ay nool yahiin
- Ardayda la siiyo fursad ay jimicsiga uga qeybgalaan brograamyo sida, balse kuma eka, atleetikada ka dhexeeyo cayaaraha ardayda iyo kuwa ka dhexeeyo dugsiyada, iyo hawlaha loo heli karo dhamaan ardayda, iyadoo aan la fiirinin heerka xirfadda, sida kuwa ka dhexeeyo ardayda iyo naadiyada jimicsiga.
- Ardayda lagama celin doono nasashada ama lagama reebi karo doono jimicsiga marka laga reebo haddii ka saaridda tahay lagama maarmaan si loo badbaadiyo caafimaadka, ammaanka, iyo maslaxadda ardayga, ardayda kale iyo shaqaalaha iyo/ama xariir la leeyahay ardayda ka qeybgasha asluubta, waqtiga nasashada ama fasalka jimicsiga, taaso jebineyso heerarka asluubta ku qoran Buugga Xuquuqda iyo Mas'uuliyadda iyo/ama iyo/ama sharciyada ku saleysan dugsiga ama siyaasadaha Dugsiyada Dadweynaha Cambridge (tusaale, Siyaasadda ka soo Horjeedo Gardareysiga, siyaasadda ka soo horjeedo kadeedka, siyaasadda ka soo horjeedo takoorka, iwm.) ama la bixiyay ruqsadda laga qaato waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka si ardayga looga saaro ama la geeyo meel u gaar ah.
- Lama diidi doono ama lagama dhigi doono waajib sida nooc ka mid ah ciqaabta la siiyo qofka.
- Dhamaan ardayda ku jirto darajaooyinka K-8 waxaa la siin doonaa ugu yaraan 20 daqiiqo oo nasasho ah, waxaa si firfircoon u kormeera shaqaale la tababaray, dibadda sida la jecel yahay, halkaas ay dugsiyada ku dhiiri gelin doonaan hawlaha jimicsiga, dhexdhexaad ilaa adag, lagana soo jeediyo afka ilaa siinta boos iyo qalab.
- Ardayda looma diidi doono nasasho si ay ula kulmaan shaqaalaha tababarka, dhamaystiraan mashaariicda ama gadaal ka sameyaan hawsha haddii aysan jirin daruufo aan caadi ahayn.
- Ardayda iyo shaqaalaha waxaa lagu dhiiri gelin doonaa in ay si firfircoon uga qeybqaataan gaadiidka lagu tago loogana soo nqodo si loo taageero nolol firfircoon oo qabta caafimaad laga bilaabo da' hore iyaga oo ka shaqeeya in ay istimaalaan baskiilka iyo socod ku tagaan dugsiga iyo hab kale oo ku wanaagsan gaadiidka.

Hawlaha Aqoonta Caafimaadka iyo Nafaqada

Ujeedooyinka dugsiga dagmada ee la xariira hawlaha aqoonta caafimaadka iyo nafaqada waxaa ka mid ah

- Ardayda waxay heli karaan dhiiri gelin, taageero iyo waxbarasho si ay u qaataan dabeecado caafimaad qaba iyaga oo adeegsada aqoonta caafimaadka, sida aqoonta nafaqada iyo barashada caatifadda bulshada.

- Ardayda waxay qaataan aqoonta caafimaadka ee barta xirfadaha ay u baahan yahiin si ay u qaataan una yeeshaan dabeecado u wanaagsan caafimaadka.
- Ardayda waxay si joogto ah u helaan fariimaha caafimaadka ee ku saabsan dhamaan dhinacyada brograamka dugsiga.
- Heerarka manhajka aqoonta caafimaadka iyo tilmaamaha waxay ka hadlaan nafaqada iyo jimicsiga labadaba.
- Nafaqada waxaa lala mideeyay manhajka aqoonta caafimaadka. Shaqaalaha bixiya aqoonta caafimaadka iyo nafaqada waxaa la siin doonaa tababar ku habboon
- Manhajka aqoonta caafimaadka iyo nafaqada waxay la safnaan doonaan Nidaamka Manhajka Caafimaadka Dhamaystiran ee Massachusetts (Massachusetts Comprehensive Health Curriculum Framework), Heerarka Aqoonta Caafimaadka Qaranka (National Health Education Standards) iyo Heerarka Aqoonta Jinsiga Qaranka (National Sexuality Education Standards, wuxuuna samayn doonaa xariirinta ka dhexeyso aqoonta caafimaadka, brograamyada cuntada dugsiga iyo adeegyada bulshada la xariirto. Shaqaalaha xanaanada ilaa darajada 5aad waxaa la siin doonaa tababarka aqoonta caafimaadka dagmada.
- Horumarinta nafaqada waxay taageeri doontaa iyo waxay xoojin doontaa aqoonta nafaqada fasalka marka cuntada lagu cuno gudaha makhaayadda qaxwada dugsiga lagana helo adeegga raashinka dugsiga dagmada, la kaashado Waaxda Caafimaadka Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Health (Caafimaadka Department) iyo fursadaha loo adeegsado koriimada, beeridda iyo dhadhanka orgaanigga fruttada iyo khudaarta lagu abuuro beeraha dugsiga.
- Hadba sida loogu celcelin karo, beeraha dugsiga waxaa loo daryeeli doonaa sida ilo laga helo caafimaad iyo nafaqo, dhamaan beeraha waxaa laga helaa fruttada iyo khudaarta la cuni karo iyo isticmaalka dhaqanka orgaanigga.

61. Dhaawaca Madaxa ee la Xariira-Isboortiga Iyo Jugta

Dhamaan dugsiyada hoos yimaada sharciyada Ururka Atleetikada ka Dhexeeyo Dugsiyada Massachusetts (Massachusetts Interscholastic Athletic Association (MIAA) wuxuu sharciga gobolka ka rabaa in cayaartoyda ardayda iyo waalidiintooda/ilaaliyeyaasha, tababareyaasha, agaasimeyaasha atleetikada, kalkaalinta dugsiga, iyo takhaatiirta in ay bartaan natiijada ka dambeyso dhaawacyada madaxa lana qaato brograamyada tababarka iyo qoraalada. Sharciga wuxuu rabaa in cayaartoyda iyo waalidiintooda/ilaaliyeyaashooda/bixiyeyaashooda daryeelka in ay ogeysiiyaan tababareyeyaashooda dhaawacyada horay u soo gaaray, bilowga xilliga. Haddii ardayga-cayaartoyga suuxo inta ay socoto cayaarta ama ku-celcelinta, sharciga wuxuu iminka faraa in ardayga dibadda looga saaro cayaarta ama ku-celcelinta, wuxuu rabaa shahaado qoran oo laga soo qaaday aqoonyaanka caafimaadka ee shatiiga haysta si uu "ugu soo noqdo cayaarta." Gaar ahaan, sharciyada la soo saaray ee hoos yimaada sharciga gobolka waxay, qeyb ahaan, sheegaan "(a)rday kasta, oo inta ay socoto ku celcelinta ama tartanka, soo gaarto dhaawaca madaxa ama jug la tuhunsan yahay, ama muujiya calaamadaha jugta, ama lumiya miirka, xatta muddo gaaban, waxaa laga saari doonaa ku celcelinta ama tartanka isla markiiba mana ku soo noqon karo ku celcelinta ama tartanka maalintaas." 105 C.M.R. 201.010(B).

Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka iyo ardayda qorsheysto in ay ka qeybgalaan brograamka cayaartoyda waa in ay sidoo kale qaataan koorso lacag la'aan ah oo laga bixiyo internetka. Waxaa jira labo koorso oo laga qaato internetka lagana heli karo dhamaan macluumaadka uu sharciga u baahan yahay. Midka kowaad waxaa laga helaa Tababareyaasha Dugsiga Sare Federationka Qaranka (National Federation of High School Coaches): www.nfhslearn.com

Koorsada labaad ee laga qaato internetka waxaa bixiya Xarumaha kantaroolka iyo Ka-Hortagga Cudurka (Centers for Disease Control and Prevention) ee laga helo: www.cdc.gov/headsup

Jugta madaxa waa baddalaad loo geystay xaaladda madaxa taasoo ka dhallata marka maskaxda la gaarsiiyo jug, gudaha lafta madaxa, taasoo ugu wacay jug soo gaarta madaxa ama jirka. Waa mid ka mid ah dhaawacyada aad u adag ay la kulmaan aqoonyaanada caafimaadka bacdamaa calaamadaha iyo waxyaabaha laga arko aysan mar kasta ahayn ku toos u soo baxa iyo waxyeelahada iyo cuslaanta dhaawaca ahaan doonto mid adag si loo ogaado. Calaamadaha la xariira jugta madaxa waxaa ka mid ah: madax xanuun, dhawakhsanaan, wareer, daal, labbolabbo, iyo jaha wareer. In ka yar boqolkii toban dhaawacyada waxay lumiyaan miirka mana aha shay tilmaama sida jugta madaxa u culus tahay. Dhaawaca kaddib, cayaartoyga waxaa kaloo dhici karto in uu la kulmo dhibatooyin kale sida dareenka iftiinka iyo dhawaaqa, ilowshaha, daalka iyo isbaddalada ku yimaada caatifadda sida walwalka ama niyad jabka.

Inta badan atleetikada jugta ka gaarto madaxa waxay si buuxdo u bogsan karaan hase ahatee waxaa loo baahan yahay in maskaxda la siiyo waqti ay ku bogsato ka hor inta aysan soo gaarin jug kale; hase ahatee, in leysku haleeyo warbixinta uu qof ahaan soo gudbiyo atleetka, calaamada si loo ogaado ka-bogsashada dhaawaca kuma filna bacdamaa alteetyo badan lama socdaan calaamadaha iyo muujinta dhaawaca, sida jugta madaxa u darran tahay ama waxaa dhici karto in ay dareemaan cadaadis kaga yimaada tababaraha, waalidiinta/ilaaliyeyaasha, asxaabta Kooxda (Teammates) ama dadka kale si uu ugu soo noqdo cayaarta sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtogalka ah. Waxay u badan tahay in mid ka mid ah ama ka badan qodobadaan dhallin doonaan in la yareysto baarista dhaawaca kaddibna lala kulmo xaaladda xaalad aan bislaanin. Cilmi baarista waxay muujisay in dhallinta atleetikada jugta ka soo gaartay madaxa ee ku soo noqda cayaarta si ay u cayaaran ka hor inta maskaxdooda aysan bogsanin waxay aad ugu nugul calaamadaha ka dambeeyo jugta ee socda muddada dheer ama, kiisaska aan badanaa lala kulmin, musiibada dhaawaca soo gaara xididdada sida Calaamadda Saamaynta Labaad (Second Impact Syndrome). Sidaas darteed, CPS waxay dhiirigelisaa daryeelka soo socdo marka cayaartoyga soo gaarto jugta madaxa, munaasabad isboorti uu dugsiga kafaalo qaado.

1. Marka dhaawac lala kulmo, cayaartoyga dhaawacan waa in uu isla markiiba dhaawaca u soo sheego tababaraha cayaartoyga, hoggaamiyaha iyo kalkaalinta dugsiga.
2. Marka la kulmo dhaawc, sida dhaawaca soo gaara madaxa ama la tuhunsan yahay jugta soo gaarta madaxa, ama muuqdaan calaamadaha jugta, ama miirka la beelo, waxaa la ogeysiin doonaa waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka kaddibna cayaartoyga dhaawaca soo gaaray waa in uu tago qolka degdegga isbitaalka xaafadda ama xaaladooda la fiiriyo takhtarka daryeelka aasaasiga si loo hubsado in aysan jirin baahi loo qabo daryeelka caafimaadka degdegga.
3. Isgaarsiinta waa muhiim.
   Kaddib Kooxda daryeelka oo ka kooban takhtarka aasaasiga atleetikada iyo waalidiinta/ilaaliyeyaasha iyo tababaraha atleetikada CPS, kalkaalinta dugsiga, macalimiinta, madaxa tababbaraha, iyo agaasimaha atleetikada waa in ay la socdaan calaamadaha dhaawaca.
4. Ka qeybgeli cayaartoyga dhaawacmay garaaca taasoo isu keenta calaamadaha warbixinta qofka, miisaanka iyo baaritaanka dareenka garashada. Qiimeynta leysu keenay waxay bixin doontaa qiimeyn xasaasi ah iyo waaqici ah kuna saabsan waxyeelada ka dhasha jugta madaxa taasoo ku kaalmeyn doonto in is wanaagsan loo ogaado marka ay ammaan u tahay cayaartoyga in uu ku noqdo cayaarta.
5. Cayaartoyga dhaawacan looma ogolaan doono in uu ku noqdo cayaarta ama in uu ku celceliyo ilaa tababare shatti haysta kana socda CPS uu u fasaxo cayaartoyga in uu ku noqdo cayaarta.

62. Siyaasadda HIV/AIDS

CPS ma samayso takoor ku saleysan HIV/AIDS ama xariirka lala leeyahay qof kale oo qaba HIV/AIDS. Caruurta ku nool HIV/AIDS waxay xaq u leeyahiin isla xuquuqda iyo axsaanka la xariira imaashada iyo ka qeybgalka waxbarashada CPS gudaheeda sida caruurta kale ee tagta dugsiyada CPS. Shaqaalaha iyo/ama ardayda la nool HIV/AIDS lagama rabo in ay kashifaan xaaladda HIV/AIDS. Kashifaadda noocaas waxaa la sameyaa oo keliya marka ogolaasho qoran laga helo qofka ama waalidka/ilaaliyaha/bixiyaha daryeelka qofka haddii uu ka yar yahay toban iyo sideed (18) sanno. Halista gudbinta HIV gudaha dugsiga aad ayay u

hooseysaa marka si joogto ah loo raaco tilmaamaha kantaroolka cudurka guud iyo dhamaan shaqaalaha waxaa laga rabaa in ay si joogto ah u qaataan iyo raacaan taxadir guud dhamaan dugsiyada iyo waqt kasta. Koobi dhamaystiran oo ku saabsan siyaasadda dugsiga dagmada ka qabo HIV/AIDS waxaa lagu soo dhajiyaa bogga internetka dugsiga.

63. Tababarka Ardayda Laga Siiyo Mukhadaraadka, Qamrada, Tubaakada iyo Ka Hortagga Ku Xadgudubka Maadada

Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay darajo kasta siiyaan brograamyo ku habboon da'da, ka soo horjeedo mukhadaraadka, qamrada, tubaakada iyo aqoonta ku xadgudubka maadada iyo ka hortagga ku xadgudubka maadada. Ujeedooyinka brograamkaan waxbarashada waxay tahay in ardayda wax laga baro ciqaabta isticmaalka iyo ku xadgudubka maadada, kana mid ah ciqaabta sharciga, caatifadda, cilmu nafsiga iyo ciqaabta qamrada, tubaakada iyo isticmaalka mukhadaraadka kale. Brograamka waxbarashada wuxuu raadiyaa in uu ardayda ku kaalmeeyo in ay yeeshaan awoodda ay ku gaaraan go'aano xogogaal ah, in ay yeeshaan xiilado shaqeeyo si ay ula qabsadaan murugada caatifadda, iyo in ay iska caabiyaan cadaadiska asxaabta in la isticmaalo qamrada, tubaakada, iyo mukhaadaraadka kale. Koobiga siyaasadda dugsiga dagmada oo idil waxaa laga heli karaa bogga internetka dugsiga dagmada.

64. SBIRT (Baarista, Faragelinta Kooban iyo Tixraaca Daaweynta)

Si loo kaalmeeyo oo looga hortago ardayda in ay isticmaalaan maado marka horaba ama si loo farageliyo isticmaal hore, Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay isticmaalaan wareysi ku saleysan baarista lagu magacaabo SBIRT lana siiyo ardayda darajada sagaalaad oo ku saabsan isticmaalka qamrada, xashiishka iyo mukhadaraadka kale. Kullamada baarista waxay qaataan shan daqiiqo, waxaa loo fulliyaa si qarsoodi ah, su'aalo gaar ah oo ka socda kalkaalinta dugsiga ama xubin ka tirsan shaqaale la tababaray oo ka socda waaxda hoggaaminta dugsiga sare.

Qofka fulliya baarista hore wuxuu war celin gaaban siin doonaa arday kasta oo soo sheega isticmaalka maadada ama ku jira halista ku xadgudubka maadada mustaqbalka iyo dhamaan ardayda ka qeybgasha baarista hore waxaa la siin doonaa qoraalo waxa laga barto iyo liiska ilo. Haddii loo baahdo, ardayga waxaa loo diri doonaa kalkaaliyaha dugsiga ama xubin ka tirsan kooxda si loo sii qiimeeyo.

Natiijadaha baarista laguma soo daro diiwaanka dugsiga ardayga iyo mana jiro talaabo dishibiliin la qaado kana dambeysa natiijadaha ka soo baxa baaraha, mana dhici doonto in natiijadaha ka soo baxa baarista lala qeybsado shaqaalaha dugsiga marka laga reebo kooxda SBIRT.

Waalidiinta/ilaaliyeyaasha/bixiyeyaasha daryeelka ee ardayda waxay kaloo heli doonaan ogeysiis qoran ka hor inta aysan u tagin baaraha, waxayna xaq u yeelan doonaan in ay cunugooda ka saaran baarista.

65. Qiimeynta Manhajka

Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay adeegsadaan qiimeyn kala duwan inta uu socdo sannad dugsiyeedka si loo aruuriyo caddeynta in ardayga fahmo iyo si loo ogeysiiyo go'aanada tababarka. Inkastoo tababareyaasha adeegsadaan qiimeynta maalin kasta ee la saffan ujeedooyinka tababarka, Dugsiyada Dadweynaha Cambridge waxay bixisaa MCAS 2.0 iyo qiimeynta caadiga dagmada ee loo isticmaalo in lagu ogaado sida dhamaan ardayda uga shaqeyaan wadarta maadada iyo kooxaha hoose u gaaraan horumar marka loo fiiriyo dhamaan ardayda iyo bixinta macluumaadka ku saabsan godadka ku jir manhajka iyo baahida barashada aqoonta.

Macluumaad tafatiran oo ku saabsan jadwalka qiimeynta darajooyinka xanaanada ilaa darajada 5aad, darajooyinka 6 ilaa 8 iyo darajooyinka 9 ilaa 12 waxaa lagu soo dhajiyaa bogga internetka dugsiga dagmada bit.ly/CPSci waxaa kaloo laga heli karaa agaasimaha dugsiga cunugaada/madaxa qeybta sare dugsiga.

66. Mamnuuca Tubaakada la Isticmaalo Gudaha Xerada Dugsiga

Isticmaalka dhamaan noocyada badeecada tubaakada gudaha dhismooyinka dugsiga, hay'adaha dugsiga, ama xerada dugsiga ama basaska dugsiga ee qof kasta, kana mid ah shaqaalaha dugsiga iyo ardayda, waa mamnuuc mar kasta. Erayga "maadooyinka tubaakada" waxaa loola jeedaa tubaakada qaab kasta ha noqoto, kana mid ah balse kuma eka sigaarka, sigaarka buuran, tubaakada la jiido, tubaakada la calaajiyo, sigaarka-e, uumiyaha nikotiinka, maadooyinka tubaakada aan qiiqin iyo maadooyinka kale ee la midka ah. Siyaasaddaan waxay la xariirtaa dhamaan munaasabadaha dugsiga kafaalo qaado iyo/ama la xariira dugsiga sida cayaaraha atleetikada, haddii munaasabadahaas lagu qabto hantida dugsiga dagmada ama dhul ay leedahay. Hantida dugsiga iyo/ama dhulka waxaa lagu sifeyaa dhamaan dhulka ilaa dhinacyada lagu socdo ee ku wareegsan dugsi kasta. Gaar ahaan, dhulka Cambridge Rindge iyo Latin School waxaa ka mid ah dhulka Maktabka Dadweynaha Cambridge (Cambridge Public Library) ee loo haysto in ay la mid yahiin dhulka dugsiga xagga dhamaan siyaasadaha ardayga.

Xubin ka tirsan shaqaalaha oo loo arko in uu jebiyay siyaasadaan waxaa laga qaadi doonaa talaabo dishibiliiin.
Sida ku saleysan daruufaha gaarka ee ku saabsan jebinta sharuudahaan, waxaa dhici karto in ardayga lagu qaado dishibiliin iyo waxaa dhici karto in loo diro brograam ku habboon Magaalada/brograamka aqoonta caafimaadka oo ku saabsan kaalmada tubaakada iyo/ama ku xadgudubka maadada.

Intaas kaddib, sida waafaqsan siyaasadda Magaalada Cambridge xagga dhisidda "meel aan lagu cabbin sigaar" agagaarka dhismooyinka dawladda hoose, waxaa jiri doono "meel aan sigaar lagu cabbin" oo ku taal dibadda dhamaan meelaha laga soo galo, meelaha dabaysha ka soo gasho iyo dariishadaha ilaa dhismaha Dugsiyada Dadweynaha Cambridge ilaa masaafo gaarta labaatan (20) cag.